

Xafiiska Hantidhowrka Guud



Dowlad Goboleedka Galmudug ee
Soomaaliya

Warbixinta Hantidhowrka Sanadlaha ah
ee Sannad Maaliyadeedka 2018

Waxaa Baarlamaanka Loo Soo Bandhigay 18ka
Julay 2020

Guddoomiyaha Golaha Baarlamaanka
Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya
Dhuusamareeb, Soomaaliya

Mudane Guddoomiye,

Iyada oo la raacayo qaybta 32(3) ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka (PFM) 2017 iyo qaybaha 30, 32 iyo 33 ee Xeerka Hantidhowrka ee 2018 ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS), waxaa sharaf ii ah in aan kuu soo gudbiyo Warbixinta Hantidhowrka ee Sanadlaha ah ee 2018 ee Xafiiska Hantidhowrka Guud (OAG) si loo horgeeyo Baarlamaanka Dowlad-goboleedka.

Arrimaha ugu waaweyn ee warbixintan ku xusan ayaa kasobaxay baarista sannadlaha ah ee xisaabaha dowladda iyo baaqiga dowlad-goboleedka, iyo sidoo kale habraacyada loo adeegsaday tijaabinta fulinta sharciga ah ee miisaaniyadda dowladda ee 2018.

Hawlaha ugu weyn ee uu qabto Xafiiska Hantidhowrka Guud ayaa ah in uu baaritaan madax-bannaan oo tayo sare leh ku sameeyo waaxaha dowladda si kor loogu qaado dhaqaalaha, hufnaanta iyo taabogalnimada adeegsiga kheyraadka iyo in uu baarlamaanka gaarsiyo warbixin lagu kalsoonaan karo oo ku saabsan adeegsiga maaliyadaha guud ee kharash-gareeyayaasha miisaaniyadda sida ku cad Qaybta 6(2) iyo Qaybta 7(1) ee Xeerka Hantidhowrka ee 2018.

Shaqadeenna ayaa diiradda lagu saaraa bixinta hubaal macquul ah si maaliyadaha dowladda loo qorsheeyo, loo maareeyo, oo loo adeegsado iyada oo si habboon looga soo warbixinayo. Sidoo kale waxaan si dhow ula shaqeynaa Baarlamaanka si aan u ballaarino kartideenna oo u bixinno macluumaad tayo sare leh. Iyada oo maanka lagu hayo arrintan, ayaa waxaa mudan in la xuso warbixintani in ay tahay middii labaad ee uu soo saarey Xafiiska Hantidhowrka Guud (OAG).

Warqaddan ayaa waxaa ku lifaaqan:

- Warbixinta Sanadlaha ah ee 2018 ee Xafiiska Hantidhowrka Guud (OAG).
- Bayaamada Maaliyadeed ee 2018 ee GSS iyo Ra'yiga Hantidhowrka ee la socda (Lifaaqa 1aad).
- Warqadda Maamulka ee Hantidhowrka ee 2018 oo ay ku qoran yihiin waxyaabihii la oggaadey oo faahfaahsan iyo soo-jeedimada sii-wanaajinta iyo jawaabaha rasmiga ah ee ka yimid Wasaaradda Maaliyadda (Lifaaqa 2aad).

Hantidhowrka sannad maaliyadeedka 2018 ayaa la sameeyay iyada oo la kaashanayo shirkad hantidhowr gaar loo leeyahay oo ah sida ay xaaladdu ahaydba hantidhowradii 2016 iyo 2017. Qabanqaabooyinkan ayaa u suurageliyay shaqaalaheenna in ay waayo-aragnimo helaan iyo in kartidoodu ay dhisanto. Sidaa daraadeed, ayaa waxaan qorsheynaynaa in aan hantidhowrka sannadka 2019 aynu sameyno annaga oo aan wax taageero ah ka helaynin shirkad hantidhowrka sameysa oo gaar loo leeyahay.

liidoshooyinka jira ee lagu cadeeye warbixinteyda sanadlaha ah waxaa aan soo bandhigay qaabki loo sixi laha. Si talooyinkan ay u sii wanaajiyaan shaqada dowladda ayaa waxaa loo baahan yahay in la hirgeliyo. Sidaa daraadeed, ayaa waxaa aad iyo aad muhiim u ah Baarlamaanka iyo Dowladdaba in ay wax ku biirriyaan isla-xisaabtanka maamulka dowladda iyo wax ka qabashada talooyinka uu hantidhowrka soo jeediyay.

Ugu dambeyn, waxaan jeclaan lahaa in aan Baarlamaanka uga mahadceliyo taageerada joogtada ah ee ay u fidiyaan Xafiisk Hantidhowrka Guud iyo iskaashiga wanaagsan ee ay Guddiyada Baarlamaanka nagala dhaxeeya si aan uhubino hadafka xafiiska hantidhowrka. Sidoo kale waxaan u mahadcelinayaa shaqaalaha iyo maamulka sare ee hay'adaha Dowladda oo hantidhowrayaasheenna kala shaqeeyay fulinta ujeeddooyinka baaritaankeenna iyo sidoo kale Baker Tilly, oo ah shirkadda hantidhowrka ee gaarka loo leeyahay ee gacanta naga siisay fulinta hannaanka hantidhowrka.

Waxaan rajeynayaa warbixintan in ay sawir sax ah ka bixin doonto si loo fahmo xaaladda hadda ay ku sugan tahay maaraynta iyo maamulka maaliyadaha dowladda'

Mahadsanid

Xaashi Cusmaan Maxamed



Hantidhowrka Guud

OG;

- 1.Madaxweynaha Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya
- 2.Wasiirka Maaliyadda Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya

Tusmada

Warqadda Faafinta	2
1. Nuxurka Warbixinta oo Kooban.....	5
1.1 Ku Saabsan Xafiiska Hantidhowrka Guud (OAG).....	5
1.2 Ra'yiga Hantidhowrka	5
1.3 Waxyaabihii Ugu Muhiimsanaa ee La Oggaadey	6
1.4 Gebaggabo Guud	8
2. Hordhac.....	9
2.1 Mas'uuliyadaheenna.....	9
2.2 Caqabadaha Hor-taagan Xafiiska Hantidhowrka Guud ee GSS.....	10
2.3 Habka Aynu Baaritaanka/Hantidhowrka u Sameyno.....	10
2.4. Ereyada Hantidhowrka ee Muhiimka ah	10
3. Waxyaabihii Ugu Waaweynaa ee Hantidhowrka Lagu Oggaaday	11
3.1 Ra'yiga dhexdhexaadka ah.....	11
3.2 Dakhli Ururin:	12
3.3 Kharashaadka.....	13
3.4 Lafogurista Miisaaniyadda Dowlad-goboleedka	14
3.5 Wax-soo-iibsiga	17
3.6 Maareynta Hantida	17
3.7 Liidasho Ka Jirta Jaangooyooyinka iyo Siyaasadaha ICT-ga	17
3.8 Ka gaabinta hirgelinta soo-deejimadii hantidhowrka ee sannadkii hore	18
Lifaaqa 1aad – Bayaamada Maaliyadeed ee Iskudhafan ee La Baarey ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS) Sannadkii Dhammaadey 31ka Disembar 2018.....	20
Lifaaqa 2aad – Warqadda Maamulka ee Kama Dambeysta ah. Warbixinta Hantidhowrka Madaxa-Bannaan Ee Ku Saabsan Baaritaanka Dowlad-Goboleedka Galmudug Ee Soomaaliya (GSS) ee Sannadkii Dhammaadey 31ka Dismabar 2018.....	21

1. Nuxurka Warbixinta oo Kooban

1.1 Ku Saabsan Xafiiska Hantidhowrka Guud (OAG)

Warbixinta Hantidhowrka Sannadlaha ah ee 2018 ayaa ka kooban natiijooyinkii ka soo baxay hantidhowrka Bayaamada Maaliyadeed ee Sannadlaha ah ee 2018 iyo waxyaabihii ugu muhiimsanaa ee lagu oggaadey baaritaannada lagu sameeyey dhammaan xisaabaha dowladda ee lagu Lagu qarash gareeyey miisaaniyadda Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya ee 2018.

Qaybta 78 (b) ee Dastuurka Galmudug ayaa wuxuu dhigayaa in Xafiiska Hantidhowrka Guud uu yahay hay'ad madax-bannaan oo shaqadeeda ugu muhiimsani ay tahay in ay noqoto Hantidhowrka dibedda ee Dowlad-goboleedka. Qaybta 32(3 iyo 4) ee xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka (PFM Act) ee 2017 ayaa wuxuu dhigayaa in Hantidhowrka Guud (AG) uu dib-u-eego Xisaabta Kama Dambeysta ah ee Miisaaniyadda Mideysan ee uu soosaarey Wasiirka (Maaliyadda) iyo in uu warbixinta hantidhowrka ee la socota Xisaabta Kama-dambeysta ah u soo gudbiyo Baarlamaanka kama dambeys afar bilood ka-dib marka uu ka helo Xisaabta Kama-dambeysta ah ee aan la baarin Wasiirka. Waxay sidoo kale dhigaysaa in hantidhowrka Guud uu warbixinta hantidhowrka ku faafiyo Faafinta Rasmiga ah uuna ka dhigo warbixin ay heli karaan Baarlamaanka iyo dadweynahaba mudo hal bil gudaheeda ah marka la dhammeeyo warbixinta hantidhowrka ee la sheegay. Intaa waxaa dheer, qaybta 30(6) ee Xeerka Hantidhowrka ee 2018 waxa ay waajibineysa Hantidhowrka Guud in uu ku daro warbixintiisa:

- ra'yigiisa dhabta ah ee miisaaman ee xisaabaha dowladda ee mideysan iyo kuwa kala-soocan;
- waxyaabihii la ogaaday ee mugga leh iyo soo-jeedimada;
- nusqaamaha/daldaloolada uu lehayay nidaamka kantaroolka gudaha;
- faahfaahinnada diiwaannada aasaasiga ah ee aan la joogteyn; iyo
- lacag kastoo la bixiyay iyada oo aan loo eegin tixgelin dhaqaale ama waxtar.

Baaritaanada xafiiska Hantidhowrka waxaa loo sameeya si waafqasan jaangooyooyinka caalamiga ah ee hantidhowrada aduunka ee loogu tala galay Baarisyada maaliyadeed iyo tan sharciyeed si wada jir ah loo qabto.

1.2 Ra'yiga Hantidhowrka

Waxaannu baarney Bayaamada Maaliyadeed ee GSS ee sannadkii dhammaadey 31ka Disembar 2018, oo ka kooban Warbixinta mideysan ee lacag Qabashada iyo lacag bixinta, Warbixinta mideysan ee isbar bardhigida qadar miisaaniyadeedkii la dejiyey iyo tan rumowday iyo sidoo kale qoraalada faah faahsan ee warbixinta maaliyadda kadibna waxaa kasoo saarnay **ra'yi hantidhowr ee dhexdexaad ah**. Bayaamada maaliyadeed ayaa waxaa loo arkay in ay badanaaba waafaqsanyihiin qodobbada Xeerka PFM ee 2018 iyo

Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda ee loo yaqaanno *International Public-Sector Accounting Standards (IPSAS)* – Warbixinta Maaliyadeed ee Ku Saleysan Xisaabaadka Kaashka ah. Ra’yiga Hantidhowrka oo dhammeystiran waxaa uu ku jiraa (oo la socdaa Bayaamada Maaliyadeed) ee Lifaafa 1aad – lambarka bogga 4 aad.

Waa suuragal in Bayaamada Maaliyadeed ee 2018, in sida loo soo bandhigay, aysan si caddaalad ah u metalin hawlaha maaliyadeed ee dowladda marka la eego hal meel o muhiim ah; lacag-bixinno ay wadartoodu dhan tahay **\$1,155,147, oo u dhigma 54%, guud ahaan lacag-bixinnada sannadkii 2018** ee lagu sheegay Bayaanka Maaliyadda Iskudhafan ee Qabashada iyo Bixinta Lacagaha, ayaan lahayn caddeymo ku filan in lagu taageero macaamulaadkan. Caddeymahaasi la’aantooda suuragal ma aha in la sheego lacag-bixinnadani in si sax ah loo shaaciyay. Qarashaadka la bixiyey sanadkan iyadoo wax cadaymo ah loo haynin ayaa si mug leh uga badan kuwa sanad Maaliyadeedka hore ee 2017 markaas oo la bixiyey qadar dhan \$377,909 (7%) iyadoo aan loo haynin wax cadaymo ah.

1.3 Waxyaabihii Ugu Muhiimsanaa ee La Oggaadey

Nuxurka kooban ee waxyaabihii ugu muhiimsanaa ee la oggaadey intii lagu guda jiray baaritaanka hantidhowrka ayaa hoos lagu soo bandhigay. Arrimahan ayaa sidoo kale si weyn loogu faahfaahiyay, Warqadda Maamulka ee Kama-dambeysta ah ee Lifaafa 2aad.

Dakhli Ururin

Dowladdu horumar wanaagsan kama gaarin marka la eego Kor u qaadista dakhli ururinta. Dakhli ururinta Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya ee sannadkii 2018 ayaa hoos u dhacday (\$460,916) ama 19% marka loo eego sanadka 2017. In kastoo xasillooni-darro siyaasadeed ay tahay arrinta ugu weyn ee sababta u ah hoos-u-dhaca dakhli ururintan haddana arrimo kale ayaa jira. Tusaale ahaan:

- Dakhli ururinta ayaa weli la sameeyaa iyada oo la adeegsanayo nidaam gacamaha lagu sameeyo kaas oo ay suuragal tahay in ay ka dhacaan khaladaad iyo ilduuf aadame, khiyaannada si wanaagsan looma kantaroollo waxaanna jirta halis sare oo ah in xisaabaha/xisaabaadka si aan sax ahayn loo sameeyo loona diiwaangeliyo.
- Xaanshida ama warqada iswaafajinta dakhliga ee la adeegsaday ma muujin diyaariyaha, dib-u-eegaha ama ansixiyaha si loo qeexo kala-sooca waajibaadka ee hannaanka dakhli ururinta iyo diyaarinta, dib-u-eegista iyo ansixinta iswaafajinta in la sameeyay waqtigii loo baahnaa. Iswaafajinta noocaas ahi la’aanteed khalad kasta (ula-kac ah ama si aan ula kac eheen) ayaa dhici karta in aan la oggaan oo aan la saxin. Arrintan waa liidasho muhiim ah oo u baahan in si degdeg ah wax looga qabto.

- In kasta oo qaybta 2aad ee Xeerka Dakhliga u oggolaanayo dowladda in ay ururiso dakhliga Canshuurta Mushaaraadka, Canshuurta Macaashka ganacsiga, Canshuurta Dakhliga Shakhsi, Canshuurta Guryaha Magaalada, Shatiyada Ganacsiga, Canshuurta Shidaalka, Canshuurta Matorada Korontada, Ujuurrada Diiwaangelinta Gaadiidka, Canshuurta Wado-marista, Canshuurta Shatiga Soo-saarista Macdanta iyo Dalagga Soo Go'a; sidaas oo ay tahay haddana weli wax lacag ah lagama ururin ilahan.
- Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya ayaa waxay leedahay shan garoomo diyaaradeed oo ku yaalla degaamadeeda balse ujuurooyinka rakaabka maxalliga ah ayaa keliya laga ururiyay laba ka mid ah. Wadarta guud ee dakhliga laga ururiyay labadan garoon intii lagu guda jiray 2018 ayaa waxay ahayd \$27,345. Sidaa daraadeed waxa surta gal ah in dakhli mug leh laga soo ururin karayo saddexda kale.

Isticmaalka xad-dhaafka ah ee lacag-bixinnada Kaashka ah

Waxaa jiray isticmaalka xad-dhaafka ah ee lacag-bixinno badan oo kaash ah oo guud ahaan dhan **\$575,875**. Lacag-bixinnadan ayaa lagu bixiyay kharashaadka cuntada joogtada ah ee la bixiyo, gunnooyinka amniga, dowladda hoose, iyo safarka iyada oo lacag-bixinnada kale loo adeegsaday in lagu bixiyo mushaaraadka siyaasiyiinta. Lacag-bixinnada kaashka ah, gaar ahaan kuwa xaddiga badan, ayaa keeni kara in saraakiishu ay ku kacaan hawlo khiyaanno ah waxaanna jirta halis aad u sarreyso oo ah in wax isdabamarin lagu sameeyo lacagahaan. Lacag-bixinnada badan ee khaashka ah ayaa waxaa loo adeegsadaa oo keliya sida xalka ugu dambeeyay ee laga fursan waayay ahaan.

Wax-soo-iibsiga

Xaalado u hoggaansamid la'aanta hannaanka wax-soo-iibsiga ayaa la ogaaday intii lagu guda jiray baarista hantidhowrka. Lacag-bixinnada \$50,000 ee lagu bixiyay bixinta cuntada joogtada ah ee loogu talagalay ciidamada ammaanka ayaan lahayn caddeymo diiwaangashan oo ah ka dhaafidda habraaca wax-soo-iibsiga ee lagu tartamo. Haddii habraaca noocaasi ah ee lagu tartamo aan la marin, sida uu sharciga dhigayo, waxaa suuragal in kheyraadka dowladda la khasariyay.

Maareynta Hantida

In kasta oo GSS ay leedahay Nidaamka Maareynta Hantida kaas oo ay tahay in lagu diiwaangeliyo oo lagu ilaaliyo xogta hantida dowladda, haddana hantida dowladda weli laguma diiwaangelin hannaanka. Awoodda ay hay'ad kasta ku diiwaangelinayso oo ayna kula soconayso hantida ay leedahay ayaa muhiim u ah gacan ku haynta kantaroolka habboon ee hantidan. Haddii kantarooladan aasaasiga ah aannu jirin waxaa suuragal ah in hantida dowladda wax isdabamarin lagu sameeyo.

Liidasho Ka Jirta Siyaasadaha Macluumaadka, War-isgaarsiinta iyo Tiknooloojiyadda (ICT)

Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS) ma laha buugaagta geeddi-socodyada, habraacyada iyo siyaasadaha ICT ee bixiya hagidda ku saabsan isbeddelada lagu sameeyo hannaanka, gelidda adeegsadaha, qorshayaasha shaqo sii socoshada/ka soo kabashada musiibada (BCP/DRP) iyo kantaroollo looga hortagayo gelidda aan la oggoleyn.

Hirgelin La'aanta Soo-jeedimada Hantidhowrka

Sannadihii la soo dhaafay, Xafiiska Hantidhowra Guud (OAG) ayaa talooyin badan u soo jeediyay Dowladda si ay wax uga qabato qaladaadka uu soosaray hantidhowrka inta lagu gudajiray baaritanada. Hadii la hergeliyo talooyinka la soo jeediyay waxaa loo adeegsan karaa sida aalad muhiim ah oo maamulka ka saacideysa Hormarinta/kor u qaadista maamulka maaliyadda iyo dowlad wanaaga. Heerka hirgelinta talooyinkan la soo jeediyay ayaa sidoo kale ah tilaame muhiim ah haddii maamulka uu sii wanaajinayo hannaanada iyo kantaroolada hore u sii jiray.

Warbixintii Hantidhowrka ee 2017, marka la eego guud ahaan 12kii talo ee lagu soo jeediyay, laba talo oo keliya ayaa laga hirgeliyay. Toban talo ayaa weli waxba laga qaban. Kuwan waxaa ka mid ahaa talooyin lagu sii wanaajinayo kantaroolada maaliyadeed ee muhiimka ah sida iswaafajinta bankiga, kala-sooca waajibaadka ee dakhli ururinta, u hoggaansamidda tilmaamaha wax-soo-iibsiga, ka fogaanshaha lacag-bixinnada kaashka ee xad-dhaafka ah iyo maareynta hantida, waxba lagama qaban waxaanna mar kale lagu soo qaatay warbixintan. GSS, oo Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MoFED) ay wakiil katahay, waa in ay xaqiijisaa in **dhammaan** soo-jeedimada ku jira warbixintan in si degdeg ah wax looga qabto.

1.4 Gebaggabo Guud

Waxaa muuqata guud ahaan in kasta oo uu jiro nidaamka shuruucda iyo xeer-nidaamiyeyaasha maareynta maaliyadda oo dhammeystiran, haddana badanaa lama raaco. Ma jiro nidaam loogu talagalay korjoogteynta sharci u hoggaansamidda sida saxda ahna ma jiro hannaan loogu talagalay baaritaanka sharci-jebinta suuragalka ah iyo soo saaridda ciqaabo. Gaar ahaan, Meelaha dib u habeynta muhiimka ah ubaahan ayaa ah in la yareeyo lacag bixinnada kaashka ah, in la raaco habraaca wax soo iibsiga, iyo in sii wanaagsan loo maareeyo hantida maamulka. Intaa waxaa dheer, haddii Dowladda aysan wax ka qabanin dakhli ururinta (banki kushubida iyo laxisaabtimida) , Waxaa adkaan karta in Dowlad Goboleedka Galmudug ay hormar sameeyso.

2. Hordhac

Xafiiska Hantidhowrka Guud ee GSS waa Hay'adda Hantidhowrka Sare “*Supreme Audit Institution (SAI)*” ee dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS) iyo Hantidhowrayaasha Dibedda ee xisaabaha dowladda si loo xaqiijiyo maaliyadaha dowladda in loo adeegsaday si waafaqsan shuruudaha lagu dejiyay Xeerka PFM ee 2017 iyo xeernidaamiyeyasha la xiriira.

2.1 Mas'uuliyadaheenna

Qaybta 28(1) ee Xeerka Hantidhowrka 2018 wuxuu koobayaa mas'uuliyadaha xafiiska hantidhowrka guud (OAG) si uu u baaro xisaabaha dhammaan hay'adaha guud ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS). Qaybta 7(1) ee Xeerka Hantidhowrka 2018 wuxuu dhigayaa in Hantidhowrka Guud uu si madax-bannaan u shaqeeyo una guto shaqooyinkiisa, waajibaadkiisa iyo awoodahiisa. Madax-bannaanida Hantidhowrka Guud waa sifada aasaasiga ah ee Hay'adda Hantidhowrka Sare (SAI) ee sida fiican u shaqeynaysa ee u hawlgaleysa si waafaqsan Jaangooyooyinka Caalamiga ah ee Hay'adaha Hantidhowrka Sare (*International Standards of Supreme Audit Institutions (ISSAIs)*).

Iyada oo la raacayo qodobbada qaybta 32(3) ee Xeerka PFM ee 2017 iyo qaybta 30(4) ee Xeerka Hantidhowrka ee 2018, Hantidhowrka Guud waa in uu u soo gudbiyaa warbixinta Hantidhowrka Sanadlaha ah Baarlamaanka afar bilood gudahooda ka-dib marka uu Bayaamada Maaliyadeed uu ka helo Wasiirka Maaliyadda. Guddoomiyaha Baarlamaanka waa in uu ku horgeeyo dhammaan warbixinnada hantidhowrka Golaha Shacabka Dowlad-goboleedka shan maalmood oo kuwa shaqada ah gudahooda ka-dib marka uu helo warbixinta sida ku cad qaybta 33(1) ee Xeerka Hantidhowrka 2018.

Mas'uuliyadda Wasiirka Maaliyadda waa in uu diyaariyaa Xisaabta Kama Dambeysta ah ee aan la baarin ee Miisaaniyadda Mideysan iyo in uu u soo gudbiyo Hantidhowrka Guud kama dambays afar bilood ka-dib dhammaadka sannad maaliyadeedka sida ku xusan Qaybta 32(1). Xisaabta Kama Dambeysta ah ee aan la baarin ee Miisaaniyadda Mideysan waa in ay noqoto mid waafaqsan qaab dejinta miisaaniyadda. Si uu gacan uga geysto dammaanad-qaadka madax-bannaanida, Hantidhowrka Guud door kuma laha diyaarinta bayaamadan maaliyadeed ama oggolaanshaha ama kantaroolka macaamulaad kasta oo aasaas u ah.

Baaritaankaan ka hor, shaqaalaha Xafiiska Hantidhowrka Guud (OAG) ma lahayn waayo-aragnimadadii loo baahnaa si ay iyagga kaligooda u sameeyaan hantidhowr dhameystirant ee bayaanka maaliyadeed. Sidaa daraadeed ayaa waxaa lagama maarmaan noqotay in la shaqaaleeyo oo la adeegsado shirkad hantidhowrka sameysa oo gaar loo leeyahay, Baker Tilly (BT), oo shaqada qabanaysa iyada oo ka wakiil ah Xafiiska Hantidhowrka Guud, taa soo waafaqsan qaybta 20-23 ee Xeerka Hantidhowrka ee 2018.

Intii lagu guda jiray hantidhowrka, shirkadda BT ayaa sidoo kale gacan ka geysatay dhisidda xirfada shaqaalaha Xafiiska Hantidhowrka Guud (OAG). Shaqaalaha xafiiska hantidhowrka ayaa la siiyay

tababar shaqada gudaheeda lagu qaato waxayna hormuud ka ahaayeen shaqada hantidhowrka, iyagga oo ahaa xiriiriyeyaasha u dhaxeeyay shirkadda BT iyo Wasaaradda Maaliyadda. Shaqaalaha Xafiiska Hantidhowrka Guud ayaa si weyn u qaaday mas'uuliyado badan marka loo eego intii lagu guda jiray hantidhowradii hore. Laga soo bilaabo hantidhowrkii 2019 iyo kuwii ka dambeeyayba waxaa la qorsheeyay in shaqaalaha Xafiiska Hantidhowrka Guud ay awoodi doonaan sameynta baaritaanka iyagga oo aan taageero uga baahan shirkad gaar loo leeyahay.

2.2 Caqabadaha Hor-taagan Xafiiska Hantidhowrka Guud ee GSS

Caqabadaha hor-taagan Xafiiska Hantidhowrka Guud ayaa waxaa ka mid ah balse aan ku koobneyn oo keliya kuwan soo socda:

- Tirada shaqaalaha oo aan ku filnayn.
- La'aanta miisaaniyad lagu taageero hawlaha xafiiska.
- Waayo-aragnimada shaqaalaha hadda ka shaqeeya oo aad u yar.
- Mooraalka shaqaalaha oo hooseeya iyada oo sabab u ah mushaarka oo yar iyo mararka qaar mushaar la'aanta soo wajahda shaqaalaha sida Ku-xigeenka Hantidhowrka Guud.
- La'aanta gaadiidkii fududeyn lahaa dhaqdhaqaaqa shaqaalaha.
- Gaabis ka jira ka warqabka waajibaadka xafiiska hantidhowrka ee dowlad goboleedka galmudug: si wax looga qabto gaabiskan xafiiska hantidhowrka guud waxaa uu olole iyo wacyigalin ku saabsan waajibaadka xafiiska hantidhowrka uu la wadaagi doonaa dhamaan ha'ayadaha dowlad goboleedka galmudug.

2.3 Habka Aynu Baaritaanka/Hantidhowrka u Sameyno

Waxaannu baaritaaneenna u sameynaa si waafaqsan Jaangooyooyinka Caalamiga ah ee Hay'adaha Hanti-dhowrka Sare (ISSAIs). Waxaannu nahay xafiis ka madax-bannaan Ha'ayadaha kale ee dowliga ah ee dowlad goboleedka galmudug iyada oo la raacayo qodobbada ISSAI 30 oo la socda shuruudaha anshaxa ee la xiriira baaritaankeenna Bayaannada Maaliyadda ee GSS, waxaannu u gudanaa mas'uuliyadaheenna anshaxa si waafaqsan shuruudahan. Shaqaalaheenna oo dhan ayaa waxay si sannadle ah u saxiixaan xeerka anshaxa Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya si loo xaqiijiyo sharci u hoggaansamidooda.

2.4. Ereyada Hantidhowrka ee Muhiimka ah

Ra'yiga Hantidhowrka

Kani waa go'aanka hantidhowrka ee ku saabsan bayaamada maaliyadeed ee uu diyaariyay maamulka. Ra'yiga hantidhowrka waa aragtida xirfadeed ee uu bixiyo xisaabiyaha aqoonta iyo xirfadda leh Marka uu soo gaba gabeeyo baarista diiwaanada maaliyadeed. Ra'yiga wuxuu sharxayaa geeddi-socodyada la

adeegsaday intii lagu guda jiray baaritaan/hantidhowr sameynta, jaangooyada uu adeegsado hantidhowrka, iyo macluumaadka kale ee ku habboon iyo sidoo kale gunanadka Kama dambeysta ah.

Noocyada Aaraada Hantidhowrka

Ra'yiga ugu fiican (Ugu nadiifsan) — ma laha cillado ku saabsan bayaamada maaliyadeed. Kani sidoo kale waxaa loo yaqaannaa ra'yi nadiif ah oo macnihiisu yahay in bayaamada maaliyadeed ay u muuqdaan in loo soo bandhigay si caddaalad ah.

Ra'yiga dhexdhexaadka ah — tani macnaheedu waa in hantidhowrka uu ku qancin sida loo dhaqangaliyey qaar kamid ah jangooyinka calimiga ah oo u dagan xisabadka ama inu san awoodin in uu saadaaliyo saameynta ay ku yeelankarto warbixinta maaliyadeed khaldaad mug leh oo dhaca. Sidoo kale caadi ahaan loo yaqaanno ra'yiga “marka laga reebo”.

Ra'yiga Afeefka(diidmada)— kani waa ra'yiga hantidhowrka ee hantidhowruhu uusan awoodin in uu sheego aragtidiisa/aragtideeda ku aaddan in bayaamada maaliyadeed ay sax yihiin iyo in kale taas oo ay sabab u tahay xadidaad baaxadd leh. Hantidhowraha ma awoodo in uu sheego ra'yi

Ra'yiga ugu xun (Waxba sax ma ahan)—kani waa nooc ka mid ah ra'yiga hantidhowrka oo sheegaya in bayaamada maaliyadeed aysan ka turjumeynin dhaqdhaqaaqa maaliyadeed ee dowladda iyo in aan loo hogaansamin shuruucda xisaabaadka ee khuseyso warbixinta maaliyadeed ee dowlada

Bayaamada Maaliyadeed ee mideysan—Kuwan waa bayaamada maaliyadeed ee hay'adaha iyo waaxaha wasaaradaha ee kala duwan ee dowlad-goboleedka ee loo soo bandhigay sida hal bayaan oo wadajir ah oo loogu talagalay muddo maaliyadeed cayiman.

waxyaabaha muhiimka ah ama (muga leh)

Khaladaadka waxaa loo aqoonsadaa inay yihiin muhiim hadii ay kali ahaan ama iskudar ahaan ay saameyn ku yeelankaraan go' aamada maaliyadeed ay qaadanayaan isticmaalayaasha warbixinta maaliyadeed.

3. Waxyaabihii Ugu Waaweynaa ee Hantidhowrka Lagu Oggaaday

3.1 Ra'yiga dhexdhexaadka ah

Ra'yi ahaan, marka laga reebo saameynta arrimaha lagu qeexay faqradda hoos ku xusan ee Waxyaabaha Lagu Saleeyay Ra'yiga, bayaamada maaliyadeed waxaa ay si caddaalad ah u soo bandhigayaan, marka la eego dhammaan waxyaabaha la taaban karo, booska dhaqaale ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya ee sanadkii dhammaadey 31kii Disembar 2018 iyo waxqabadkeeda maaliyadeed ee muddada dhammaatey iyada oo la raacayo Xeerka PFM ee 2017 iyo Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda ee (IPSAS) – Warbixinta Maaliyadeed ee Xisaabaadka Kaashka Ku Saleysan.

Waxyaabaha Lagu Saleeyey Ra'yiga

Baaritaankeenna wuxuu tilmaamay lacag-bixinno wadartoodu tahay **\$1,155,147 (oo u dhigma 54% guud ahaan lacag-bixinnada sannadkii 2018)** ee lagu sheegay Bayaanka Maaliyadda mideysan ee Qabashada iyo Bixinta Lacagaha, kuwaas oo aan laheyn caddeymo ku filan oo muujinaya in ay jiraan macaamulaadka sidaa daraaddeedna waa waxyaabo la taaban karo marka la eego xaaladda hantidhowrkan.

In kasta oo ra'yigii la bixiyay sanad maaliyaddedki 2017 iyo kan 2018 ay isku mid yihiin hadan qadarka lacag bixinnada ee aan wax cadeyn ah loo haynin ayaa si aad iyo aad ah kor u kacay sanad maaliyadeedka 2018.

3.2 Dakhli Ururin:

Waxaannu baarney dakhliga la qabtey ee lagu diiwaangeliyay Bayaamada Maaliyadeed waxaannu oggaaney in ay jiraan liidashooyinkan soo socda:

- Hannaanka dakhli ururinta waa hannaan gacamaha lagu sameeyo oo ma aha hannaan iskiisa u hawlgala oo otomaatik ah.
- Xaashida iswaafajinta dakhliga laguma sheegin diyaariye, dib-u-eege iyo ansixiye si loo muujiyo waajibaad kala lahaanshiyaha ee hanaanka dakhli uruurinta iyo in waqtigeeda lagu diyaariyo xaashida iswaafajinta dakhliga iyadoo la muujinaayo diyaariyaha, dib u eegaha iyo ansixiyaha.
- Waxaan ogaanay kala duwanaansho u dhaxeysa canshuurta la qabtay, tirada lacagaha lagu diiwaangeliyay buugga kaashka, tirada lacagaha bankiga lagu shubay. Muunadaha aannu baarney, ayaa waxaan ku oggaaney in tirada lacagaha bankiga lagu shubay ay isle'eg yihiin tirada lacagaha lagu muujiyay buugaagta kaashka, haseyeeshee, dakhliga lagu diiwaangeliyay rasiidyada qabashada ayaa mararka qaar badnaayeen ama yaaraaneyey
- Xeerka Dakhliga ayaa dhigaya 11 ilo dakhli oo GSS ay ka qaadi karto canshuur, haseyeeshee, afar ilood oo keliya ayaa dakhli laga ururiyey: Canshuurta Macaashka ganacsiga, Shatiyada Ganacsiga iyo Xirfadaha, Ujuurooyinka Rakaabka Maxalliga ah iyo Canshuuraha Alaabooyinka Ka Gudbaya Xuduudaha Dowladd goboleedka. Waxaan oggaaney toddobadan ilood ee soo socda in aan laga qaadin wax dakhli ah: Canshuurta Dakhliga Shakhsi, Canshuurta Guryaha Magaalada, Shatiyada Ganacsiga, Ujuurada Amniga iyo Nadaafadda Suuqa, Canshuurta Shidaalka, Canshuurta Matorada Korontada, iyo Ujuurrada Diiwaangelinta Gaadiidka.
- Bayaamada maaliyadeed ayaa muujinaya \$27,345 oo ah Ujuurooyinka Rakaabka Maxalliga ah. Waxaan oggaaney GSS in ay leedahay shan Garoomo Diyaaradeed shaqeeya iyada oo ujuurooyinka rakaabka maxalliga ah keliya laga qaaday laba ka mid ah garoomadan diyaarahada (Garoonka Diyaaradaha Guriceel iyo Garoonka Diyaaradaha Ugaasnuur). Intaa waxaa dheer, in dakhligan laga ururiyay garoomadan muddo afar bilood oo keliya laga bilaabo Sibtembar 2018.


Liidashada habraacyada dakhli ururinta ayaa horseedi doonto in la lumiyo maaliyadaha dowladda, xisaabaadka canshuuraha oo qalad noqdo iyo sidoo kale warbixinta maaliyadeed oo aan sax ahayn. Waxaa ku talineyna:

- GSS in ay baraha canshuuraha lagu ururiyo ku diyaariso hab si buuxda kombiyuutar loogu sameeyo ama otomaatik ah.
- Nidaamyada canshuur ururinta in si buuxda loo waafajiyo nidaamyada xisaabaadka (*accounting systems*).
- GSS in ay sahamiso qaababka lagu balaarinayo ilaha canshuur ururinta iyo in ay hubiso in canshuur ururintu ay dhacdo sannadka oo dhan.
- Dhammaan diiwaangelinnada buugaagta la geliyo ee marxaladaha kala duwan ee meertooyinka dakhliga iyo xisaabaadka waa in lagu saleeyaa tixraacyo gaar ah oo laga soo qaatay dokumentiyada habboon ee lagu adeegsaday marxaladaha kala duwan. Canshuur qaadayaasha waa in ay adeegsadaan lambarka tixraaca ee uu soo saaro nidaamka (*system*) ka dibna waa in ay ku daraan kooxda rasiidyada gaarka ah ee isku noqonaya qadarka guud ee lacagta bankiga lagu shubey maalintii. Intaa waxaa dheer, buugaagtan rasiidka in la soo saaro iyada oo la raacayo tiro xisaabeed isku xigxigta si loo sii wanaajiyo isla-xisaabtamka.

3.3 Kharashaadka

Waxaa jiray lacag-bixinno dhan **\$1,155,147** oo u dhigma **54%** ee wadarta guud ee lacag-bixinnada looga warbixiyay warbixinta maaliyada oo mideysan ee Qabashada iyo Lacag-bixinta oo aan lahayn cadeymo kufilan. Intaa waxaa dheer, in lacag-bixinno guud ahaan dhan **\$575,875** in kaash ahaan loo bixiyay.

Shaxdan soo socota ayaa muujineysa isbeddellada lacag-bixinnada aan wax cadaymo ah loo haynin oo la sameeyey saddexdii sano ee la soo dhaafey.



Shaxda kor ku xusan ayaa muujinaysa lacag-bixinno guud ahaan dhan \$377,909, oo u dhiganta 7% ee wadarta guud ee lagu soo bandhigay sanad Maaliyadeedka 2017 aan loo haynin wax documintiyiyo ah. lacag bixinnada aan wax cadaymo ah oo ku filan loo haynin ee la sameeye sanad Maaliyadeedkii 2018 ayaa kordhay oo gaaray 54% waxaana ay kasii xunyihiin tii sanadkii hore ee 2017.


Waxaa loo baahan yahay in la xoojiyo kantaroolada si loo xaqiijiyo in kharashaadka baxa dhamaantood ay leyihiin cadeymo kufilan. GSS waa in ay sidoo kale yareysaa ku tiirsanaanta lacag-bixinnada kaashka ah. Waxay sidan ku gaari kartaa iyada oo xaddidaysa heerka lacag-bixinnada kaashka ah kuna soo rogeysa xaddad sare.

3.4 Lafogurista Miisaaniyadda Dowlad-goboleedka

Tirooyinka lagu soo bandhigay bayaamada maaliyadeed ayaa ka turjumaya qabashada iyo lacag-bixinnada rumooway iyo qoondemaha miisaaniyadda ee kala duwan ee uu ansixiyay Baarlamaanka. Miisaaniyadda GSS ma ahayn mid macquul ah. Keliya 27% ee dakhliga miisaaniyaddiisa la dejiyay ayaa si dhab ah loo helay. Tilmaamayaasha maaliyadda iskudhafan ee miisaaniyadda GSS ee 2018 waa kuwan soo socda:

Dakhliga guud ee miisaaniyadda 2018 ayaa waxaa laga ururiyay \$1,948,629(25%) marka loo eego \$7,666,237 farqiga u dhaxeeyana waa \$5,717,608(75%). Marka la barbardhigo sannadkii 2017, dakhli ururinta ayaa waxaa ku yimid hoos u dhac gaaraya (\$460,916) ama 19%. Tani ayaa sida aasaasiga ah sabab u ah xaaladaha siyaasadeed ee adag ee GSS ka jiray sannadahii la soo dhaafay.

Shaxda soo socota ayaa muujinaysa dakhliga dowladda saddexdii sano ee la soo dhaafay.




Raadraacidda waxqabadka dakhli ee dowladda ayaa suuragelinaysa in dowladda lagu jiheeyo jihada saxda ah. Gaar ahaan, korjoogteynta iyo sii wanaajinta qaybaha muhiimka ah ee dakhliga gudaha ee GSS, ayaa gacan ka geysanaya xaqiijinta in dowladdu ay dhaqaale ahaan tahay mid shaqeynaysa oo awoodda in ay

gaarto ujeedooyinkeeda. Haddii dowlada aysan soo xareynin dakhli ku filan, dowlad goboleedka galmudug waxaa laga yaabaa in aysan awoodi doonin in muwaadiniinteeda ay siiso adeegyada aasaasiga ah.

Shaxda hoose ayaa muujinaysa dakhli ururinta billaha ah ee GSS ee sannadkii 2018.

Isbarbardhiga Bilaha ah ee Ilaha Dakhliga Gaarka ah ee GSS ee 2018



Waxaa muuqata in dakhli ururinta dowladda ay hooseysay bilahii ugu horreeyay sannadka 2018 iyada oo sabab u ah khilaaf siyaasadeed oo ka jiray gudaha dowlad-goboleedka balse kororka xasiloonida ee dabayaaqadii sannadka ayaa keentay in dakhliga gudaha u kor u kaca bilaha ugu dambeyey sanadka. Kor u kaca dakhli wa inu si jira sanadka 2019 wa haddii xasiloonida siyaasadeed ay sii jirto.

Kharashaadka baxay ee miisaaniyadda guud ee 2018 ayaa waxaa uu ahaa \$2,136,799 marka loo eego \$7,666,237 oo ah intii la qorsheeyay, ama 28%, waxaanna u dhaxeeyay farqi gaaraya \$5,529,438. Kharashaadka sannadkan ayaa ka yaraa \$67,446 ama 3.1% marka loo eego kuwii baxay sannadkii 2017. Cunsurrada muhiimka ah ee gacanta ka geystay hoos u dhaca kharashka waa in aysan jirin mushaaraad horey dowladda loogu lahaa oo ay sannadkan bixisay.

Shaxda hoose ayaa muujinaysa guud ahaan kharashaadka saddexdii sano ee la soo dhaafay:



Wadarta guud ee dakhliga iyo kharashaadka GSS waa in ay isku dheellitirnaadaan, haddii kale waxaa dhacaya yaraanshaha ama badashada miisaaniyadda. Sannadkii 2018, kharashaadka ayaa dakhliga kabadna in la eg \$188,170. Tani waxay muujinaysaa in dakhliga GSS uusan ku filnayn in uu daboolo baahiyaha caadiga ah ee dowladda.

Kharashaadka dowladda oo kabata dakhligooda ee joogta noqda ayaa leh saameynta suuragalka ah ee soo socota:

- GSS ma awoodi doonto in ay fuliso hawlgalladeeda maalinlaha ee joogtada ah.
- GSS ayaa ku guuldareysan doonta bixinta adeegyada bulshada sida waxbarashada, caafimaadka iyo amniga.
- Wuxuu dowladda u dirayaa baaq digniin ah si ay midkood u yareeyso kharashaadkeeda ama u kordhiso dakhligooda.
- Ma jiri doonaan mashaariic horumarineed oo waaweyn sida dhisidda wadooyinka iyo iskuullada dowladda.

GSS waa in ay xaqiijisaa in marka ay diyaarinayso miisaaniyad-sanadeeda, tirada lacagaha qoondaynta ee la qiyaasay in xogtooda laga soo xigto isbeddeladii xaaladii hore iyo lacagaha qabashada ee la saadaalinayo ee ah qaab dakhli oo ku saleysan siyaabo macquul ah. Dowladda waa in ay kordhisaa ilaha dakhli ee gudaha si loo xaqiijiyo isku filnasha dhaqala. GSS waa in ay sidoo kale tixgelisaa shaqaaleynta la-taliyaha qaybta abaabulka maaliyadaha si uu ugu diyaariyo boroboosalada mashaariic ay maalgeliyaan hay'adaha gargaarka ee caalamiga ah uguna ololeeyo iyada oo lagu dadaalayo sidii lagu gaari lahaa qaybta Deeqaha ee ka midka ah qiyaasaha miisaaniyadda.

3.5 Wax-soo-iibsiga

Waxaan oggaaney xaalado muujinaya u hoggaansamid laan hannaanka wax-soo-iibsiga ee lagu tartamo. Tusaale ahaan, cunooyinka jogatada ah ee qadarkeeda yahay \$50,000 aya la soo iibi tartan laan iyado aan lacinin wax cudur daar sharci ah o loga dhaafi karo tartan.

Si loo xaqiijiyo in qiimaha lacagta la helo marka la bixinayo qandaraasyada, GSS waa in ay hubisaa dhaqan galka qaabka wax so iibsiga ee lugu tartamo marka ay soo iibsanayso alaabooyin iyo adeegyo iyo in la tix raaci karo qaabki lugu bixiyey qandarasyada. Arrintan ma aha oo keliya arrin u hoggaansamid la'aanta shuruucda iyo xeer-nidaamiyayaasha. Ka gaabinta in la helo qiimaha ugu badan ee lacagta ayaa ka dhalanaysa khasaarinta kheyraadka yar ee ay dowladdu leedahay.

3.6 Maareynta Hantida

Diiwaanka hantida ayaa waxaan ku jirin qaar ka mid ah hantida ay dowladdu leedahay sida dhulka, dhismayaasha iyo gaadiidka. Intaa waxaa dheer, in aysan jirin caddeymo muujinaya in la sameeyo xisaabin lagu sameeyo hantida.

Hantida oo dhan waa in lagu dhejiyaa calaamad lagu garto iyada oo hawlo xaqiijin dhab ah ay tahay in si joogto ah (diiwaanka hantida iyo hantida dhabta ah) loo qaabto. Si loo bixiyo diiwaanka ama raadka baarista, hawshan waa in si rasmi ah loo diiwaangeliyo. Waxaa lagama maarmaan ah in la cusboonaysiiyo diiwaanka hantida si loo xaqiijiyo dhammaan hantida ay dowladdu leedahay in si habboon loogu daro.

3.7 Liidasho Ka Jirta Jaangooyooyinka iyo Siyaasadaha ICT-ga

Ka-dib markii aan dib-u-eegnay hannaanada ICT-ga, waxaan aqoonsanay liidashooyinkan soo socda:

- GSS ma laha buugaagta hannaannada, habraacyada iyo siyaasadaha ICT-ga rasmi ah kuwaas oo bixiya dhabbetusayaal ku saabsan; kantaroollada gelidda adeegsadaha, kantaroollada maareynta isbeddelka, qalabka IT-ga, shaqo sii socoshada, gelidda fog, iwm.
- Ma jiraan habraacyada iyo Qorshaha Shaqo Sii Socoshada/Ka Soo Kabashada Musiibada rasmi ah oo la qeexay, la ansixiyay lana tijaabiyay.
- Wasaaraddu ma laha heshiiska heerka hawlgallada oo rasmi ah oo u dhaxeeya kooxda IT-ga iyo kooxda taageerada Bisan ee waqtiyada xallinta dhibaata (Taageerada Adeegsadaha). Waxaan oggaaney in xallinta dhibaata ay qaadato in ka badan hal maalin oo shaqo si ay u xalliyaan kooxda taageerada Bisan, maamulaha IT-ga waa in uu inta badan sameeyaa la-socoshada / dabagal.
- La'aanta habraacyada abuurista adeegsadaha oo rasmi ah. Waxaan oggaaney daldalloolo in uu ka jiro hannaanka abuurista adeegsadaha maadaama aannu jirin tilmaamo rasmi ah oo muujinaya ansixinnada codsiga ku habboon oo laga helo maamulayaasha tooska ah ee kala duwan. Oggolaansho afka ah ayaa la helaa balse ma jiraan habraacyo jaango'an oo la raaco.

- Ma laha habraac rasmi ah oo lagu ogeysiinayo agaasimaha waaxda IT in uu hawlgelinta ka joojiyo koontooyinka adeegsadaha ee shaqaalaha iscasilay ama kuwa shaqo joojinta lagu sameeyay.
- Ma jiro oggolaansho heer-labaad ah oo loogu baahan yahay sixitaan ama wax-ka-beddel kasta ee uu sameeyo maamulaha IT-ga.
- La'aanta barnaamijka la dagaalanka fayraska (*antivirus*) oo habboon oo kombiyuutarrada ku degsan. Waxaan oggaaney in dhammaan kombiyuutarada goobaha shaqada ee la wada adeegsado in aysan lahayn barnaamijka la dagaalanka fayraska (*antivirus*) oo habboon oo ku degsan waxayna midkood isticmaalayeen noocyo si bilaash ah lagu soo dejisan karo ama mid la socda barnaamijka windows-ka oo hay'adda halis u gelin kara qaybta IT-geeda in aysan muddo dheer shaqayn haddii kombiyuutarada la wada adeegsado ee goobaha shaqada uu fayrasku haleelo.

GSS waa in ay tixgelisaa diyaarinta dokumentiga siyaasadda IT-ga oo dhammeystiran kaas oo waafaqsan dhabbetusayaasha IT-ga iyo hawlgallada maalinlaha ah ee Wasaaradda. Codsiyada isbeddelka waa in la dhaqangeliyaa iyada oo la adeegsanayo foomka codsiga isbeddelka rasmiga ah ee la ansixiyay iyo sidoo kale waa in la sameeyaa diiwaanka dib-u-eegista maamulka iyo ansixinta siyaasadda dib-loo-eegay waa in la joogteeyaa. Hawlwadeennada waaxda IT-ga waa in ay qaadaan tallaabooyin firfircoon oo lagu xoojinayo u hoggaansanaanta daneeyayaasha oo dhan.


Geeddi-socod lagu sameynayo gelidda adeegsadaha waa in la hirgeliyaa, la raacaa, oo la ansixiyaa kaas oo la socda shuruudaha gelidda adeegsadaha sida lagu buuxiyay foomka codsiga gelidda adeegsadaha marka xuquuqaha gelidda loo qoondeynayo adeegsadayasha hannaanka Bisan.

Codsiyada gelidda adeegsadaha waa in had iyo jeer laga helaa agaasimaha waaxda shaqaalaha (HR) marka lagu diiwaangelinayo shaqaale kasta oo cusub gelidda adeegsadahana waa in keliya la siiyaa marka oggolaansho la helo.

Geeddi-socodka shaqo ka joojinta adeegsadaha oo rasmi ah waa in la hirgeliyaa oo la raacaa si loogala noqdo xuquuqaha gelidda. Waxqabadyada Maamulaha Hannaanka waa in uu kantaroolaa, la socdaa oo uu caddeeyaa qof ku habboon oo u qalma, kaasi oo ka hor-imaan kara sababaha uu adeegsiga u bixiyay Maamulaha Hannaanka.

3.8 Ka gaabinta hirgelinta soo-deejimadii hantidhowrka ee sannadkii hore

Inta badan talooyinka/soojeedimada hantidhowrka ee lagu soo jeediyay baaritaankii bayaamada maaliyadeed ee 2017 lama hirgelin. Shaxda soo socota ayaa muujinaysa xaaladda hirgelinta ee soojeedimadii Xafiiska Hantidhowrka Guud (OAG).



Xafiiska Hantidhowrka Guud (OAG) ayaa Dowladda u soo jeediyay talooyin soo noqnoqday si ay wax uga qabato arrimaha kala duwan ee la ogaaday intii lagu guda jiray baaritaannada. Dhaqan gelinta talooyinka la soo jeediyay waxay suurta gelinayaan mamul maliyadeed o hufan iyo dowlad wanaag, waxa kala o cadeyn utahay in isbadal dhanka wanaga loo qaadi inu jira iyo in kale. Hase-yeeshee, guud ahaan talooyinkan la soo jeediyay lama hirgelin.

GSS iyo gaar ahaan Wasaaradda Maaliyadda (MoFED) waa in ay diyaarisaa qorshe hawleedka hirgelinta soo-jeedimada hantidhowrka OAG oo leh jadwalka waqtiyada la fulinayo iyo saraakiisha ka mas’uulka ah. Horumarka laga gaaro qorshahan waa in lala socdaa oo warbixinnadana loo diraa lix bilood kasta Wasiirka iyo Hantidhowrka Guud.

Lifaaqa 1aad – Bayaamada Maaliyadeed ee Iskudhafan ee La Baarey ee
Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS) Sannadkii
Dhammaadey 31ka Disembar 2018

**DOWLAD-GOBOLEEDKA GALMUDUG EE SOOMAALIYA (GSS)
HANTIDHOWRKA BAYAAMADA MAALIYADEED EE ISKUDHAFAN
SANNADKII DHAMMAADEY 31^{KA} DISMEBAR 2018**

WARBIXINTA KAMA-DAMBEYSTA AH

TUSMO

I) BAYAANKA MAS'UULIYADDA WASAARADDA MAALIYADDA	3
II) WARBIXINTA HANTIDHOWRKA MADAXA-BANNAAN	4

i) BAYAANKA MAS'UULIYADDA WASAARADDA MAALIYADDA

Wareegtada Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha (PFM) ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya waxaa ay Wasaaradda Maaliyadda (Wasaaradda) ku waajibineysaa in ay diyaariso Bayaanka Maaliyadda Iskudhafan ee Qabashada iyo Bixinta Lacagaha ee sannad maaliyadeed kasta oo aqoonsaneysa dhammaan lacagta kaashka ah ee la bixiyo iyo lacag-bixinta kale iyo lacagta kaashka ee baaqiga ah ee uu gacanta ku hayo Dowlad-goboleedka. Dowlad-goboleedka waxaa looga baahan yahay in uu hubiyo diyaarinta diiwaannada xisaabaadka ee habboon oo dad ugu filan in ay sharraxaan tacaamulaadka (wax-isdhaafsiyada) Dowlad-goboleedka kuwaas oo si sax ah oo caqligal ah, shaaca uga qaada, xaaladda dhaqaale ee Dowlad-goboleedka. Dowlad-goboleedka ayaa sidoo kale mas'uul ka ah ilaalinta hantida Dowladda, iyo in uu tallaabooyin caqligal ah u qaado ka hortagga iyo oggaanshaha khayaamooyinka iyo wax-isdabamarinada kale.

Wasaaraddu waxaa ay dhabarka u ridanayaa mas'uuliyadda diyaarinta iyo soo-bandhigidda Bayaamadan Maaliyadeed oo loo diyaarinayo si waafaqsan Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda/International Public Sector Accounting Standards (IPSAS)) – oo ah Ka-warbixinta Maaliyadda ee ku saleysan Xisaab-celinta ku Dhisn Kaashka ee 2017 iyo sida uu waajibinayo Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha (PFM) ee 2017 ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya. Wasaaradda ayaa sidoo kale dhabarka u ridanaya mas'uuliyadda:

- i) Nakh-shadeynta, hirgelinta iyo joogteynta kantaroollada gudaha ee u habboon diyaarinta iyo in Bayaamada Maaliyadeed ee loo soo bandhigo si miisaaman;
- ii) Xulashada iyo adeegsiga siyaasado xisaabeedka hagaagsan; iyo
- iii) Sameynta qiyaaso xisaabeed iyo qaadashada go'aamo caqligal ah oo xikmad ku dhisan.

Markii la qiimeeyay awoodda ay Dowladdu u leedahay in ay sii jirto, Wasaaraddu kama war hayso wax hubaal la'aan la taaban karo ah oo la xiriira dhacdooyinka ama xaaladaha madmadowga gelin kara awoodda Dowladdu u leedahay in ay sii jirto.

Wasaaraddu waxaa ay garwaaqsan tahay in hantidhowrka madaxa-bannaan ee Bayaamada Maaliyadeed uusan ka cafinayn ma'suuliyadahooda.

Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS) ayaa ansixiyey...16^{ka} Marso...2020.

Minister for Finance and Economic Development <i>IPS</i>	
Name: <i>Omar Hassan</i>	
Signature: <i>[Signature]</i>	

ii) **WARBIXINTA HANTIDHOWRKA MADAXA-BANNAAN**

Ra'yiga Hantidhowrka ee Sii Wanaajinta Mustaqbalka ee Warbixinnada (*Modified Opinion*)

Waxaan hantidhowr ku sameyney bayaamada maaliyadeed ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya kuwaas oo ka kooban Bayaanka Maaliyadda Iskudhafan ee Qabashada iyo Bixinta Lacagaha, Bayaanka Maaliyadda Iskudhafan ee Isbarbardhigga Qaddarka Miisaaniyada Lasii Dejiyay iyo Ta Rumoowday, iyo Bayaanka Hawlgalka ee Istaatistikada Maaliyadeed ee Dowladda / *Government Financial Statistic (GFS)* ee sannadkii dhammaadey 31kii Disembar 2018 iyo Qoraallada Bayaamada Maaliyadda oo ay ku jiraan Siyaasadaha Xisaabaadka Mugga Leh ee Kooban.

Ra'yi ahaan, marka laga reebo saameynta arrimaha lagu qeexay Waxyaabaha Lagu Saleeyay qaybta Ra'yiga waxa la sii wanaajin karo ee ku jira warbixinteenna bayaamada maaliyadeed waxaa ay si caddaalad ah u soo bandhigayaan, marka la eego dhammaan waxyaabaha la taaban karo, xaaladda dhaqaale ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya ee sanadkii dhammaadey 31kii Disembar 2018 iyo waxqabadkeeda dhaqaale muddadii dhammaatey iyada oo la raacayo Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha ee 2017 iyo si waafaqsan Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda ee (IPSAS) – Warbixin Maaliyadeed Waafaqsan Xisaabaadka Kaashka Ku Saleysan ee 2017.

Waxyaabaha Lagu Saleeyey Ra'yiga waxa la sii wanaajin karo

Hantidhowrkeenna wuxuu caddeeyay lacag-bixinno wadartoodu tahay USD 1,155,147 oo u dhiganta 54% guud ahaan lacag-bixinnada lagu sheegay Bayaanka Maaliyadda kuwaas oo aan laheyn caddeymo dad ku filan oo muujinaya in ay jiraan macaamulaadka oo sidaa daraaddeed ah waxyaabo la taaban karo marka la eego xaaladda hantidhowrkan. Lacag-bixinnahan ayaa qayb ahaan lagu kaabey dokumentiyada isla xafiiskaa uu sameeyey ama dokumentiyo aan dad ku filneyn oo laga heley kuwa wax laga soo iibsado.

Waxaan hantidhowrkeenna u sameyney si waafaqsan Jaangooyooyinka Caalamiga ah ee Hantidhowrka/*International Standards on Auditing (ISAs)*. Mas'uuliyadda ay ina saarayaan jaangooyooyinkaas ayaa sharraxaad dheeri ah looga bixiyey qaybta Mas'uuliyadaha Hantidhowraha ka saaran Hantidhowrka Bayaamada Maaliyadeed ee warbixinteenna.

Waan ka madax-bannaanahay Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya sida uu dhigayo Xeer-Anshaxeedka Xirfadlayaasha Xisaabiyayaasha ah uu u dhigey Guddiga Caalamiga ah ee Jaangooyooyinka Anshaxa ee *International Ethics Standards Board for Accountants' Code of Ethics for Professional Accountants (IESBA Code)*, oo la socda shuruudaha anshaxa u habboon hantidhowrkeenna ee Bayaannada Maaliyadeed ee Soomaaliya, waxaana mas'uuliyadaheenna kale ee dhinaca anshaxa uga soo baxney si waafaqsan Xeerka IESBA. Waxaan aaminsannahay in caddeynta hantidhowr ee aan helnay ay dad ugu filan tahay ayna u habboon tahay in sal looga dhigo ra'yigeena.

Macluumaadka Kale

Wasaaradda ayaa ka mas'uul ka ah macluumaadka kale. Macluumaadka kale ayaa ka kooban macluumaadka ku jira Warbixinta Sannadlaha ah balse aan ku jirin Bayaanka Maaliyadda iyo warbixinta hantidhowraheenna.

Ra'yigeenna ku saabsan Bayaannada Maaliyadeed kama hadlayo macluumaadka kale mana bixiyo go'aanka ballanqaad dad ku filan nooc kasta ha ahaadee.

Marka la eego hantidhowrkeenna Bayaamada Maaliyadeed, mas'uuliyadeenna waa in aannu akhrino macluumaadka kale, annaga oo sidaa wadna, ayaan haddana waxaan u fiirsanaa in macluumaadka kale uu yahay mid si la taaban karo uga duwan Bayaamada ama waxyaabaha aan ka ogaanney hantidhowrka, ama haddii kale u muuqda in uu khalad ku jiro. Haddii, iyada oo lagu saleynayo shaqada aannu ka qabanay macluumaadka kale, aan go'aan ku gaarno in macluumaadkan kale uu ku jiro khalad la taaban karo: waxaa nalaga doonayaa in aan ka warbixinno oo aan sheegno xaqiiqdaas. Ma hayno wax aan ka sheegno arrintan.

Arrimaha Hantidhowrka ee Muhiimka ah

Arrimaha hantidhowrka ee muhiimka ah, ra'yi ahaan iyo fikirkeenna xirfadlenimo ahaanba, waa arrimaha ugu muhiimsan hantidhowrkeenna Bayaamada Maaliyadeed ee muddada. Arrimahan

waxaa looga hadley guud ahaan nuxurka Hantidhowrkeenna Bayaamada Maaliyadeed, qaadashada ra'yiga aan ka bixineyno arrimahan, ra'yi gaar ahna kama bixineyno arrimahaas. Marka laga soo tago arrimaha lagu soo sharxay qaybta Waxyaabaha Lagu Saleeyey Ra'yiga Waxa La Sii Wanaajin Karo, waxaan go'aaminey in arrimaha hoos lagu sharxay ay yihiin arrimaha hantidhowrka ee muhiimka ah ee ay tahay in ay ka hadasho warbixinteenna.

a) Soo-ururinta iyo diiwaangelinta lacag-qabashada (risiidhada)

Kantaroolka iyo habaaracyada uu Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya u adeegsado risiidhada (lacag-qabashada) ma ahan kuwo ku filan ka-hortagga bixin la'aanta cashuurta (tax leakage) iyo khalad laga soo gudbiyo bayaamada maaliyadeed. Tani waxaa u sabab ah:

- Hannaanka dakhli-ururinta ee cashuuraha oo aan ahayn mid otomaatik u shaqeynaya (automated).
- Cashuuraha la ururiyo oo la isticmaalo ka hor inta aan loo soo gudbinin saraakiisha dakhli-ururinta oo aan laguna diiwaangelinin hannaanka xisaabaadka.
- Dowlad-goboleedku ma hirgelin hannaan hawlaha kala duwan ee maamulka cashuuraha loogu kala dhiibayo dad kala duwan. Sarkaalka loo keeno cashuuraha ay soo ururiyaan wakiillada cashuur-ururinta, ayaa sidoo kale mas'uul ka ah in uu bankiga ku shubo lacagta oo uuna xaddiga lacagta ku diiwaangeliyo Hannaanka Maareynta Macluumaadka Maaliyadeed.
- Cashuuraha la ururiyo oo aan la barbardhigin tirada lacagta lagu shubo bankiga iyo hannaanka xisaabaadka.
- Diiwaangelinta dhammaan risiidhada lacag-qabashada ayaa hadda lagu diiwaangeliyaa hannaanka xisaabaadka ee loo yaqaanno FMIS halkii marka hore lagu diiwaangelin lahaa hannaanka dakhli-ururinta ee loo yaqaanno Hannaanka Maareynta Dakhliga/Revenue Management System (RMS).
- Cashuur-ururin aan la diiwaangelin: Cashuurta Waddo-marista (baabuurta) ee muddadii u dhaxaysey Jannaayo iyo Maajo 2018, iyo risiidhada lacag-qabashada ee Rakaabka Gudaha Dalka isaga kala goosha ee Garoonka Diyaaradaha ee muddadii u dhaxaysey Jannaayo – Agoosto 2018
- Bayaamada Maaliyadeed ayaa muujinaya in guud ahaan sanad-maaliyadeedka aan la qaadin Cashuurta Dakhliga Shakhsiga; Cashuurta Hantida Magaalooyinka; Shatiyada Ganacsiga, Ujuurada Amniga iyo Nadaafadda Suuqyada; Cashuurta Wax-soo-saarka Korontada iyo Ujuurada Diiwaangelinta Baabuurta.

Si wax looga qabto halistan, waxaan sameyney geeddi-socodyadan hantidhowr ee soo socda:

- Waxaan wareysiyo la yeelaney maamulka u habboon ee mas'uulka ka ah diiwaangelinta dakhliga si aan u fahamno habaaracyada loo maro dakhli-ururinta.
- Waxaan sameyney tijaabooyin mug leh si aan u xaqiijino in habaaracyadu ay shaqeynayaan.
- Waxaan meel kale ka raadiney xaqiijin la xiriirta dakhliga laga heley Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) iyo deeq-bixiyeyaasha waxaana aan xaqiijinta aan helney barbardhigney bayaamada maaliyadeed.
- Waxaan risiidhada lagu diiwaangeliyey diiwaannada gaargaarka (ledgers) ka eegney bayaamada bankiga iyo buugaagta lacag-qabashada si aan u xaqiijino saxnaanta risiidhka lagu diiwaangeliyey bayaamada maaliyadeed.
- Waxaan bayaamada maaliyadeed ka eegney waxyaabo tilmaamaya risiidho aan shaaca laga qaadin si aan u xaqiijino dhammeystirnaanta risiidhada.
- Waxaan tijaabinney (baarney) risiidho shaaca looga qaadey bayaamada maaliyadeed annaga oo u eegneya dokumentiyada kaabaya waxaana aan ku sameyney tijaabooyin (baaritaanno) mug leh, habaaracyo dib-u-eegis lafaguris ah iyo tijaabooyin la xiriira in dakhliga lagu diiwaangeliyey muddadii u habbooneyd (cut off tests).
- Waxaan mas'uuliyiintii u habboonnaa aan su'aalo ka weydiiney kala duwanaanshaha lala xiriiriyey risiidhada waxaana aan kaga warbixinney warqadda maamulka (management letter) waxaana jawaabihii laga bixiyey ay ahaayeen kuwo aan dad ku filneyn oo aan lagu qancin.

Mas'uuliyadaha Maamulka iyo kuwa ay mas'uuliyaddu ka saaran tahay maamulka Bayaannada Maaliyadda

Wasaaradda ayaa ka mas'uul ah diyaarinta iyo si wanaagsan u soo bandhigidda Bayaamo Maaliyadeed oo waafaqsan Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka ee 2017 iyo Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda (IPSAS) - Warbixinta Maaliyadeed ee Xisaabaadka Kaashka Ku Saleysan iyo kantaroolka gudaha ee Wasaaraddu u aragto in ay lagamamaarmaan u yihiin diyaarinta Bayaamo Maaliyadeed oo aan lahayn khalad la taaban karo, khayaamo ama ilduuf mid uu ku yimaadaba.

Marka ay diyaarinayso Bayaamada Maaliyadeed Wasaaradda ayaa ka mas'uul ah u-kuurgelidda awoodda uu Dowlad-goboleedka u leeyahay in uu sii jiro, sheegidda, sida ku habboon, arrimaha la xiriiira in uu sii jiro iyo adeegsiga xisaabaadka ku saleysan sii jiridda haddii Wasaaraddu ay ku talo jirto lacagaynta ama iibinta hantida Dowladda mooyaane, ama in ay hawlhooda joojiyaan, ama aan lahayn wax kaloo dhab ah oo aan la hayn in uu sidaa la sameeyo ma ahee.

Kuwa ay mas'uuliyaddu ka saaran tahay maamulka waxaa ay mas'uul ka yihiin kormeerka geeddi-socodka warbixinta maaliyadeed ee hay'adda.

Mas'uuliyadaha Hantidhowraha ee Hantidhowr-ku-sameynta Bayaamada Maaliyadeed

Ujeedooyinkeenu waa in aan helno ballanqaad caqligal ah oo ku saabsan Bayaamo Maaliyadeed oo marka si guud loo eego aaney ku jirin khaladaad, khayaanno iyo ilduuf mid uu ku yimaadaba iyo in aan soo saarno warbixin hantidhowr oo aanu sal uga dhigeyno ra'yigeena. Ballanqaad caqligal ah waa ballanqaad heerkiisu sarreeyo, laakiin ma aha damaanadqaad sheegaya in hantidhowr loo sameeyey si waafaqsan Jaangooyooyinka Caalamiga ah ee Hantidhowrka (ISAs) uu mar walba soo helayo khaladaad marka uu jiroba. Khalad waxaa uu ku imaan karaa khayaanno ama ifduuf. Hawsha hantidhowrka mar walba waa ay ogaaneysaa khalad la taaban karo marka uu jiro. Khaladku waxaa ay ka dhalan karaan khayaanno ama ilduuf waxaana loo qaadanayaa in uu yahay mid la taaban karo haddii, mid ahaan ama wadar ahaanba, si caqligal ah loo fili karo in ay saameyn ku yeeshaan go'aanka la xiriiira kheyraadka dhaqaale ee isticmaalayaashu ay qaateen marka lagu saleynayo Bayaannada Maaliyadeed.

Iyada oo qayb ka ah hantidhowrka sida ay dhigayaan Jaangooyooyinka Caalamiga ah ee Hantidhowr-sameynta ee hantidhowrka (ISAs), waxaan qaadanaynaa fikir xirfadlenimo waxaana joogteynaa shaki guud ahaan inta uu socdo hantidhowrka. Waa in aan sidoo kale:

- Soo ogaanno oo aan u-kuurgalno halisaha khalad la taaban karo uu ugu jiri karo bayaaamada, khayaano ama ilduuf midka uu doono ha ku yimaadee, in aan nakh-shadeyno oo aan sameyno habraacyada hantidhowrka oo wax ka qabanaya halisahan, oo aan u helno caddeyn dad ku filan oo u habboon si aan sal ugu yeelno ra'yigeenna. Halista ah in aan la soo ogaan khalad la taaban karo oo ku yimid khayaano ayaa ka badan tan midka ku yimid ilduufka, maaddaama khayaamadu ay ku lug lahaan karto mu'aamarad, been-abuur, in si ku-talogal ah wax looga tago, maldahaad, ama in laga dul-boodo kontoroolkii gudaha hay'adda.
- Soo helno faham ku aaddan kantarool gudaha hay'adda ah oo u habboon hantidhowrka si aan u nakh-shadeyno habraacyo hantidhowr oo ku habboon xaaladaha jira, laakiin aanu hadafka laga leeyahay ahayn in la bixiyo ra'yi ku aaddan taabogalnimada kantaroolka gudaha ee hay'adda.
- Qiimeyno habboonaanshaha siyaasadaha xisaabaadka ee la adeegsadey iyo caqligalnimada qiyaasaha xisaabaadka iyo shaac-ka-qaadista la xiriirta ee ay sameeyeen xubnaha.
- Go'aan ka gaarno habboonaanshaha in Wasaaraddu isticmaasho waxyaabaha lagu saleeyo xisaabaadka ee ah in ay sii jiri doonaan oo ku saleysan caddeynta hantidhowrka/baarista ee la helay, haddii aan la hubin waxyaabaha la taaban karo oo la xiriiira dhacdooyin ama xaalado shaki mug leh gelin kara Dowlad-goboleedku in uu awoodo in uu sii jiro mustaqbalka. Haddii aan go'aan ku gaarno in aan la hubin waxyaabaha la taaban karo, waxaa nalooga baahan yahay in aan ku muujino warbixinta hantidhowrkeenna shaac-ka-qaadista Bayaanka Maaliyadda ama, haddii shaac-ka-qaadistaasi aan ku filnayn, in aan wax-ka-beddelno ra'yigeenna. Go'aannadeenna waxaa ay ku saleysan yihiin caddeynta hantidhowrka la helay ilaa taariikhda warbixinta hantidhowrkeenna. Hase-yeeshee, dhacdooyinka ama xaaladaha mustaqbalka waxaa ay sababi karaan in Dowlad-goboleedku uu sii shaqeyn waayo.

- Qiimeyno guud ahaan sida loo soo bandhigey, loo diyaariyey iyo waxa ku jira Bayaanka Maaliyadda, ee ay ka mid yihiin shaac-ka-qaadista, iyo in Bayaanka Maaliyadda uu tacaamulaadka iyo dhacdooyinka aasaaska u ah u muujiyo si ka bixineysa sawir dhab ah oo caddaalad ku dhisan.

Kuwa maamulka loo xilsaaray waxaan kala xiriireynaa arrimo, ay ka mid yihiin, baaxadda iyo waqtiga loo qorsheeyey hantidhowrka iyo waxyaabihii muhiimka ahaa ee hantidhowrka lagu soo ogaadey, oo ay ka mid yihiin haddiiba ay jiraan nusqaamo mug leh oo la xiriira kantaroolka gudaha ee aan soo ogaanno inta uu socdo hantidhowrkeenna.

La-hawlgalaha ka mas'uulka ah natijada hantidhowrka ee warbixintan madaxa-bannaan ee hantidhowrka waa Xisaabiye Guud (CPA) John Mucheru Lambarka Shahaaddada ee uu ku hawlgalo ay tahay 1854.


Baker Tilly Merall's
Certified Public Accountants
P.O. Box 67486 – 00200, Nairobi

Date: 18 Nov 2020





BAYAAMADA
MAALIYADEED EE
WASAARADHA & TAN
MIDEYSAN EE DOWLAD-
GOBOLEEDKA
GALMUDUG EE
SOOMAALIYA (GSS)

31ka Disembar ee Sannadkii Dhammaadey
2018

*Loo diyaariyay si waafaqsan Jaangooyada
Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda
(IPSAS) – Warbixin Maaliyadeedka Xisaabaadka
Kaashka Ku Saleysan*

**Waxaa Diyaariyey Wasaaradda
Maaliyadda**

Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS)

Bayaanka Caddaynta – Bayaamada Maaliyadeed ee 2018

Bayaamada maaliyadeed ee 2018 oo ay wehliyaan ama la socdaan qoraalada dheeriga ah ayaa waxaa loo diyaariyey si waafaqsan Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda , Warbixin Maaliyadeedka Xisaabaadka Kaashka Ku Saleysan

Ra'yiga Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha ahaan, Bayaamada Maaliyadeed ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS) sida loogu gudbiyay hantidhowrka ee waafaqsan Qaybta 30aad ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha ee 2018 ee uu meelmariyay baarlamaanka, waa kuwo sax ah oo sawir dhab ah oo miisaaman ka bixinaya booska dhaqaale ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya 31ka disembar ee Sannadkii dhammaadey 2018.

Aniga oo ka wakiil ah Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya



29/04/2019

Wasiirka Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha

Taariikh:

Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya Warqadda Maaliyadda Iskudhafaan ee Qabashada iyo Lacag-bixinta Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda 31ka Disembar ee sannadkii Dhammaadey 2018					
		2018		2017	
		Waxaa Kantaroola	Lacag-bixinnada	Waxaa Kantaroola	Lacag-bixinnada
		TSA	Dhinac Saddexaad	TSA	Dhinac Saddexaad
		USD	USD	USD	USD
Nooca Lacagta					
Lacag-qabashada (Receipts / Inflows)					
Canshuuraha					
Canshuuraha alaabada iyo adeegyada	2	630,166			
Canshuuraha ganacsiga iyo wax-is-dhaafsiyad	3			339,929	
Canshuuraha		630,166		339,929	
Deeqaha					
Ka yimid ururrada caalamiga ah	4	355,964		357,824	3,199,452
Ka yimid qaybaha kale ee dowladda guud	5	962,500		1,711,792	
Deeqaha		1,318,464		2,069,616	3,199,452
Lacag-qabashada (Receipts / Inflows)		1,948,629		2,409,545	3,199,452
Lacag-bixinnada (Payments / Outflows)					
Gunnooyinka La Siiyo Shaqaalaha					
Mushaaraadka iyo Ujuurooyinka	6	1,610,508		1,809,293	
Gunnooyinka La Siiyo Shaqaalaha		1,610,508		1,809,293	
Adeegsiga Alaabada iyo Adeegyada					
Safarrada & Shirarka	7	15,420		7,020	2,386,986
Kharashaadka Hawlgallada	8	130,620		189,475	213,935
Kiro	9	12,800		3,098	
Kharashaadka Kale ee Hawlgallada La Xiriira	10	42,445		500	598,531
Kharashaadka Xallinta Khilaafaadka	11	33,010			
Adeegsiga Alaabada iyo Adeegyada		234,295		200,093	3,199,452
Deeqaha					
Deeqaha Qaybaha Kale ee Dowladda Guud	12	247,257		31,559	
Deeqaha		247,257		31,559	
Dheefaha/Faa'iidooyinka Bulshada					
Dheefaha/Faa'iidooyinka bulshada ee shaqo-si	13			29,200	
Dheefaha/Faa'iidooyinka Bulshada				29,200	
Kharashaadka Kale					
Kharashaadka kale ee kala duwan	14	13,939		134,100	
Kharashaadka Kale		13,939		134,100	
Hantida aan maaliyadda ahayn					
Hantida Ma Guurtada ah	15	30,800			
Hantida aan maaliyadda ahayn		30,800			
Lacag-bixinnada (Payments / Outflows)		2,136,799		2,204,245	3,199,452
Kororka Hoos-u-dhaca Kaashka		(188,170)		205,300	
Kaashka Bilowga Sannadka		208,366		3,066	
Kaashka Dhammaadka Sannadka	1.4	20,197		208,366	

Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya

**Warqadda Maaliyadda Iskudhafan ee Isbarbardhigga Qaddarka Miisaaniyada Lasii Dejiyay iyo Ta Rumoowday
31ka Disembar ee sannadkii Dhammaadey 2018**

**Miisaaniyadda Qoondoynta ee Loo Ansaxiyey Habka Kaashka Ku Saleysan
(Kala-sooca Lacag-bixinnada oo Heerka Dhaqaale ah)**

	Lacagaha	2018				2017	
		Qiyaasta	Qiyaasta	Waxaa	Farqiga u Dhexeeya	Waxaa	Lacag-bixinta
		Asalka ah ee	Kama Dambeysta ah	Kantaroola	Miisaaniyadda	Kantaroola	Lacag-bixinta
		Qoondada	Qoondada	TSA	Kama Dambeysta & Ta Rumoowday	TSA	Dhinac Saddexaad
		A	B	C	C-B		
		USD	USD	USD	USD	USD	USD
Lacag-qabashada (Receipts / Inflows)							
Canshuuraha							
Canshuuraha mushaaraadka iyo shaqaalaha							
Canshuuraha alaabada iyo adeegyada		3,535,982	3,535,982	630,166	(2,905,816)		
Canshuuraha macaamulaadka iyo ganacsiga caalamiga ah						339,929	
Canshuuraha	16	3,535,982	3,535,982	630,166	(2,905,816)	339,929	
Deeqaha							
Ka yimid dowladaha shisheeye		350,000	350,000		(350,000)		
Ka yimid ururrada caalamiga ah		1,830,255	1,830,255	355,964	(1,474,291)	357,824	3,199,452
Ka yimid qaybaha kale ee dowladda guud		1,950,000	1,950,000	962,500	(987,500)	1,711,792	
Deeqaha	17	4,130,255	4,130,255	1,318,464	(2,811,791)	2,069,616	3,199,452
Lacag-qabashada (Receipts / Inflows)		7,666,237	7,666,237	1,948,629	(5,717,608)	2,409,545	3,199,452
Lacag-bixinnada (Payments / Outflows)							
Gunnooyinka La Siiyo Shaqaalaha							
Mushaaraadka iyo Ujuurooyinka		6,042,154	6,042,154	1,610,508	(4,431,646)	1,809,293	
Gunnooyinka La Siiyo Shaqaalaha	18	6,042,154	6,042,154	1,610,508	(4,431,646)	1,809,293	

Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya

Warqadda Maaliyadda Iskudhafan ee Isbarbardhigga Qaddarka Miisaaniyada Lasii Dejiyay iyo Ta Rumoowday
31ka Disembar ee sannadkii Dhammaadey 2018

Miisaaniyadda Qoondeynta ee Loo Ansaxiyey Habka Kaashka Ku Saleysan
(Kala-sooca Lacag-bixinnada oo Heerka Dhaqaale ah)

	Notes	2018			2017	
		Qiyaasta Asalka ah ee Qoondeynta A USD	Qiyaasta Kama Dambeysta ah Qoondeynta B USD	Waxaa Kantaroola TSA C USD	Farqiga u Dhexeeya	
					Miisaaniyadda Kama Dambeysta & Ta Rumoowday C-B USD	Waxaa Kantaroola TSA USD
Adeegsiga Alaabada iyo Adeegyada						
Safarrada & Shirarka		114,350	114,350	15,420	(98,930)	7,020
Kharashaadka Hawlaha La Xiriira		395,450	395,450	130,620	(264,830)	189,475
Kiro		125,700	125,700	12,800	(112,900)	3,098
Kharashaadka Kale ee Hawlaha La Xiriira		120,970	120,970	42,445	(78,525)	500
Kharashaadka Xallinta Khilaafaadka		114,000	114,000	33,010	(80,990)	
Kharashka Soo Noqnoqda ee Aan Mushaarka Ahayn ee RCRF		55,200	55,200		(55,200)	
Ku-talgal		300,000	300,000		(300,000)	
Adeegsiga Alaabada iyo Adeegyada	19	1,225,670	1,225,670	234,295	(991,375)	200,093
Deeqaha						
Deeqaha Qaybaha Kale ee Dowladda Guud		252,000	252,000	247,257	(4,743)	31,559
Deeqaha	20	252,000	252,000	247,257	(4,743)	31,559
Dheefaha/Faa'iidooyinka Bulshada						
Dheefaha/Faa'iidooyinka bulshada ee shaqo-siiyaha						29,200
Dheefaha/Faa'iidooyinka bulshada	21					29,200
Kharashaadka Kale						
Kharashaadka kale ee kala duwan		115,370	115,370	13,939	(101,431)	134,100
Kharashaadka Kale	22	115,370	115,370	13,939	(101,431)	134,100
Hantida aan maaliyadda ahayn						
Hantida Ma Guurtada ah		119,043	119,043	30,800	(88,243)	
Hantida aan maaliyadda ahayn	23	119,043	119,043	30,800	(88,243)	
Lacag-bixinnada (Payments / Outflows)		7,754,237	7,754,237	2,136,799	(5,617,438)	2,204,245

Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya

Bayaanka Hawlgallada GFS

Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda

Ee Sannadka Dhammaadey 31ka Disembar 2018

	2018 USD	2017 USD
Macaamulaadka Saameynaya Qiimaha Sugaan		
Dakhliga	1,948,629	5,608,997
Canshuuraha	627,016	339,929
Canshuuraha mushaaraadka iyo shaqaalaha	-	-
Canshuuraha alaabada iyo adeegyada	630,166	-
Canshuuraha ganacsiga iyo wax-is-dhaafsiyada caalami	-	339,929
Deeqaha	1,318,464	5,269,068
Ka yimid ururrada caalamiga ah	355,964	3,557,276
Ka yimid qaybaha kale ee dowladda guud	962,500	1,711,792
Kharashaadka	2,105,999	5,403,697
Gunnooyinka La Siiyo Shaqaalaha	1,610,508	1,809,293
Mushaaraadka iyo Ujuurooyinka	1,610,508	1,809,293
Adeegsiga Alaabada iyo Adeegyada	234,295	3,399,545
Safarrada & Shirarka	15,420	2,394,006
Kharashaadka Hawlaha La Xiriira	130,620	403,410
Kiro	12,800	3,098
Kharashaadka Kale ee Hawlaha La Xiriira	42,445	599,031
Kharashaadka Xallinta Khilaafaadka	33,010	-
Deeqaha	247,257	31,559
Deeqaha Qaybaha Kale ee Dowladda Guud	247,257	31,559
Dheefaha/Faa'iidooyinka Bulshada	-	29,200
Dheefaha/Faa'iidooyinka bulshada ee shaqo-siiyaha	-	29,200
Kharashaadka Kale	13,939	134,100
Kharashaadka kale ee kala duwan	13,939	134,100
Haraaga Guud ee Hawlaha La Xiriira	(157,370)	205,300
Macaamulaadka Hantida Aan Maaliyadda Ahayn		
Isbeddelka Macaamulaadka Qiimaha Sugaan (Hantida)	30,800	-
Hantida aan maaliyadda ahayn	30,800	-
Hantida Ma Guurtada ah	30,800	-
Macaamulaadka Hantida Maaliyadeed & Deymaha		
Isbeddelka Macaamulaadka Qiimaha Sugaan (Hantida)	(188,170)	205,300
Hantida maaliyadeed	(188,170)	205,300
Gudaha	(188,170)	205,300
Deymaha sugan ee la qatey	-	-
Deymo	-	-
Kala-bandaanshah Guud ee Istaatistik	-	-

Qoraalka 1aad Siyaasadaha Xisaabaadka Mugga Leh oo Kooban

1.1 Aasaaska Diyaarinta

Bayaamada maaliyadeed ee mideysan ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS) waxaa la diyaariyey iyadoo la raacayo Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha ee 2018 iyo Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda ee loo yaqaanno *International Public Sector Accounting Standard (IPSAS)* – Warbixinta Maaliyadeed ee Waafaqsan Xisaabaadka Kaashka Ku Saleysan. Qoraalladan ku qoran bayaamada maaliyadeed waxay noqdaan qayb aan looga maarmayn fahamka bayaamada waana in lala akhriyaa bayaamada. waxaa si joogto ah muddada oo dhan loo adeegsanayay siyaasadaha xisaabaadka.

1.2 Hay'adda Ka-warbixinaysa

Bayaamada Maaliyadeed waxaa loogu talogaley Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS). Sannadkan waa sannadka labaad ee ay Dowladdu hawlgallayso waxaanna uu ka hadlayaa ama ku saabsan yahay muddada u dhaxeysa 1da Jannaayo – 31ka Disembar ee 2018. Bayaamada maaliyadeed waxaa ku jira hay'adaha ka warbixinaya sida ku xusan *Xeerka Qoondoynta GSS Lr. 1aad* ee 2018 waxayna ka kooban yihiin:

- 1 Wasaaradda Arrimaha Gudaha & Dowladaha Hoose
- 2 Wasaaradda Cadaaladda & Arrimaha Garsoorka
- 3 Wasaaradda Maaliyadda & Horumarinta Dhaqaalaha
- 4 Wasaaradda Amniga Gudaha
- 5 Wasaaradda Qorsheynta & Iskaashiga Caalamiga
- 6 Wasaaradda Awqafta & Arrimaha Diinta
- 7 Wasaaradda Kaluumeysiga & Kheyraadka Badda
- 8 Wasaaradda Hawlaha Guud & Dib-u-dhiska
- 9 Wasaaradda Ganacsiga & Warshadaha
- 10 Wasaaradda Warfaafinta & Dhaqanka
- 11 Wasaaradda Gaadiidka Cirka & Dhulka
- 12 Wasaaradda Waxbarashada
- 13 Wasaaradda Boostada & Isgaarsiinta
- 14 Wasaaradda Beeraha & Xanaanada Xoolaha
- 15 Wasaaradda Bey'ada, Dhirta & Daaqa
- 16 Wasaaradda Caafimaadka

- 17 Wasaaradda Haweenka & Arrimaha Qoyska
- 18 Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha
- 19 Wasaaradda Dhalinyarada & Isboortiga
- 20 Wasaaradda Biyaha & Korontada
- 21 Wasaaradda Dastuurka & Dib-u-heshiisiinta
- 22 Wasaaradda Dekedaha & Gaadiidka Badda
- 23 Wasaaradda Qurba-joogta & Dhiirrigalinta Maalgashiga
- 24 Wasaaradda Gargaarka Bini'aadannimada & Daryeelka Naafada
- 25 Madaxtooyada
- 26 Xafiiska Guddoomiyaha Baarlamaanka iyo Baarlamaanka
- 27 Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah
- 28 Xafiiska Hantidhowrka Guud
- 29 Xafiiska Madaxa Xukuumadda

Wasaaradaha oo dhan waxaa lagu dhisey **Wareegto Madaxeyne** oo cinwaankeedu uu ahaa *Wareegto Lagu Dhisayo Wasaaradaha Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya oo lagu Qeexay Doorarka iyo Shaqooyinka Wasaaradaha* kuna taariikheysan 28ka Disembar 2015 iyo wareegto gaar ah oo lagu dhisayo Wasaaradda Maaliyadda oo cinwaankeedu uu ahaa *Wareegto loogu talagalay Ujeedooyin Lagu Dhisayo Wasaaradda Maaliyadda ee Dowlad-goboleedka Galmudug iyo Arrimaha Kale ee La Xiriira* kuna taariikheysan 28ka Disembar, 2015.

Wareegto gooni ah oo ku saabsan dhisidda Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah (CSC) iyo ujeeddadiisa oo cinwaankeedu uu ahaa *Wareegto lagu dhisayo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya* oo ku taariikheysan 28ka Disembar, 2015 ayaa lagu dhisey xafiiska Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah waxaanna xeer loo beddelay 24^{ka} Juun 2018. Xeerar la socda ayaa sidoo kale lagu dhisey Shaqaalaha Rayidka ah iyo qaab-dhismeedka Mushaaraadka Shaqaalaha Rayidka ah. Dastuurka Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS) ayaa si otomaatik ah u dhisey Baarlamaanka Galmudug. Bayaamada kala duwan ee dhammaan hay'adaha ayaa waxaa ay noqdaan qayb ka mid ah bayaamada maaliyadeed ee mideysan maadaama hay'adahan ay qayb ka ahaayeen *Xeerka Qoondaynta Lr. 1aad ee 2018*.

Bayaamada maaliyadeed ee iskudhafka ah waxaa ka mid ah dhammaan hay'adaha la kantaroolay intii lagu guda jiray sannadka. Hay'adaha midkoodna iskama laha hay'ad kale ama qayb ganacsi gaar ah.

1.3 Qaashada Waqtiga Hore ee Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda (IPSAS) – Warbixinta Maaliyadeed ee Waafaqsan Xisaabaadka Kaashka Ku Saleysan ee 2017.

IPSAS 2017 ayaa wuxuu dhaqangal noqon doonaa 1da Jannaayo 2019. Wasaaradda Maaliyadda ayaa waxay go'aansatay in ay goor hore qaadata warbixinta maaliyadeed ee waafaqsan xisaabaadka kaashka ku saleysan ee IPSAS 2017 iyada oo adeegsanaysa muddo xisaabaadka laga bilaabay Jannaayo 2018. Si kastaba, qaashada waqtiga hore ah ayaa waxaa dhiirrigeliya jaangooyada. Tani waxay kaliya isbeddelo u keenaysaa aragtida am qacda hore ee bayaanka maaliyadeed halka lacag-bixinnada dhinaca 3^{aad} laga saaro aragtida am qacda hore ee Qabashada iyo Lacag-bixinnada iyo Isbarbardhigga Qaddarka Miisaaniyada Lasii Dejiyay iyo Ta Rumoowday. Lacag-bixinnada dhinaca 3aad waxaa loogu soo bandhigay bayaankan maaliyadeed shaacin ikhtiyaari ah ahaan (Eeg qoraalka 24aad) mana jirin isbeddelo lagu sameeyay siyaasadaha xisaabaadka iyo habraaca kale ee warbixinta.

1.4 Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda (TSA) & Xisaabta Mashruuca

Xisaabta mashruuca ayaa waxaa loo furey si waafaqsan oggolaansho qoraaal ah oo laga helay Wasiirka Maaliyadda, sida xisaab-hoosaad hoos imaata Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda (TSA) ahaan. Iyada oo loo hoggaansamayo shuruudaha deeqda Barnaamijka Tayaynta Shaqaalaha Dowladda (RCRF II) ee uu maalgeliyo Bankiga Adduunka, ayaa xisaabta mashruuca kaliya loo furay hawlgallada mashruuca RCRF II iyo in laga fogaado in ay maaliyadaha deeqda ay iskudhafmaan hawlgallada kale ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS). Sida ay ahayd dhammaadka sannad maaliyadeedkii 2018.

Haraaga hoos ku xusan waxaa ku jira jeegag aan weli la bixin iyo haraaga ku harsan Bankiga Dhexe ee Soomaaliya oo aan lahayn dhaqdhaqaaqa macaamulaad maaliyeed tani iyo 2016 waxaanna weli noogu jira isla caddadkii. Wadarta guud ee jeegagga aan weli la bixin ee xisaabta mideysan ee waaxda khasnadda ee dowladda Galmudug waa **6,211** oo laga bixin/jari doono

haraaga lacagta taala bankiga oo ah **6351** si loo waafajiyo haraaga diiwaanka gaargaarka (*ledger*) oo ah **\$140**.

Waxaa kaloo jira jeegagga xisaabta mashruuca RCRFII oo lacagtoodu dhan tahay **\$31421** oo aan weli la bixin taas oo laga jari doono haraaga bankiga oo dhan **49500** si la isu waafajiyo haraaga diiwaanka gaargaarka ah (*ledger*) oo aan ku sheegnay shaxda hoose. Haraaga labada xisaabba wuxuu ahaa sida soo socota.

	2018 USD	2017 USD
Xisaabaadka Mideysan ee Waaxda Khasnadda	2,118	174,605
Xisaabta Mashruuca WB-RCRFII	18,079	33,761
Wadarta Guud	20,197	208,366

1.5 Lacagaha cadaanka ah iyo waxa u dhigma

Lacagaha cadaanka ah iyo waxa u dhigma waxaa loola jeedaa lacagaha waraaqda ah iyo qadaadiicda la hayo iyo dhigaal kasta ee lagu hayo banki ama hay'ad maaliyadeed. Kaashka waxaa loo aqoonsan yahay qaddarkiisa ee qiimaha lacageed.

Kaashka lagu darey warqadda qabashada iyo bixinta lacagta wuxuu ka kooban yahay qaddarkan lacageed ee soo socda:

	2018 USD	2017 USD
Kaashka La Hayo iyo Lacagaha Ku Harsan Bankiyada	20,197	208,366
Wadarta guud	20,197	209,366

\$2,118 oo ah Kaashka La Hayo ayaa lagu hayaa Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda waxaa ayna ka soo xaroodeen dakhliga gudaha ee Dowlad-goboleedka Galmudug (GSS) iyo Dowladda Federaalka ee Soomaaliya (DFS) iyada oo \$18,079 uu Bankiga Adduunka u hayay Mashruuca RCRFII 31ka Disembar ee Sannadkii 2018.

1.6 Nooca Lacagta Warbixinta

Nooca lacagta looga warbixinayo waa Doolarka Mareykanka (USD)

1.7 Deymaha

Sannadkii 2017 GSS waxaa ku harsanaa deymo aan dulsaar lahayn oo ay 2015 ka qaadatay ganacsiyada degaanka kuwaas oo guud ahaan isku noqonaya \$1,086,433. Deymahan waxaa lagu hayaa oo ay ku qoran yihiin diiwaan gacanta lagu qoray oo gaar ah. Maaliyadaha waxaa loo adeegsadey in lagu dhiso maamulka GSS. Iyada oo sabab u ah caqabado xagga miinaasiyadda ah waxaa la isku afgartey in GSS ay dib-u-bixiso lacagaha deynta ah iyada oo u bixinaysa qaab lacag qawiman oo joogto ah (instalments) oo ku xiran helitaanka maaliyadaha. Shaxda hoose waxaa ku xusan jadwalka deyn bixinta.

Wadarta Guud ee Haraaga Lagu Xiray Sannad-Maaliyadeedka 2017	1,086,433
Dib-u-bixinnada Sannad-maaliyadeedka 2018	<u>13,855</u>
Haraaga Haray Dhammaadka 31 Disembar-2018	<u>1,072,578</u>

1.8 Kaalmada Dibadda ee Aan Lala Soo Bixin

Intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedkii 2017, GSS waxaa ay xaq u yeelatay in ay ka qaybqaadato mashruuca socda ee tayayta shaqaalaha ee loo yaqaano Maalgelinta Kharashaadka Soo Noqnoqda iyo Dib-u-habeynta (Recurrent Cost and Reform Financing (RCRF II). Mashruucan wuxuu socon doonaa muddo shan sano ah, hase-yeeshee iyada oo sabab u ah maaliyado dheeraad ah oo la helay (AF) ayaa muddada la kordhiyay (ilaa 30ka Juunyo 2022) waxaana dib-u-eegis loogu sameyn karaa si sannadle ah. Mashruuca RCRF II waa sanduuq deeq-bixiyeyaal badan (multi-partner fund) oo uu maamulo Ururka Horumarinta Caalamiga ah ee loo yaqaano International Development Association (IDA), iyada oo maaliyadahanna la soo marsiiyo Dowladda Federaalka ee Soomaaliyada (DFS). Hadaafka mashruuca waa in lagu taageero qaataha in uu bixiyo mushahaar joogto ah oo la isku haleyn karo, iyo in la dhiso aasaaska fulinta miisaaniyadda iyo nidaamyo lacag-bixin hufan oo loogu talagalay qaybaha/waaxaha aan amniga

ahayn ee Dowladda Federaalka, Dowlad-goboleedyada xaq u leh iyo Maamullada Ku-meel-gaarka ah iyo Kuwa Hadda La Dhisayo. Sida ku xusan heshiiska isku haya ee Lambarkiisu yahay TFOA0534 Ku Taariikheysan 29ka Juunyo 2015 ee u dhaxeeya Dowladda Federaalka ee Soomaaliya (DFS), oo ka wakiil ah dhammaan dowlad-goboleedyada dhisan & kuwa hadda la dhisaya, iyo Ururka Horumarinta Caalamiga ah ee loo yaqaano International Development Association (IDA), Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya iyadoo sabab u ah heshiis-hoosaad ay la gashey Dowladda Federaalka ee Soomaaliya (DFS) waxaa ay mashruuc socda la gashey IDA oo socon doonaa ilaa 20ka Juunyo 2020 (waxaa hadda la kordhiyay muddada iyad oo la gaarsiiyay 30 Juunyo 2022 oo sabab u ah heshiis maaliyad-siin dheeraad ah). Kaalmada dibadda ee aan lala soo bixin ee la xiriirta mashruuca RCRF II waxaa ay ku xiran tahay in GSS ay ka soo baxdo shuruudaha aasaasiga ah ee mashruuca. GSS waxaa ay ka soo baxday shuruudaha mashruucana wuxuu leeyahay taariikh dhaqangal oo ka bilaabanaysa 1da Luulyo 2016. Miisaaniyadda RCRFII ee lagu muujiyay Dokumeentiga Qiimeynta Mashruuca (PAD) ma tilmaamo kala-dhigdhigista miisaaniyadda dejisan ee gaar ahaan loogu talagalay GSS. Qaddarka deeqda waxaa ku waajiba dib-u-eegista iyo ansixinta sannadlaha ah ee IDA. Sannad maaliyadeedka dhammaanaya 31ka Disembar 2018, GSS waxaa ay ka heshay guud ahaan maaliyad gaareysa \$269,111 mashruuca RCRF II marka loo eego miisaaniyadda gaaraysa 1,679,632. Kala-duwanaanshaha ayaa ka dhashey tirada Shaqaalaha Rayidka ah ee aan la qorin iyo in aysan awoodin in ay hesho qaybta kharashaadka soo noqnoqda ee aan mushaaaraadka ahayn.

1.9 Qaddarada Lacagta Looga Warbixinayo

Qaddarada lacagta looga warbixinayo waa qiima dhan oo ah doolarka mareykanka (USD) ah, oo loo beddelay doolarka ugu dhow.

1.10 Miisaaniyadda Asalka ama Kama Dambeysta ah ee La Ansaxiyay iyo Isbarbardhigga Qaddarka Miisaaniyadda iyo Ta Rumoowday

Miisaaniyadda la ansaxiyey waxaa la diyaariyey iyadoo lagu saleynayo isla xisaabaadka (Kaash ku saleysan) iyo isla aasaaska kala-soocidda ee lagu saleeyay bayaamada maaliyadeed. Waxaa ku jira isla hay'adaha ku jira bayaanka maaliyadeed ee iskudhafan.

Miisaaniyadda asalka waxaa ansaxiyey golaha Wasiirada ka-dibna waxaa saxiixay Madaxweynaha marka ay taariikhdu ahayd 24ka Juun, 2018. Ma jirin miisaaniyad dheeri ah intii muddadan lagu guda jiray.

Dhaqdhaqaaqa meelaha ay miisaaniyadda ku baxday ee qoondaynta qiyaasta kama dambeysta ah waxaa loo aaneynayaa dib-u-qoondaynta miisaaniyadda ee hay'adaha miisaaniyadda gudahooda.

1.11 Taariikhda Oggolaanshaha

Bayaamada maaliyadeed waxaa marka ay taariikhdu ahayd **29/04/2019** ansaxiyay in la bixiyo Mudane Saciid Siyaad Shirwac, Wasiirka Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha.



Qoraalka 2aad Canshuuraha Alaabada iyo Adeegyada

Sannadkii 2018, Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya waxaa ay soo rogtay canshuurta waddo-marista beddelkii canshuurta hore ee loo oran jiray canshuurta alaabooyinka sii-gudbaya. Sannad maaliyadeedkii 2018, canshuurta waddo-marista, canshuurta macaashka ganacsiga, ujuurooyinka rakaabka maxaliga ah iyo qaddar aad u yar oo laga helay shatiyada ganacsiga iyo xirfadaha ayaa waxay ahaayeen canshuuraha kaliya laga qaaday dabaqadahan. Canshuurtan waxaa sida saxda ah loogu yeeraa canshuurta waddo-marista maadaama canshuurta laga qaado miisaanka guud ee xamuulka saaran gaadiidka, iyada oo aanan lagu qiimayn qaadisteeda tirada ama qiimaha alaabta gaadiidka saaran. Waddada weyn ee isku xiraysa Galmudug iyo Dekedda Boosaaso ayaa ahayd isha ugu weyn ee ay canshuurahan ka soo xaroodeen. Qaddarka canshuurta lagu soo rogo ee laga qaado waxaa ay ku xiran tahay miisaanka guud ee diiwaangashan ee gaadiidka adeegsanaya waddada, ee ma ahan tirada ama qiimaha alaabta saaran. Qiime canshuur go'an ayaa la adeegsadaa. Canshuurta macaashka ganacsiga iyo ujuurooyinka rakaabka maxaliga ah ayaa waxaa la bilaabay saddexdii-bilood ee ugu dambeeyay sannadka 2018 waxaanna qaddar yar laga ururiyay milkiilayaasha ganacsiyada. Shaxda soo socota waa kala dhigdhigista faahfaahsan ee canshuuraha jidka ee la qaaday iyo meelaha ay ka soo xaroodeen.

	Qoraallada Tixraaca	2018 USD	2017 USD
Canshuurta Macaashka	2.1	31,840	-
Shatiyada Ganacsig & Xirfadda	2.2	1,799	-
Ujuurooyinka Rakaabka Maxaliga ah	2.3	27,345	-
Canshuurta Waddo-marista	2.4	569,181	-
Canshuurta alaabta sii-gudbaysa			31,752
		630,166	31,752

Qoraalka 3aad Canshuuraha ganacsiga caalamiga ah (Alaaboyinka Ka Gudbaya Xudduudaha Dowlad-goboleedka)

Sannadkii 2017, Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya waxaa ay soo rogtay canshuurta alaaboyinka sii-gudbaya beddelkii canshuuraha hore loo oran jiray canshuuraha kastamada ama furdada. Sannad maaliyadeedkii 2017, Canshuuradaha alaaboyinka sii-gudbaya waxaa ay ahaayeen canshuuraha kaliya laga qaaday dabaqaddan. Canshuurtan waxaa sida saxda ah loogu yeeraa canshuurta isticmaalaha jidka maadaama canshuurta laga qaado miisaanka guud ee xamuulka saaran gaadiidka, iyada oo aanan lagu qiimayn qaadisteeda tirada ama qiimaha alaabta gaadiidka saaran. Waddada weyn ee isku xiraysa Galmudug iyo Dekedda Boosaaso ayaa ahayd isha ugu weyn ee ay canshuurahan ka soo xaroodeen. Qaddarka canshuurta lagu soo rogo ee laga qaado waxaa ay ku xiran tahay miisaanka guud ee diiwaangashan ee gaadiidka adeegsanaya waddada, ee ma aha tirada ama qiimaha alaaboyinka. Qiime canshuur go'an ayaa la adeegsadaa. Shaxda soo socota waa kala dhigdhigista faahfaahsan ee canshuuraha jidka ee la qaaday iyo meelaha ay ka soo xaroodeen.

	2018 USD	2017 USD
Canshuurta alaabta sii-gudbaysa	-	331,752
Canshuurta kastamka/furdada- Alaabta La Soo Dejiyay	-	8,177
		339,929

Qoraalka 4aad Deeqaha ka yimid Ururrada Caalamiga ah

Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda

Sannad maaliyadeedkii 2018, deeqo guud ahaan gaaraya \$355,964 ayaa laga helay. Guud ahaan deeqo gaaraya \$269,111 ayaa laga helay Mashruuca RCRF II, oo uu maalgeliyo Sanduuqa Somalia Multi-Partner Fund (SMPF) oo uu maamulo Bankiga Adduunka. Deeq dheeraad ah oo gaaraysa \$86,853 ayaa PREMIS laga helay oo lagu maalgelinayo alaabada xafiiska oo ay ka faa'iideen laba hay'adood, kuwaas oo kala ah Wasaaradda Maaliyadda iyo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah. Lacagihii ka harayna waxaa loo qoondeeyay Ololaha dakhliga oo lagu qabtay degmooyinka Galkacyo iyo Dhuusamareeb marka ay taariikhdu ahayd 26 Disembar, 2017 iyo Sibtembar 2018 oo ah sida ay u kala horeeyaan.

	2018 USD	2017 USD
Mashruuca RCRF II	269,111	352,544
Mashruuca Premis	86,853	5,280
	355,964	357,824

Qoraalka 5aad Deeqaha ka yimid Qaybaha Kale ee Dowladda Guud

Sannadkii 2018 Dowladda Federaalka ee Soomaaliya waxay oggolaatay in ay bixiso maaliyadaha ciidamada ammaanka ee Galmudug iyo kharashaadka la xiriira maamulkooda. Dowladda Federaalka ee Soomaaliya ayaa waxaa laga helay deeqo guud ahaan gaaraya \$962,500 muddadan. Waxaa loo qoondeeyay mashruuca kaalmada miisaaniyadda, ciidamada ammaanka, saadka ciidamada ammaanka iyo mushaaraadka siyaasiyiin, taageero loo fidiyay Baarlamaanka GSS, xalinta khilaafaadka. Maaliyaddan laga helay Dowladda Federaalka ee Soomaaliya (DFS) waxaa ku jiray maaliyadaha taageerada SURGE ee uu bixiyay Midowga Yurub waxaanna loogu talagalay horumarinta, sida dhismaha waddooyinka, dhismayaasha dowladda waxaanna soo raacay qaddar yar oo loo qoondeeyay kharashaadka socodsiinta hawlaha xafiiska.

	2018 USD	2017 USD
Dowladda Federaalka ee Soomaaliya	962,500	1,711,792
	962,500	1,711,792

Qoraalka 6aad Mushaaraadka iyo Ujuurooyinka

Mushaaraadka iyo ujuurooyinka waa isku jirka dhammaan mushaaraadka, gunnooyinka iyo lacag-bixinnada nooc kale ah ee la siiyo shaqaalaha. Shaqaalaha waxaa ka mid ah shaqaalaha rayidka ah iyo kuwa haya xilalka siyaasadeed. Kala-dhigdhigista mushaaraadka iyo ujuurooyinka la soo koobay oo dhammeystiran ayaa hoos lagu bixiyay.

	Qoraalka Tixraaca	2018 USD	2017 USD
Shaqaalaha joogtada ah	6.1	277,416	318,783
Shaqaalaha ujrada ku shaqeeya	6.2	4,800	1,400
Ciidanka Ammaanka (Booliska, Nabadsugidda iyo Ashuubta)	6.3	778,581	999,043
Lacagaha la siiyay Siyaasiyiinta	6.4	192,000	149,000
Gunnada gaadiidka	6.5	8,270	200
Gunnooyinka Kale	6.6	200,000	44,145
Bixinta Cuntada Joogtada ah	6.7	149,441	248,750
Raashiinka Maalinlaha			35,290
Mushaaraadka la siiyo Wasiirada iyo Magacaabisyada Sharciga ah			12,682
Wadarta Guud		1,610,508	1,809,293

GSS ayaa ku bixisay mushaaraadka Shaqaalaha joogtada ah lacag dhan \$277,416 oo ay maalgelinteeda ka heshay mashruuca RCRF II ka-dib markii ay ka soo baxday shuruudaha mashruuca waxaanna loo oggolaaday in ay si rasmi ah u hesho laga soo bilaabo Sannad maaliyadeedka 2016. Ciidamada ammaanka waxaa la siiyay lacag dhan \$778,581 oo xoogaa ka yar kharashaadkii 2017. Lacag dhan \$192,000 ayaa waxaa la siiyay baarlamaanka GSS. Gunnooyin kale oo gaaraya \$200,000 ayaa la siiyay ciidamada ammaanka oo hawlgallo ammaanka lagu sugayo ka fuliyay dhul u dhow meelaha ay Al-Shabaab ku sugan tahay. Lacag guud ahaan dhan \$149,441 ayaa lagu bixiyay bixinta Cuntooyinka joogtada ah waa lacag-bixinno nooc kale oo la siiyo Ciidamada Militeriga ee Galmudug waxayna isugu jirtaa cunto iyo sahay kale oo cunto la xiriirta. Gunnooyinka iyo gaadiid ay wasaaradda maaliyadda u adeegsatay hawlgalka maalinlaha ah ee dakhli ururinta iyo la hadalka bulsooyinka. Waxaa jiray lacago la siiyo la siiyo shaqaale ujuuro ku shaqeeya oo soo ururiya macluumaadka loo adeegsado diiwaangelinta ganacsiyada Degmada Dhuusamareeb waxaanna maalgeliyay PREMIS.

Shaxdan soo socota waa kala-dhigdhigista mushaaraadka iyo ujuurooyinka ee hay'adaha warbixinta:

	Ciidanka Ammaanka					
	Shaqaalaha Joogtada ah	Shaqaalaha ujrada ku shaqeeya	(Booliska, Nabadsugidda iyo Asluubta)	Lacagaha la siyay Siyaasiyiinta	Gunnada gaadiidka	Bixinta Cuntada Joogtada ah
Wasaaradda Arrimaha Gudaha & Dowladaha Hoose						
Wasaaradda Cadaaladda & Arrimaha Garsoorka						
Wasaaradda Maaliyadda & Horumarinta Dhaqaalaha	199,665	4,800			8,270	200,000
Wasaaradda Amniga Gudaha			778,581			149,441
Wasaaradda Qorsheynta & Iskaashiga Caalamiga						
Wasaaradda Awqaafta & Arrimaha Diinta						
Wasaaradda Kaluumeysiga & Kheyraadka Badda						
Wasaaradda Hawlaha Guud & Dib-u-dhiska						
Wasaaradda Ganacsiga & Warshadaha						
Wasaaradda Warfaafinta & Dhaqanka						
Wasaaradda Gaadiidka Cirka & Dhulka						
Wasaaradda Waxbarashada						
Wasaaradda Boostada & Isgaarsiinta						
Wasaaradda Beeraha & Xanaanada Xoolaha						
Wasaaradda Bey'ada, Dhirta & Daaqa						
Wasaaradda Caafimaadka						
Wasaaradda Haweenka & Arrimaha Qoyska						
Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha						
Wasaaradda Dhalinyarada & Isboortiga						
Wasaaradda Biyaha & Korontada						
Wasaaradda Dastuurka & Dib-u-heshiisiinta						
Wasaaradda Dekedaha & Gaadiidka Badda						
Wasaaradda Qurba-joogta & Dhiirrigalinta Maalgashiga						
Wasaaradda Gargaarka Bini'aadannimada & Daryeelka Naafada						
Madaxtooyada	11,700					
Xafiiska Guddoomiyaha Baarlamaanka iyo Baarlamaanka				192,000		
Guddiga Shaqaalaha Ray'idka ah	39,297					
Xafiiska Hantidhowrka Guud	11,892					
Xafiiska Madaxa Xukuumadda	14,862					
	277,416	4,800	778,581	192,000	8,270	200,000
						149,441

Qoraalka 7aad Safarrada iyo Shirarka

Kharashaadka safarrada iyo shirarka oo isku noqonaya ilaa \$15,420 ayaa waxaa ay ka kooban yihiin kharashaadka safarrada dalka gudahiisa ah iyo Shirarka maxaliga ah ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya. Shaxdan soo socota waxaa ay bixinaysaa kala-dhigdhigidda kharashaadka guud.

	2018	2017
	USD	USD
Safarka Gudaha	2,500	3,540
Shirarka Gudaha	12,920	2,980
Safarka Dibedda		500
Wadarta Guud	15,420	7,020

Qoraalka 8aad Kharashaadka Hawlaha La Xiriira

Kharashaadka Hawlaha La Xiriira waa isku jirka kharashaadka loo adeegsado fududeynta socodsiinta hawlaha xafiisyada Wasaaradda. Shaxda soo socota waxay bixinaysaa kala-dhigdhigidda kharashaadka hawlaha la xiriira ee ay bixisay Dowlad-goboleedka Galmudug (GSS).

	2018	2017
	USD	USD
Biyo	2,200	
Koronto	8,360	200
Kharashka Telefoonka Gacanta	22,500	300
Internet-ka	2,500	-
Nafto	27,000	300
Alaabta Qoraalka	3,075	150
Baasiin	-	260
Ujuurooyinka daabacadda	1,040	59,930
Sahayda Shirarka	1,700	7,485
Gunnooyinka hawlgallada amniga	41,600	400
Daabacaadaha	3,890	70,000
Dayactirka Qalabka	-	400
Dayactirka Baabuurta	5,880	50,050
Kirada Baabuurta	10,875	-
Wadarta Guud	130,620	189,475

Qoraalka 9aad Kiro

Kharashaad kiro gaaraya \$3,098 ayaa baxay 2017 oo ka kooban Kirooyin Xafiiseed gaaraya ilaa \$1,636 iyo kirooyin kale oo \$1.462. Marka loo eego, kharashaadka 2016 waxaa ay ka koobnaayeen Kiro Xafiiseed oo gaaraya \$29,544 iyada oo kharashaadka kirada kale ee baxay ay ahaayeen \$3,340. Eeg isbarbardhigga hoose.

	2018 USD	2017 USD
Hay'adda		
Wasaaradda Arrimaha Gudaha & Dowladaha Hoose	2,900	300
Wasaaradda Maaliyadda & Horumarinta Dhaqaalaha	3,600	-
Wasaaradda Amniga Gudaha	3,300	236
Wasaaradda Hawlaha Guud & Dib-u-dhiska	-	300
Wasaaradda Gaadiidka Cirka & Dhulka	-	800
Wasaaradda Dastuurka & Dib-u-heshiisiinta	-	400
Xafiiska Madaxtooyada	-	1,062
Guddiga Shaqaalaha Ray'idka ah	3,000	-
Wadarta Guud	12,800	3,098

Qoraalka 10aad Kharashaadka Kale ee Hawlaha La Xiriira

Kharashaadka Kale ee oo gaaraya ilaa \$42,445 ayaa baxay 2018. Waxay ka koobnaayaan ujuurada ama khidmada hantidhowrka, xayaysiin telefshan iyo wargeys lagu sameeyay oo lahayd Wasaaradda Maaliyadda iyo kharashaadka maamulka xafiiska madaxtooyada. Kharashaadkan ayaa hoos lagu faahfaahiyay.

	2018 USD	2017 USD
Ujuurooyinka Hantidhowrka	29,446	-
Kharashaadka Kale ee La Xiriira Maamulka Xafiiska	11,499	-
Xayaysiinada Telefshanka iyo Wargeyska	1,500	-
Wadarta Guud	42,445	-

Qoraalka 11aad Kharashaadka Xallinta Khilaafaadka

Dadaallo lagu xallinayo colaadaha iyo khilaafaadka u dhaxeeya beelaha Galmudug ayaa waxaa sameeyay Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Xafiiska Madaxweynaha. Kharash guud ahaan gaaraya **\$33,010** ayaa ku baxay geeddi-socodka xallinta khilaafaadka. Shaxda hoose ayaa muujinaysa kharashaadka.

	2018 USD	2017 USD
Kharashaadka Xallinta Khilaafaadka	33,010	-
Wadarta Guud	33,010	-

Qoraalka 12aad Deeqaha la siiyo Qaybaha Kale ee Dowladda Guud

Kuwan waa deeqaha loo wareejiyay heerka hoose ee dowladda intii lagu guda jiray muddada warbixinta oo guud ahaan gaareysa \$247,257. Deeqahan la wareejiyay waxaa ka faa'iidey degmooyinka Cadaado, Dhuusamareeb, Guriceel iyo Galkacyo. Deeqaha loo wareejiyay degmooyinka waxaa loo qoondeeyay kharashaadka socodsiinta hawlaha maamulka iyo fayodhawrka.

	2018 USD	2017 USD
Deeqaha Loo Wareejiyay Heerarka Hoose ee Dowladda	247,257	31,559
Wadarta Guud	247,257	31,559

Qoraalka 13aad Dheefaha/Faa'iidooyinka Bulshada

Sannadkii 2018 miisaanad looma qorsheyn faa'iidooyinka bulshada iyada oo sannad maaliyadeedkii 2017 dheefaha/faa'iidooyinka loo qorsheeyay miisaaniyad dhan \$30,000 waxaanna la bixiyay \$29,200 si loogu daaweeyo shaqaalaha GSS dalka gudahiisa iyo dibeddiisa. Daaweyn caafimaad ayaa waxaa caadi ahaan loo fidiyaa hawladeennada amniga ee ku dhaawacmay gudashada waajibaadkooda shaqo. Qiyaasta miisaaniyadda muddadaasi waxay ahayd \$30,000 iyada oo tan rumoowdayna ay ahayd \$29,200 sidaa darteed waxaa laga soo baxay

boqolkiiba 97 ee heerkii qiyaasta. Si kastaba, dheefaha daaweynta caafimaad ee noocaas ah dabci ahaan waxaa ay ku xiran tahay dalabka, helitaanka kheyraadka iyo tirada dhacdooyinka sannadka.

Qoraalka 14aad Kharashaadka Kale ee Kala Duwan

Kharashaadka Kale ee kala duwan oo guud ahaan gaaraya \$13,939 oo ka kooban \$13,855 oo la xiriirta dib-u-bixinnada lacagaha deynta GSS oo loola jeedo deymaha hore iyo lacagaha aan weli la bixin ee lagu lahaa GSS tan iyo markii la aasaasay inta kalena waa lacagaha khidmada Bankiga.

	2018	2017
	USD	USD
Deymaha Ku Baxay Dhisidda Dowladda GSS	13,855	134,100
Khidmadaha Bankiga	84	
Wadarta Guud	13,939	134,100

Qoraalka 15aad Hantida Aan Maaliyadda Ahayn

Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda

GSS waxay soo iibsatay Hanti Aan Maaliyad Ahayn intii lagu guda jiray Sannad Maaliyadeedka 2018 oo la xiriira Qalab xafiis, iyo Alaab xafiis (miisas, kuraas iwm.) iyo Rakibaadaha. Kala-dhigdhigista dhammeystiran ee kharashaadka Hantida Aan Maaliyadda Ahayn ee GSS ee 2018 ayaa hoos lagu faahfaahiyay.

	2018	2017
	USD	USD
Alaab xafiis	20,835	-
Qalabka iyo Mashiinka aan meel kale lagu soocin	1,845	-
Alaab xafiis iyo rakibaadaha	8,120	-
Wadarta Guud	30,800	-

Qoraalka 16aad Canshuuraha

Lacag wadarteeda guud gaaraysa \$ 3,535,982 oo Dakhli ururin ah ayaa la qiyaasay in la soo ururiyo oo la qabto sannad maaliyadeedkii 2018, si kastaba ah ahaate ururin rumoowday oo ah \$630,166 ayaa lagu guulaystey in la soo ururiyo. Yaraanshaha waxaa loo aaneynayaa in ay sabab u yihiin khilaaf siyaasadeed, in aan la hirgelin canshuuraha qaar oo lagu qiyaasay miisaaniyadda iyo in

dowladda aysan gacanta ku hayn goobaha muhiimka ah ee ay alaabtu marto si loo qaado canshuuraha waddo-marista. Canshuuraha macaashka ayaa lagu qiyaasay \$739,032 waxaanna la ururiyay canshuur dhan \$31,840. Yaraan shahan ayaa waxaa sababay diiwaangelin la'aanta ganacsiyada magaalooyinka qaar oo ahayd in la diiwaangeliyo iyada oo sabab u ah khilaaf siyaasadeed. Canshuuraha waddo-marista waxaa lagu qiyaasay \$2,796,950 balse waxaa kaliya la ururiyay \$569,181 oo ay sabab u ahayd dagaalo qabiil kuwaas oo horseeday hoos u dhaca gaadiidka waddooyinka mara. Shaxdan soo socota waa kala-dhigdhigista canshuuraha la qaadey intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedka 2018.

Nooca Canshuurta	Wasaaradda Maaliyadda	Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah	Farqiga u Dhexeeya u dhaxeeya Qiyaasha Kama-dambeysta ah iyo Ta Rumoowday
Canshuurta Macaashka	739,032	31,840	(707, 192)
Rakaabka Maxaliga ah		27,345	27,345
Canshuurta Waddo-marista	2,796,950	569,181	2,227,769
Shatiyada Ganacsiga iyo Xirfadda		1,799	1,799
Wadarta guud	3,535,982	630,166	2,905,816

Qoraalka 17aad Deeqaha

Guud ahaan deeqo gaaraya \$1,318,464 ayaa la helay marka loo eego tirada miisaaniyadda loo dejiyay oo gaaraysa \$ 4,130,155. Deeqaha ka imaanaya Ururrada Caalamiga ah iyo qaybaha kale ee dowladda guud looma helin sida lagu qiyaasay miisaaniyadda. Shaxda soo socota ayaa waxaa ay soo bandhigaysaa kala-dhigdhigista faahfaahsan ee farqiga u dhaxeeya deeqaha.

Nooca Deeqda	Qiyaasta Kama-dambeysta ah USD	Ururinta Rumoowday USD	Farqiga u Dhexeeya u dhaxeeya Qiyaasha Kama-dambeysta ah iyo Ta Rumoowday
Ka yimid dowladaha shisheeye	350,00		350,000
Ka yimid ururrada caalamiga ah	1,830,155	355,964	1,474,191
Dowladda Federaalka ee Soomaali	1,950,000	962,500	987,500
Wadarta guud	4,130,155	630,166	2,461,691

Farqiga u dhaxeeya oo gaaraya \$350,000 waxaa sabab u ah in aan la helin qaddarka miisaaniyadda la dejiyay in laga heli doono dowlado shisheeye, qaddar gaaraya \$1,474,191 iyo \$987,500 oo ah farqiyada u dhaxeeya deeqaha laga filayay ururrada caalami ah iyo tan dowladda federaalka ayaa

yimid ka-dib markii la heli waayay miisaaniyadda la qiyaasay. Marka la eego deeqaha ka yimid Ururrada Caalamiga ah, farqigan waxaa sabab u ah taageerada RCRF II oo aan loo helin sidii la qiyaasay sababtoo ah helidda taageerada RCRF II waxaa ay ku xiran tahay tirada shaqaalaha rayidka ah ee ay qoratay GSS. Sababtoo ah GSSS uma qorna shaqaale rayid oo gaaraya intii ay miisaaniyadeeda dejisatay, deeqaha ka yimid barnaamijka RCRF II waxaa uu si mug leh uga yaraa inta miisaaniyadda la dejiyay.

Qoraalka 18aad Gunnooyinka La Siiyo Shaqaalaha

Guud ahaan lacag gaareysa \$1,610,508 ayaa lagu bixiyay gunnooyinka la siiyo shaqaalaha marka loo eego miisaaniyadda loo dejiyay oo dhan of \$6,042,154. Hoos u dhaca kharashka aan la bixin oo gaaraya (4,431,646) waxaa sabab u ah dakhliga la ururiyay oo yar, sidaa daraadeed waxaan la lahayn dhaqaale lagu bixinayo kharashka gunnooyinka la siiyo shaqaalaha ee miisaaniyadda la dejiyay iyo shaqaalaha rayidka la qoray oo yar sida lagu sheegayba qoraalka kor ku xusan ee la xiriira deeqaha.

Qoraalka 19aad Isticmaalka Alaabada iyo Adeegyada

Awoodda kharashaadka Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya waxaa ay ku kooban tahay dakhliga soo gala muddo cayiman. Xaaladda alaabada iyo adeegyada, GSS waxaa ay ku bixisay lacag guud ahaan gaareysa \$234,295 oo u dhiganta boqolkiiba 19 ee miisaaniyadda kama dambeyska ah ee la qiyaasay. Kala duwanaanshaha waxaa loo aaneynayaa caqabadaha ka jira dakhliga la heli karo ee rumooway.

Qoraalka 20aad Deeqaha La Siiyo Dowladaha Kale

Deeqaha la siiyay qaybaha kale ee dowladda waxaa ay ahaayeen \$247,257 intii lagu guda jiray muddada ka-warbixinta. Wasaaradda Maaliyadda iyo afar degmo (Cadaado, Dhuusamareeb, Guriceel iyo Galkacyo) ayaa wada galey heshiis dadban oo dhigaya in degmooyinka ay ku shubi doonaan dakhliga ka soo xarooda degaamadooda Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda ka-dibna ay codsadaan kharashaadkooda hawl-gallada iyada oo u maraya habraacyada jaango'an ee u degsan Wasaaradda Maaliyadda.

Qoraalka 21aad Dheefaha/Faa'iidooyinka Bulshada ee shaqo-siiyaha

Daaweynta caafimaad ee dalka gudahiisa iyo ta dibadiisa waa dheefta bulshada ee aasaasiga ah ee hadda la siiyo shaqaalaha GSS. Ciidanka GSS (Booliska iyo NISA) ayaa ah dadka inta badan ka faa'iideysta dheeftan iyada oo inta badan sabab u ah khataraha amni ee soo foodsaara. Qiyaasta miisaaniyadda loo dejiyay muddada waxaa ay ahayd \$30,000 ta rumoowdayna waxaa ay ahayd \$29,000 sidaa darteed waxaa looga soo baxay boqolkiiba 97 ee heerkii qiyaasta. Isla-markaana dheefaha daaweyntaas caafimaad waxay dabiici ahaan ku xiran tahay dalabka, helitaanka khayraadka iyo tirada dhacdooyinka inta lagu guda jirro sannadka.

Qoraalka 22aad Kharashaadka Kale ee Kala Duwan

Guud ahaan lacag gaareysa \$115,370 ayaa miisaaniyadda loogu dejiyay Kharashaadka kala duwan hase-yeeshee \$13,939 ayaa la isticmaalay. Kharashaadkan waxaa ay la xiriiraan deyn lagu leeyahay GSS ku baxay intii lagu guda jiray geeddi-socodka dowlad dhisidda iyo khidmadaha bankiga.

Qoraalka 23aad Hantida Aan Maaliyadda Ahayn

GSS waxay hanti aan maaliyad ahayn u soo iibisay wasaaradaha kala duwan kuwaas oo ku kacay lacag dhan \$30,800 intii lagu guda jiray muddada warbixintan sida hoos lagu faahfaahiyay.

	2018	2017
	USD	USD
Alaab xafiis	20,835	-
Qalabka iyo Mashiiinka aan meel kale lagu soocin	1,845	-
Alaab xafiis iyo rakibaadaha	8,120	-
Wadarta Guud	30,800	-

Qoraalka 24aad Lacag-bixinnada Dhinac Saddexaad

Hay'adda miisaaniyadda waxay sidoo kale ka faa'iidi kartaa alaabada iyo adeegyada loo soo iibiyay iyadoo sabab u ah lacag-bixinno kaash ah oo ay bixiyeen dhinacyo saddexaad oo ka madax-bannaan GSS inta muddada lagu guda jiro. Lacag-bixinnada ay bixiyeen dhinacyada saddexaad ka mid ma ahan kaashka ay qabatey ama lacag-bixinnada hay'adda miisaaniyadda balse waa kuwo ay ka faa'iido hay'adda. Dhinac 3^{aad} ayaa wuxuu si rasmi ah ugu sheegay GSS in lacag dhan \$2,403,224 ay lacag-bixino dhinac ahaan ah u kharash-gareeyeen mashruuca PREMIS iyo SSF, eeg shaxaha hoose oo aan si kala gooni-gooni ah u qornay: -

Sharraxaadda Kharashaadka Dhinaca 3aad ee PREMIS	Wasaaradda Maaliyadda	Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah	Baarlamaanka	Xafiiska Hantidhowrka Guud	Wadarta Guud
Kaalmo Farsamo	154,865	31,719	4,800	17,694	209,078
Tababar	385,001	78,856	4,248	34,640	502,745
Taageero ICT	106,846				106,846
Wadarta guud	646,712	110,575	9,048	52,334	818,669

Sharraxaadda Kharashaadka Dhinaca 3aad ee SSF	Wasaaradda Arrimaha Dibadda	Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah	Wasaaradda Ganacsiga & Warshadaha	Wasaaradda Beeraha & Xanaanaada Xoolaha	Wasaaradda Haweenka & Arrimaha Qoyska	Wadarta Guud
Alaab Xafiseed	20,390					20,390
Wadarta Lacagta Nabadda iyo Dib	997,750					997,750
Horumarinta Dhaqaalaha			166,862	166,862		333,724
Dhismaha		110,690				110,690
Awoodsiinta Haweenka					122,001	122,001
Wadarta Guud	1,018,140	110,690	166,862	166,862	122,001	1,584,555

Lifaaqa 2aad – Warqadda Maamulka ee Kama Dambeysta ah. Warbixinta Hantidhowrka Madaxa-Bannaan Ee Ku Saabsan Baaritaanka Dowlad-Goboleedka Galmudug Ee Soomaaliya (GSS) ee Sannadkii Dhammaadey 31ka Dismabar 2018.



WARQADDA MAAMULKA EE KAMA DAMBEYSTA AH

3DA MAARSO 2020

WARBIXINTA HANTIDHOWRKA MADAXA-BANNAAN EE KU SAABSAN BAARITAANKA

DOWLAD-GOBOLEEDKA GALMUDUG EE SOOMAALIYA

SANNADKII DHAMMAADEY 31KA DISMEBAR 2018

TUSMADA

EREYO LA SOO GAABIYEY	3
1. 5	
2. QODOBBADA WARQADDA MAAMULKA 6	
1.1 WAXYAABAHII LA SOO OGAADEY OO KOOBAN 6	
1.2 WAXYAABAHII LAGU OGAADEY HANTIDHOWRKA IYO SOO-JEEDIMADA OO FAAHFAAHSAN	7
3. 36	

EREYO LA SOO GAABIYAY

Ereyo La Soo Gaabiyey	Ereyga oo Dhammaystiran
ASI	Shirkadda Caalamiga ah ee Adam Smith International
CBS	Bankiga Dhexe ee Soomaaliya
CPO	Amarka Bixinta Lacagta La Ballanqaadey
FMIS	Nidaamka Maareynta Maaliyadda Maamulka
FMS	Dowlad-goboleedka Xubinta ka ah Dowladda Federaalka
GFS	Tirakoobyada Maaliyadeed ee Dowladda
GSS	Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya
IPSAS	Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda
MDA	Wasaaradaha, Waaxaha iyo Hay'adaha
MoFED	Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha
PFM	Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha
PV	Fawjar Lacag-bixineed
RCRF	Mashruuca Maalgelinta Kharashaadka Soo Noqnoqda iyo Dib-u-habeynta
REG	Xeer-nidaamiye
RMS	Nidaamka Maareynta Dakhliga
RV	Fawjarka Dakhliga
SSF	Sanduuqa Xasillinta Soomaaliya (Somali Stability Fund)
TSA	Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda
USD	Doolarka Mareykanka

Mundane Cumar Xasan
Xoghayaha Joogtada ah
Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha,
Dhuusamareeb,
Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya

Madane,

ARRIMAHA SOO IFBAXAY INTII LAGU GUDO JIRAY HANTIDHOWRKA SANNADKII DHAMMADEY 31KA DISMEBAR 2018

Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa ka mas'uul ah dhisidda iyo joogteynta qaab-dhismeedka kantaroolka gudaha. Iyada oo gudanaysa waajibkan, ayaa waxaa loo baahan yahay in ay Wasaaraddu sameyso qiyaaso iyo go'aanno si loo qiimeeyo dheefaha la filayay iyo kharashaadka la xiriira qaab-dhismeedka kantaroolka gudaha, siyaasadaha iyo habraacyada. Ujeeddooyinka qaab-dhismeedka kantaroolka gudaha loo sameeyay waa in Wasaaraddu ay ka hesho hubaal macquul ah, balse aan ahayn mid boqolkiiba boqol ah, in hantida laga ilaaliyay lumitaan iyo adeegsiga aan la ogolayn, iyo in macaamulaadka loo fuliyo si waafaqsan ogolaanshaha Wasaaradda, loona diiwaangelyo si habboon oo oggolaanaysa in bayaamada maaliyadeed loo diyaariyo qaab waafaqsan Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda, Warbixinnada Maaliyadeed ee Xisaabaadka ku Saleysan Kaashka iyo Qaybta 30aad ee Xeerka Maamulka Maaliyadda Dowladda (PFM) 2017.

Sababo la xiriira xaddidaadaha soo jireenka ah ee uu leeyahay qaab-dhismeed kasta ee kantaroolka gudaha ah, khaladaad ama ilduuf ayaa si kastaba dhici kara iyada oo aan la ogaanin.

Warbixinta halkan lagu soo gudbinayaa waxaa ay ku saleysan tahay xogta nala siiyay iyo indho-indhaynta aanu samaynay intii aanu ku guda jirnay baarista/hantidhowrka Maamul Goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS). Dib-u-eegista aan ku sameynay nidaamyada kantaroolka gudaha ee GSS ayaa waxaa aanu u sameynay in uu naga caawiyo aragti ka dhiibashada bayaamada maaliyadeed ee muddadan ee mashruuca oo si guud la isugu wada qaaday. Shaqadan mudnaan uma ahayn helista waxyaabaha lagu liito, ogaanshaha/ qabashada khiyaamo ama khaladaad iyo wax-isdabamarinno kale (marka laga reebo arrimahaasi ee saamaynta ku yeelanaya gaarista aragtiyadeenna), sidaa daraaddeed waa in aan warbixintan loo adeegsan muujinta in aaney jirin daldallo kale ama dhinacyo kale oo u baahan fiiri. Arrimaha lagu soo qaadey warqaddani waa kuwa aanu aragnay inta aanu ku gudo jirnay baaritaankan ama hantidhowrkan oo aanu qabno in loo baahan yahay in la idinku baraarujiyo. Lama soo koobi karo dhammaan arrimaha u baahan u fiirsashada ee ku soo baxay hantidhowrkan, sidaa darteedna mas'uul kama noqon karno in aanu ka warbixinno dhammaan halisaha ku gedaaman hawlgalladiina ama dhammaan daldaloollada kantaroolka gudaha. Warbixintan waxaa keliya loo diyaariyey adeegsigiinna, waana in aan la soo xigan dhammaanteeda ama qayb ka mid ah iyada oo aan ogolaansho qoran marka hore nalaga helin. Wax mas'uuliyad ahi nagama saarna dhinac saddexaad, maadaama aan warbixintan loo diyaarin, looguna talogelin ujeeddo kale.

Sidaas daraaddeed, farxad ayay noo tahay in aanu soo gudbinno warbixintan iyo talooyinka la soo jeediyay ee khuseeya kantaroolada gudaha, habraacyada xisaabaadka iyo arrimaha kale ee aanu aragnay intii aanu ku gudo jirnay hantidhowrkan.

Fursaddan waxaa aanu uga faa'iidaysanaynaa in aan idinkaga mahad celino idinka iyo howlwadeennadiinna wada-shaqaynta aanu idinka helnay intii uu socday baaritaankani/hantidhowrkani. Waxa aanu idiinkaaga mahad celinaynaa haddii aad nala wadaagtaan aragtiyadiinna ku saabsan arrimaha aanu aragnay iyo talooyinka aanu ku soo gudbinnay warqaddan maamulka oo ay la socdaan faahfaahinta wax ka bedellada la hirgelin doono ama la bilaabey ee khuseeya arrimaha aanu sheegnay.

CPA John Mucheru
La-hawlgale
Baker Tilly Merali's
Lr. Shatiga Xirfadeed 1854

Taariikhda 15 Nov 2020


First Floor, New Rehema House
Rhapta Road, Westlands
P. O. Box 67486 – 00200
Nairobi, Kenya

1. HORDHAC

Waxa aannu dhammeynay baarista ama hantidhowrka Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS) ee sannadkii dhammaadey 31ka disembar 2018. Waxa aannu soo bandhignay arrimaha aanu aragnay muddadii ay socotay shaqadeenna baarista ee caadiga ahayd, iskuma aanan dayin in aanu soo bandhigno dhammaan sii-wanaajinta suuragalka ah ee la sameyn karo oo qiimayn gaar ahi soo bandhigi karto.

1.1 Kala-soocidda Mudnaanta

Waxyaabihii lagu ogaadey hantidhawrka waxaanu mudnaan u kala siinnay sida soo socota:

Mudnaanta 1aad – Tallaabo sixid degdeg ah ayaa loo baahan yahay.

Waxaa maqan qaar ka mid ah kantaroollada gudaha ee muhiimka ah ama si joogto ah looma raacin. Liidasho aasaasi ah ama kala-dhinnaan ayuu leeyahay mid ka mid ah ama dhawr ka mid ah kantaroollada gudaha, taas oo keenaysa halis sare oo khatar weyn leh, wax nidaamka ka baxsan, ama khiyaamo in ay ku timaaddo kharashaadka ama dakhliga lagu xusay Warbixinta Maaliyadeed ee Dowladda. Waxaa jira halis weyn in laga gaabiyo ka dhabaynta ujeeddooyinka kantaroolka ee Dowladda oo ku saabsan ku kalsoonaanta warbixinta maaliyadeed, hufnaanta iyo wax-ku-oolnimada hawlgallada iyo u hoggaansamidda sharciyada iyo xeer-nidaamiyayaasha la xiriiira. Khatarahani waxay saameyn xun ku yeelan karaan warbixinta maaliyadeed ee Dowladda. Waa in si degdeg ah loo qaado tallaabo sixitaan ah.

Mudnaanta 2aad - Tallaabo cayiman oo degdeg ayaa loo baahan yahay.

Liidasho ama kala-dhinnaan ayuu leeyahay mid ka mid ah ama dhawr ka mid ah kantaroollada gudaha, kuwaas oo ayna lafjab ahayn ama aasaasi ahayn, xiriir la leh gaabis ku yimaada dhinacyo cayiman oo kantaroollada gudaha ah (sida maareynta kaashka iyo bankiga ama kantaroolka miisaaniyadda iyo kharashaadka). Arrintani waxaa ka dhalanaysa halista ah in uu dhaco gef, arrin nidaamka ka baxsan ama khiyaamo tii hore ka yar. Khatartaasi oo kale waxaa ay saameyn kartaa wax-ku-oolnimada ama taabogalimada kantaroollada gudaha iyo ujeeddooyinkii laga lahaa kantaroolka gudaha. Maamulka Hay'addu waa in uu xil iska saaraa. Tallaabo cayiman oo degdeg ah waa in laga qaadaa.

Mudnaanta 3aad - Waxaa fiican in la qaado tallaabo cayiman oo sixid ah.

Liidasho ama kala-dhinnaan ayuu leeyahay kantaroolka gudaha kaas oo aan gaar ahaantiisa saameyn weyn lahayn, balse Dowladda ayaa ka faa'ideysa sii wanaajinta kantaroollada gudaha iyo/ama marka Dowladdu ay ku gaarayso sii wanaajintaasi hufnaan iyo/ama wax-ku-oolnimo dheeraad ah. Waxaa suurtagal ah in ay ka jirto saameyn aan la doonaynin heerka geeddi-socodka, taas oo marka ay isbiirsadaan liidashooyinka kale, keeni karta arrimo walaac leh.

2. WARQADDA MAAMULKA

1.1 WAXYAABAHII LA SOO OGAADEY OO KOOBAN

Tix	Waxyaabahii la soo ogaadey oo kooban	Mudnaanta	Tirad Lacagta oo Dolarka Mareykanka ah (USD)
1.	Sii wanaajinta maamulka canshuurta	1	-
2.	Sii wanaajinta habraacyada Iswaafajinta Bankiyada	1	-
3.	Lacag Bankiga Ku Jirta oo Aan La Shaacin	1	88
4.	Lacag-bixinno aan loo taageerin si ku filan	1	1,155,147
5.	Isticmaalka xad-dhaafka ah ee lacag-bixinnada Kaashka ah	1	575,875
6.	Liidashada geeddi-socodka wax-soo-iibsiga	1	-
7.	Liidashada maareynta hantida	1	-
8.	La'aanta jaangooyooyinka iyo siyaasadaha IT-ga ee hay'adda oo rasmi ah	1	
9.	Daldaloollo ka jira Maareynta kantaroolada gelidda adeegsadaha	1	
10.	Xuquuqo wax-ka-beddel oo xad-dhaaf ah ayaa la siiyay Agaasimaha Waaxda IT	1	
11.	Liidashada Kantaroolada aqoonsashada, xaqijinta iyo oggolaanshaha gelidda ee ICT-ga	1	
12.	Hiigsiga qiyaaso miisaaniyad sannadeed oo xad-dhaaf ah	2	
13.	Liidashada maareynta hawladeennada	2	-
14.	Liidashada kale ee kantaroolka	2	-
Wadarta Guud			1,731,110

1.2 WAXYAABAHII LAGU OGAADEY HANTIDHOWRKA IYO SOO-JEEDIMADA OO FAAHFAAHSAN

Waxyaabihii la ogaadey Ir°:1aad	Cinwaanka: Sii wanaajinta maamulka canshuurta
Shuruudaha: Waxyaabaha ugu muhiimsan ee loo baahan yahay si loo hubiyo in la helo faylal/galal maaliyadeed sax ah oo dhammeystiran waa siyaasadaha iyo habraacyada xakamaynta maaliyadeed oo taabagal ah. Habka muhiimka ah ee xakamaynta maaliyadeed waa hubinta dhammaan dakhliyada la ururiyay in si degdeg ah gebi ahaanba loogu shubo bankiga iyo in kharashaadka si toos ah looga soo bixiyo bankiga iyadoo la adeegsanayo jeeggag iyo dokumentiyada kale ee bankiyada. Hannaanka Dakhliga ayaa muujinaya qaybo ka mid ah Buugga Habraacyada Dakhliga/Kharashaadka iyo Maareynta Maaliyadeed ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya oo sheegaya "Dakhli ururinta sida ku cad Xeerka Dakhliga ee Dowladda, 2017 waxaa sameeya midkood canshuurqaadayaal dowladda u shaqeeya ama wakiilo canshuur ururinta awood buuxda u leh oo ka wakiil ah dowladda, ama canshuur-bixiyaha ayaa si toos ah uga bixin kara xisaabta bankiga ee Xisaabta Mideysan ee Khasnadda (TSA) ama daaqadda lacag-hayaha ee Wasaaradda Maaliyadda. Canshuurta ay qaadaan canshuurqaadayaasha ama wakiilada ayaa waxaa had iyo jeer taageera qaadaha/wakiilka oo bixinaya rasiidka dakhliga ee la oggol yahay, oo tiro ahaanna la kantoroolo. Canshuurqaadayaasha waa in ay lacagta dhigaan bankiga. Dakhliga waxaa lagu diiwaangeliyaa nidaamka FMIS iyadoo la adeegsanayo summadaha dakhliga ee ku habboon" Sharraxaadda waxyaabihii la ogaadey: Waxaannu dhab ahaan ogaannay, saraakiisha waaxda dakhliga ee Wasaaradda Maaliyadda in ay raacaan habraacan soo socda marka ay ururinayaan/qaadayaan oo ay diiwaangelinayaan dakhliga; • Wakiilada canshuur ururinta ayaa subaxdii buugaagta rasiidka ka soo qaata Xafiiska Dakhliga ee ku dhex yaalla gudaha dhismaha Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MoFED) waxayna ku soo celiyaan fiidkii buugaagta iyo kaashkii la qabtay. Canshuur ururinta inteeda badan waxaa lagu sameeyaa Summada Xaqiijinta Elektarooniga ah (EVC) oo ah nidaamka xawilaadda lacagaha ee telefoonka, sidaa daraaddeed, lacagaha ayaa waxaa lagu hayaa telefoonka (<i>sim card</i>) saraakiisha canshuurta qaadaysa. Canshuurta kaash ahaanta loo qaaday ayaa waxaa si maalinle ah loogu wareejiyaa waaxda dakhliga oo bankiga ku shubta/dhigta. • Sarkaalka ururinta ama qaadista ee jooga waaxda dakhliga ayaa wuxuu iswaafajiyaa kaashka la qabtay iyo tirada lacagaha lagu diiwaangeliyay buugaagta rasiidka. • Lacagta Kaashka ah ee maalin walba la ururiyo ayaa waxaa maalinta shaqo ee xigta bankiga ku shuba isla sarkaalka iswaafajiyay buugaagta rasiidka. Kaashka ayaa waxaa lagu shubaa Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda oo ka furan Bankiga Salaam Somali Bank. • Sarkaalka ururinta waxaa uu adeegsadaa waraaqaha lacagaha bankiga lagu shubay beddelkii uu adeegsan lahaa buugaagta rasiidka si uu nidaamka RMS ugu diiwaangeliyo noocyada kala duwan ee canshuuraha. • Nidaamka (<i>system</i>) RMS ayaa waxaa laga soo saaraa Fawjarka lacagaha la helay kaas oo ay kooxda maaliyadda u adeegsato in macaamulaadka ay ku diiwaangeliso nidaamka FMIS. a) Waxaanna ogaanneey liidashooyinkan soo socda oo la xiriira canshuur ururinta iyo diiwaangelinta: i) Dakhli ururinta ma ahan nidaam iskii u hawlgala ama otomaatik ah. Canshuuraha la soo aruuriyey waxaa lagu taageeraa rasiid la siiyo canshuur bixiyaasha. Sidaa awgeedna, nidaamka canshuur ururinta kuma xirna Nidaamka Maareynta Dakhliga ii) Lambarrada tixraac ahaanta loo qoondeeyo marka la diiwaangelinayo canshuurta la ururiyay ayaa waxaa laga soo qaataa lambarrada waraaqaha lacagta bankiga lagu shubay beddelkii laga soo qaadan lahaa kooxda rasiidyada la diyaariyay marka canshuuraha la diiwaangeliyo.	

iii) Xaashida iswaafajinta canshuuraha laguma sheegin diyaariye, dib-u-eege iyo ansixiye si loo muujiyo kala-saaridda waajibaadka geeddi-socodka canshuur ururinta iyo diyaarinta, dib-u-eegidda, iyo ansixinta iswaafajinta canshuurta oo waqtigii loo baahnaa la sameeyo. iv) Waxaan ogaaney kala duwanaa u dhaxeysa canshuurta la qabtay, tirada lacagaha lagu diiwaangeliyay buugga kaashka, tirada lacagaha bankiga lagu shubay. Muunadaha aan qaadnay, ayaan waxaan ku oggaaney in tirada lacagaha bankiga lagu shubay ay isle'eg yihiin tirada lacagaha lagu muujiyay buugaagta kaashka balse aysan waafaqsanayn canshuurta la qabtay sida lagu faahfaahiyey Lifaafa 1aad. v) Waxaan ogaaney xaalado badan oo rasiidyadu aaney muujin magaca sarkaalka canshuurta qaaday oo sidoo kalena muujin magaca sarkaalka ansixiyey rasiidka si loo diiwaangeliyo. b) Canshuuraha ayaa marka hore lagu diiwaangeliyaa qaybta FMIS ee sistem-ka BISAN (nidaamka xisaabaadka) oo ku saleysan tirada lacagaha bankiga lagu shubay ee laga soo xigtay bayaanka bankiga ka-dibna xogta waxaa lagu diiwaangeliyaa qaybta RMS ee Bisan (nidaamka canshuur ururinta). Habraaca hadda jira waa in marka hore lagu diiwaangeliyo nidaamka xisaabaadka ka-dibna lagu diiwaangeliyo nidaamka canshuur ururinta. Habraaca la filayay waa in marka hore canshuurta la qaaday lagu diiwaangeliyo nidaamka RMS, bankiga lagu shubo ka-dibna lagu diiwaangeliyo FMIS. c) Xeerka Dakhliga ayaa dhigaya 11 ilo dhakhli oo ay GSS ka soo ururin karto canshuuro, hase-yeeshee, 4 ilood oo kaliya ayaa laga raadiyay, kuwaas oo kala ah, Canshuurta macaashka, shatiyada ganacsiga iyo kuwa xirfadeed, ujuurrada laga qaado rakaabka gudaha iyo canshuurta alaabta sii-gudbaysa. Waxaan oggaaney in bayaannada maaliyadeed ay muujiyeen in wax canshuuro ah aanan laga qaadin 7da ilood ee soo socda: Canshuurta Dakhliga Shakhsiyeed; Canshuurta Guryaha Magaalada ku yaala; Shatiyada Ganacsiga, Ujrada Amniga Suuqa iyo Nadaafadda; Canshuurta Shidaalka; Canshuurta Matoorada Korontada iyo Ujrada Diiwaangelinta Gaadiidka. d) Bayaannada maaliyadeed ayaa muujiyay USD 1,799 in ay tahay Shatiyada Ganacsiga iyo Kuwa Xirfadeed. GSS ma bixin dokumentiyo taageeraya dakhligan sidaa darteedna saxnaantiisa lama xaqiijin karo. e) Bayaannada maaliyadeed waxaa ay muujiyaan Canshuurta Socodka Baabuurta ama Isticmaalka Waddada oo gaaraysa USD 569,181 taas oo inta badan la xiriirta muddo ka bilaabanaysa bisha Juun 2018 iyo wixii ka dambeeya. Diiwaannada xisaabaadka ayaa muujinaya oo kaliya USD 17,402 in la ururiyay laga bilaabo Jannaayo ilaa Maajo 2018 oo noqonaysa celcelis ahaan USD 3,480 bishiiba. Tani waxay ka dhigan tahay in canshuurta la ururiyay 7dii bilood ee laga bilaabo bisha Juun 2018 iyo bilihii ka dambeeyay ay ahayd USD 551,779 oo noqonaysa celcelis ahaan USD 78,825 bishiiba. Ma cadda sababta cashuur ururinta ay si weyn ugu hooseyso 5-tii bilood ee ugu horreeyay sannadka. f) Bayaannada maaliyadeed ayaa muujiyay USD 27,345 in ay tahay Ujuurrada Laga Qaado Rakaabka Gudaha. Waxaan oggaaney in Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS) uu leeyahay shan Garoomo Diyaaradeed oo shaqeeya iyada oo ujuurrada rakaabka gudaha kaliya laga soo ururiyay laba garoomo diyaaradeed (Garoonka Diyaaradaha ee Guriceel iyo Garoonka Diyaaradaha ee Ugaas Nuur). Intaa waxaa dheer, canshuur ururinta labada garoon diyaaradeed in ay kaliya ahayd muddo afar bilood ah oo ka bilaabmayso bisha Sibtembar ilaa Disembar 2018.	Waxyaabaha ka dhalan kara: a) Liidashada habraacyada dakhli ururinta waxaa ay keeni kartaa in ay wax ka lumaan maaliyadaha, xisaabaadka canshuurta la ururiyey oo aan ku filnayn iyo sidoo kale warbixin maaliyadeed oo aan sax ahayn. b) Meertada diiwaangelinta canshuurta ma raaco meertada dakhliga taas oo kordhisa halista bixidda dakhliga la ururiyay iyo dhibaataada xagga iswaafajinta canshuurta. c) Waxaa la lumiyay fursadda in la kordhiyo canshuur ururinta oo sabab u ah ka gaabin in dakhliga laga soo ururiyo dhammaan ilaha laga heli karo sannad maaliyadeedka oo dhan
---	---

- d) La'aanta dokumentiyo taageera cashuurta ayaa yareysa awoodda xaqiijinta saxsanaanta tirada lacagaha dakhliga iyo qiimeynta taabogalnimada habraacyada kantaroolka ee lagu dabakhayo macaamulaadka.

Qiimeynta heerka mudnaanta:

Mudnaanta 1aad – Tallaabo sixid degdeg ah ayaa loo baahan yahay.

Soo-jeedimo:

- GSS waa in ay baraha canshuura lagu ururiyo ku diyaariso hab otomaatik ah si buuxda habraacyada si toos ah kombiyuutar loogu sameynayo.
- Nidaamyada canshuur ururinta waa in si buuxda loo dhexgeliyaa nidaamyada xisaabaadka (*accounting systems*). Canshuurta la ururiyayna waa in marka hore lagu diiwaangeliyaa nidaamka RMS ka-dibna diiwaannada gaargaarka ah ee xisaabaadka waa in si otomaatik ah loo joogteeyaa.
- GSS waa in ay sahamisaa qaababka lagu balaarinayo ilaha canshuur ururinta oo ay hubisaa in canshuur ururintu ay dhacdo sanadka oo dhan
- Dhammaan diiwaangelinnada buugaagta la geliyo ee marxaladaha kala duwan ee meertooyinka dakhliga iyo xisaabaadka waa in lagu saleeyaa tixraacyo gaar ah oo laga soo qaatay dokumentiyada habboon ee lagu adeegsaday marxaladaha kala duwan. Canshuur qaadayaasha waa in ay adeegsadaan lambarka tixraaca ee uu soo saaro nidaamka (*system*) ka dibna waa in ay ku daraan kooxda rasiidyada gaarka ah ee isku noqonaya qadarka guud ee lacagta bankiga lagu shubey maalintii. Fawjarrada rasiidka loo yeelay lambarrada taxanaha ah ee loogu talagalay dakhli ururinta ka sokow, buugaagtan rasiidka waa in la soo saaro iyaga oo raacaya tiro xisaabeed isku xigxigta si loo sii wanaajiyo la-xisaabtamka.
- Canshuurta la qaadey waa in si degdeg ah bankiga loo geeyo iyada oo kaamil ah, waana in iswaafajin joogto ah la sameeyo.
- Sarkaal aan ku lugta lahayn dakhli ururinta waa in uu si joogto ah oo maalinle ama toddobaadle ah u sameeyaa iswaafajinta dakhliga la ururiyay iyo lacagaha bankiga la geeyay. Iswaafajinta waa in ay dib-u-eegaan saraakiil sarsare iyada oo dib-u-eegisyadaasina lagu caddeynaya saxiixidda bayaanka iswaafajinta.

Waafaqsanahay/ Ma Waafaqsanin: Waafaqsanahay

Faallooyinkii ay ka bixisey GSS:

Waxaan waafaqsanahay in ay jiraan waxyaababii la oggaadey, waxaa jira isku-day laga sii baaraandegey oo lagu doonayo in lagu hirgeliyo nidaamyada (*systems*) maareynta dakhliga oo socda waxaana ka mid ah in hab otomaatik ah laga dhigo dakhli ururinta goobaha ururinta iyada oo la baahinayo nidaamka Maareynta Dakhliga (RMS), la sii wanaajinayo kantaroolka rasiidyada gacanta lagu qoro iyo iyada oo si bille ah la isu waafajinayo dakhliga xisaabaadka bankiga, FMIS iyo RMS. Waxaa socda olole wacyigelin si loo hirgeliyo ilo dakhli oo dheeraad ah sannadka 2020.

Cidda ka mas'uulka ah iyo Taariikhda:

Xoghayaha Joogtada ah iyo Agaasimaha Dakhliga; Muddo dhexe

Waxyaabihii la ogaadey Ir°: 2aad	Cinwaanka: Sii wanaajinta habraacyada Iswaafajinta Bankiyada
Shuruudaha: Iyada oo la raacayo Xeerka PFM iyo gaar ahaan sida saxda ah ee ku cad Xeer-nidaamiyaha 5_Iswaafaqsanaanta Kaashka iyo Bankiyada, 3.1.1 wuxuu dhigayaa “Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda iyo xisaab banki kasta oo kale oo ay yeelaneyso [Dowlad-goboleedka] waa in la is-waafajiya sida wanaagsanna waa in is-waafajinta la sameeyaa maalin kasta ama ugu yaraan toddobaadkiiba mar 2 maalmood gudahood marka uu dhammaado toddobaadka ayna is-waafajintaas sameeyso Waaxda Khasnadda, Wasaaradda Maaliyadda iyada oo la adeegsanayo nidaamka maareynta maaliyadda maamulka (FMIS). ‘3.1.2. Is-waafajin kasta waa in uu eegaa uuna ansaxiyaa mid ka mid ah saxiixayaasha loo oggol yahay xisaabta bankiga ama sarkaal sare oo loo magacaabay ugu dambeyntiinna’ “3.1.3. Is-waafajinta bankiga iyo dokumentiyada taageeraya waa in la hayaa si loogu adeegsado kantarool dhinaca maareynta ah iyo ahdaaf la xiriiira hantidhowrka, waana in la fayl-gareeyaa iyaga oo fayl kombuyutar ah iyo iyaga oo daabacanba.” Qodobka 8.1. ee Buugga Habraacyada Maareynta Xisaabaha Bankiga, wuxuu dhigayaa: Bisha Disembar ee sanad walba, Unugga Maareynta Lacagta Caddaanka ah ayaa dib-u-eegis ku sameyn doona diiwaanka bankiga iyo dhammaan xisaabaha banki ee dowladda. Dib-u-eegista waxaa ay koobeysaa arrimahan muhiimka ah ee soo socda....” Qaybta (e) waxaa ay dhigaysaa: “Codsii xaqiijin sanadle ah oo bankiyada looga codsanayo in ay xaqiijiyaan magaca iyo lambarka xisaabta ee dhammaan xisaabaha bankiga ee ku diiwaangashan magaca [Dowlad-goboleedka]” Sharaxaadda waxyaabihii la ogaadey a) Iswaafajinta bankiga waxaa loo sameeyay si bille ah halkii loo sameyn lahaa si toddobaadle ah. b) Iyada oo lagu saleynayo dib-u-eegisteenna iswaafajinta bankiga, waxaan ogaanney oo noo muuqdey waxyaabahan soo socda: i) Iswaafajinta banki ee loo bixiyay hantidhowrka kama muuqan taariikhda la diyaariyay iyo tan la ansixiyay. ii) Waaxda khasnadda ee Wasaaradda Maaliyadda ma helin codsiga xaqiijinta sannadlaha ee bankiyada si loo xaqiijiyo magaca iyo lambarada xisaabta ee dhammaan xisaabaadka banki in ay ku diiwaangashan yihiin magaca Wasaaradda Maaliyadda markii aan sameynaynay baaristeenna oo ahayd bishii Luulyo 2019. Waxaannu xaqiijinay dhammaan xisaabaadka bankiga ee bayaamada maaliyadeed in ay ku qoran yihiin magaca Dowladda iyagga oo hoos tagaya Wasaaradda Maaliyadda.	
Waxyaabaha ka dhalan kara: Looma hoggaansamin qodobbada Xeerka PFM. In aannu jirin muddeyn loogu talagalay diyaarinta iswaafajinta bankiga ayaa kordhinaysa halista dib-u-dhaca aqoonsashada waxyaabaha aan caadiga ahayn ee macaamulaadka bankiga.	
Qiimeynta heerka mudnaanta: Mudnaanta 1aad – Tallaabo sixid degdeg ah ayaa loo baahan yahay.	
Soo-jeedimo: Waxaan ku talinaynaa in: a) GSS waa in ay u hoggaansanto dhabbe-tusayaasha loo baahan yahay iyada oo xaqiijiansa in iswaafajinta bankiga loo sameeyo ugu yaraan si toddobaadle ah.	

- b) Taariikhda diyaarinta iyo dib-u-eegista bayaamada iswaafajinta bankiga waa in si fiican loogu qeexo dhabbetusayaasha Xafiiska Deeqaha. Tani waxaa ka mid ah sheegidda taariikhda iyo jagooyinka dib-u-eegayaasha iyo ansixiyayaasha.
- c) Waaxda Khasnadda ee Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee GSS waa in ay diyaarisaa oo ay warqadaha xaqiijinta bankiga u dirtaa Bankiyada sannadka dhammaadkiisa iyada oo ka codsanaysa bankiyada in ay u soo xaqiijiyaan lacagaha ay u hayaan.

Waafaqsanahay/ Ma Waafaqsanin: Waafaqsanahay

- a) Waxaannu xaqiijin doonaa in iswaafajinta bankiga la sameeyo, in si toddobaadle ah loo daacabo iyo in gal/fayl la geliyo.
- b) Faqradda 3.1.2 ee Xeer-nidaamiyaha 5aad waxay dhigaysaa in Iswaafajinta Bankiga lagu diyaariyo 2 maalmood gudahooda ka-dib dhammaadka toddobaadka. GSS waxay xaqiijin doonaa in tani loo hoggaansamo iyo in taariikhda dib-u-eegista iyo magaca ansixiyaha lagu daro iswaafajinta bankiga.
- c) Waxaannu bankiyada oo dhan ka codsanay xaqiijin, waxaanna xaqiijinta ka helnay kuwa aannu gaari karno iyada oo laga yaabo in ay jiraan xisaabaad kaloo badan oo ku diiwaangashan magaca Dowlad-goboleedka Galmudug balse aan ku diiwaangashaneen Wasaaradda Maaliyadda. Nasiib wanaag, saddexdii bilood ee ugu horreeyay 2019 waxaannu ku guulaysanay in aannu xirno dhammaan xisaabaadka ku diiwaangashan magaca Dowlad-goboleedka Galmudug kuwa aannan lagu furin oggolaanshaha Wasaaradda Maaliyadda. Waxaannu marar badan ayaa Bankiga Dhexe ee Soomaaliya (CBS) ka codsanay xaqiijinta bankiga balse waxba ka aanan helin, waxaa xusid mudan in CBS uu ka soo jawaabay codsigii xaqiijinta ee Hanti-dhowrayaasha. Waxaannu ku dadaali doonaa in aan arrinkan kala sii hadalno CBS si loo xaqiijiyo in ay xaqiijinta bankiga ay siiyaan GSS maadaama loogu baahan tahay baarista hantidhowrka

Cidda ka mas'uulka ah iyo taariikhda:

Agaasimaha Waaxda Khasnadda/Unugga Maareynta Lacagta Caddaanka ah. Degdeg ah

Waxyaabihii la ogaadey Ir°: 3aad	Cinwaanka: Lacag Bankiga Ku Jirta oo Aan La Shaacin
Shuruudaha: Qodobka 8.1. ee Buugga Habraacyada Maareynta Xisaabaha Bankiga, wuxuu dhigayaa: “Bisha Disembar ee sanad walba, Unugga Maareynta Lacagta Caddaanka ah ayaa dib-u-eegis ku sameyn doona diiwaanka bankiga iyo dhammaan xisaabaha banki ee dowladda. Dib-u-eegista waxaa ay koobeysaa arrimahan muhiimka ah ee soo socda...” Qaybta (e) waxaa ay dhigaysaa: “Codsii xaqiijin sanadle ah oo bankiyada looga codsanayo in ay xaqiijiyaan magaca iyo lambarka xisaabta ee dhammaan xisaabaha bankiga ee ku diiwaangashan magaca [Dowlad-goboleedka]” Sharraxaadda waxyaabihii la ogaadey Sida qayb ka mid ah habraacyada baarista, ayaa waxaannu si madax-bannaan xaqiijin banki uga raadinay dhammaan Bankiyada Ganacsiga ee ku yaalla gudaha dowlad-goboleedka si aan u xaqiijinno in Wasaarad ama Hay'ad Dowladeed aysan xisaab banki oo gaar ah ugu furnayn oo Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MoFED) aysan ka warqabin. Waxaannu xaqiijin banki ka helnay Bankiga Dhexe ee Soomaaliya oo muujineysa in lacag dhan 1,978 USD lagu hayay Xisaab Ir. (ACCNo.) 1099 iyo in lacag dhan USD 88 lagu hayay Xisaab Ir. (ACCNo.) 780 (xisaab loo furay GSS ka hor inta aysan noqon Dowlad-goboleed waxaanna ku jirtay lacag dhan USD 88 oo ah haraaga furitaanka). Lacagta dhan USD 88 ee ku jirta CBS Xisaab Ir. (ACCNo.) 780 laguma darin Bayaamada Maaliyadeed ee Dowlad-goboleedka.	
Saameynta Maaliyadeed: USD 88	
Waxyaabaha ka dhalan kara: Waxaa jirtay in aan loo hoggaansamin dhabbe-tusayaasha ku dabaqma.	
Qiimeynta heerka mudnaanta: Mudnaanta 1aad – Tallaabo sixid degdeg ah ayaa loo baahan yahay.	
Soo-jeedimo: Waxaan kula talineynaa GSS in ay faahfaahinnada xaqiijinnada xisaabaadka bankiyada ay ka dhigto qayb ka mid ah habraacyada sannadka dhammaadkiisa ee waafaqsan buuggaagta habraaca. Intaa waxaa dheer, hab-dhaqan ahaan, Dowlad-goboleedka iyada oo u maraysa Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MoFED) waa in ay si joogto ah uga raadiso xaqiijin dhammaan bankiyada ganacsiga ku yaalla gudaha Dowlad-goboleedka oo ku saabsan haddii Wasaaradaha Kale ama Hay'daha Dowladda ay u furan yihiin wax xisaabaad banki ah oo aysan ka warhayn. Sidoo kale, Dowlad-goboleeda waa in ay tixgeliso lacagta ku jirta Bankiga Dhexe ee Soomaaliya in loo soo wareejiyo Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda.	
Waafaqsanahay/ Ma Waafaqsanin: Waafaqsanahay	
Faallooyinkii ay ka bixisey GSS: Si waafaqsan Faqradda 8aad ee Tilmaamta I, dib-u-eegista diiwaanka bankiga ayaa la sameyn doonaa oo qayb ka ah geeddi-socodyada sannadka dhammaadkiisa ee sannad maaliyadeedka 2019 ee GSS. Dib-u-eegista xisaabaadka banki ee CBS ayaa la sameyn doonaa si loo go'aamiyo haddii loo baahan yahay in la xiro wax ka mid ah xisaabaadkan. Waxaa xusid mudan in GSS aysan awoodin in ay ka helaan xaqiijinta xisaabaadka bankiga CBS in kasta oo ay ka codsadeen dhowr jeer. GSS ayaa arrintan	

kala sii hadli doonta CBS si loo xaqiijiyo in ay bixiyaan macluumaadka loo baahan yahay marka ay GSS ka codsato.

Cidda ka mas'uulka ah iyo taariikhda:

Agaasimaha Waaxda Khasnadda/Unugga Maareynta Lacagta Caddaanka ah. Degdeg ah

Waxyaabihii la ogaadey Ir°: 4aad

Cinwaanka: Lacag-bixinno aan loo taageerin si ku filan

Shuruudaha:

Iyada oo la tixraacayo Habraacyada maareynta maaliyadeed ee GSS, Faqradiisa Caddaynta lacag-bixinta ayaa waxay dhigaysaa “Caddaynta Lacag-bixinta waxaa ay dhacdaa marka la helo alaabooyinka ama adeegyada. Qof karti iyo aqoon u leh (kani inta badan waa qofka asal ahaan aqoonsanaya shuruudaha Oggolaanshaha Ballanqaadka) waa in uu marka koowaad xaqiijiyo in adeegga loo qabtey ama alaabooyinka loo keenay si waafaqsan Dalabka libsiga. Qofkan waa in uu buuxiyo qaybta Warbixinta Guddoonka alaabooyinka ee Dalabka libsiga”.

Waxyaabaha ugu muhiimsan ee loo baahan yahay si loo hubiyo in la helo faylal/galal maaliyadeed sax ah oo dhammeystiran waa siyaasadaha iyo habraacyada xakamaynta maaliyadeed oo taabogal ah. Kantarool maaliyadeed oo muhiim ah waa xaqiijinta in dhammaan lacag-bixinnada lagu taageero dokumentiyo ku filan sida qaansheeg, rasiidyo, heshiisyo, tigidy, waraaqda koridda diyaaraha ama maraakiibta, warqadaha guddoonka alaabta, iwm.

Sharraxaadda waxyaabihii la ogaadey:

Waxaan ogaanney lacag-bixinno midkood aan lahayn dokumentiyo taageera ama si ku filan loo taageerin sida lagu faahfaahiyay Lifaafa 2aad oo lagu soo koobay hoos:

Filnaansho la'aan	Tixraac: Lr. Lifaafa	Tirada lacagta
Lacag-bixinnada aan la taageerin	Lifaafa 2 C	37,470
Lacag-bixinno si aan ku filnayn loo taageeray	Lifaafyada 2 A, 2 B, 2 D, 2 E iyo 2 F	1,117,677
Wadarta Guud		1,155,147

Qayb ka mid ah lacag-bixinnada aan la taageerin waxaa ay la xiriiraan Mushaar la siiyay Xoghayaha Joogtada ah, Wasaaradda Maaliyadda. Intii lagu jiray sannad maaliyadeedkii dhammaadey 31ka Disembar 2018, GSS waxay bixisay mushaaraad dhan guud ahaan USD 6,000 oo la siiyay Ku-simaha Xoghayaha Joogtada ah, Wasaaradda Maaliyadda. Shaqaalaha ayaa iscasilay bishii Oktobar 2016 waxaanna la bixiyay warqadda aqbalaadda iscasilaadda oo ku taariikhaysan Nofembar 2016. Waxaa naloo sheegay in shaqaaluhu ku shaqeynayay awood ku-sime ilaa bishii Maajo 2018. Hase-yeeshee, ma jirin wax caddaymo ah oo muujinaya in uu u shaqeynayay GSS sannadkii 2018 sidoo kale ma helin shuruudaha uu dib ugu soo noqday xilka ku-sime si aan dib-u-eegis ugu sameyno.

Saameynta Maaliyadeed: USD 1,155,147

Waxyaabaha ka dhalan kara:

Caddaynta aan ku filnayn mucaamalaadka dhacay waxay yareynaysaa ku kalsoonaanta bayaamada maaliyadeed maadaama qiimaha loo qoondeeyay mucaamalaadka, kala-soocidda saxda ah ee lacag-bixinnada iyo habraacyada kantaroolka ee loo adeegsaday mucaamalaadka aan si ku filan loo xaqiijin karin.

Qiimeynta heerka mudnaanta:

Mudnaanta 1aad – Tallaabo sixid degdeg ah ayaa loo baahan yahay.

Soo-jeedimo:

- a) Lacag dhan USD 6,000 waxaa in laga soo celiyaa lacag-bixinnada GSS ka-dibna waa in dib loogu celiyaa mashruuca RCRFII. Waxaa loo baahan yahay in la xoojiyo kantaroolada si loo xaqiijiyo kaliya kharashaadka baxay in lagu diiwaangeliyo warbixinnada maaliyadeed.
- b) Waxaan ku talinaynaa diiwaanno xisaabeed ku filan in la diyaariyo oo loo joogteeyo si loo taageero dhammaan kharashaadka baxay.
- c) GSS waa in ay diyaariso jadwalka dokumentiyada la filayo in loo helo qaybaha kala duwan ee mucaamalaadka.
- d) Ku saabsan gunnooyinka la siiyo saraakiisha amniga, liis ay ku qoran yihiin waa in sidoo kale la joogteeyo oo la socda liiska lacag-bixinta oo loo adeegsan doono in lagu xaqiijiyo saraakiisha amniga ka hor inta aan lacag-bixinta la sameyn. Dowladdu waxay ka faa'iidayaan kartaa ikhtiyaarada sida in ay soosaarto nidaamka diiwaangelinta oo elektaroonig ah.
- e) Wasaaradda Maaliyadda waa in ay lacag-bixinnada si toos ah ugu dirto xisaabaadka bankiga ee saraakiisha kala duwan ama waa in ay isticmaasho adeegyada xawilaadaha lacagta.
- f) Lacag-bixinnada sahayda cuntada ah waa in lagu taageeraa dokumentiyada iibka sida dalabka iibka, qaansheegyada, rasiidyo, warqadaha guddoonka alaabta iyo warqadaha alaabooyinka la helay. Caddaynta ku saabsan qaybin sahayda ee ku xigta sida liisaska qaybinta alaabooyinka waa in sidoo kale la joogteeyaa.
- g) Dhabbe-tusayaasha ku saabsan lacag-bixinta gunnooyinka hawladeennada waa in la diiwaangeliyaa oo la soo bandhigaa si loo ansixiyo. Intaa waxaa dheer, in dhammaan gunnooyinka gaadiidka, hoyga iyo kuwa xirfadeed ee la bixiyay waa in si ku filan loogu taageero dokumentiyada taageerada dhinac saddexaad sida qaansheegyada, rasiidyada iyo warbixinnada isla-xisaabtanka.

Waafaqsanahay/ Ma Waafaqsanin: Eeg faallooyinka GSS

Faallooyinkii ay ka bixisey GSS:

a) Ma Waafaqsanin: Si looga fogaado in jagada Xoghayaha Joogtada ah ay bannaanaato, ayaa Wasiirka wuxuu ka codsaday Xoghayaha Joogtada ah in uu ku-sime ahaan u hayo xilka ilaa jagada si joogto ah loogu buuxiyo. Waxaa jira wadahal qoraal ah oo arrintaa ku saabsan. Waxaa uu si joogto ah u taageerayay MOFED intii lagu guda jiray muddadaasi.

b) Waafaqsanahay. Aqoon-isweydaarsi ku saabsan maareynta dokumeniyada ayaa la qabtay bishii Juun 2019 si tababar loogu fidiyo hawladeennada MoFED oo ku saabsan galeynta/fayl gareynta dokumentiyada taageeraya. Waxaa dib loo eegay faylalka oo qayb ka ah geedi-socodka dhammaadka sannadka, faylashadan ayaa dib loo eegi doonaa si loogu diyaariyo baaris.

c) Waafaqsanahay: Sida qayb ka mid ah aqoon-isweydaarsiga ahaan, liiska dokumentiyada taageeraya ee loo baahan yahay in lagu joogteeyo ama lagu hayo fayl ayaa la soo bandhigay. Waaxda khasnadda ayaa dib-u-eegi doonta dhammaan faylasha dokumentiyada si loo xaqiijiyo dhammeystirnaantooda. Jadwalka dokumentiyada la filayo in loo helo qaybaha kala duwan ee mucaamalaadka waxaa lagu bixiyay Buugga Wax-soo-iibsiga Dowladda iyo xeer-nidaamiyaha #8.

Cidda ka mas'uulka ah iyo taariikhda:

Waaxda Khasnadda Muddo dhexe

Faallooyinka dheeraadka ah ee hanti-dhowraha:

Waxaannu sii hayn doonaa waxyaabihii la ogaadey ee ku saabsanaa mushaarka la siiyay Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda Maaliyadda ee xilka ka tagaya iyada oo la tixgelinayo in wadahalalka lagu sheegay jawaabta aanan lana siin si aan dib-u-eegis ugu sameyno markii aan codsanay iyo sidoo kale in aannu jirin caddaymo muujinaya in sarkaalka si firfircoon uu ugu shaqeynayay Wasaaradda.

Waxyaabihii la ogaadey Ir°: 5aad	Cinwaanka: Isticmaalka xad-dhaafka ah ee lacag-bixinnada Kaashka ah
Shuruudaha: Tallaabo wax-ku-ool ah oo lagu gaarayo faylal maaliyadeed sax ah waa yareynta ku tiirsanaanta lacag-bixinnada kaashka ah, haddii ay suurtagal tahay. Sababtoo ah kaashka waxaa lala xiriiriyaa halis heer sare ah iyo khalad marka loo eego hababka kale ee lacag-bixinta. Halisahan waxaa ka mid ah waxqabadyada khayaamada la xiriira iyo suurtagalnimada in shakhsiyaad ay lacago wax-isdabamarin ku sameeyaan. Sidoo kale, Buugga Habraacyada Dakhliga/Kharashka iyo Maareynta Maaliyadeed ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS) wuxuu ku sheegayaa qaybta Faahfaahinta geeddi-socodka Kharashaadka “Lacag-bixinta kuwa alaabta iyo adeegyada laga soo iibsado waxaa lagu bixin karaa jeeg ama haddii la yeeli karo waa in lacagaha lagu xawilo xisaabta kuwa wax laga soo iibsado”. Sharraxaadda waxyaabihii la ogaadey: Waxaan ogaanney in si xad-dhaaf ah loo isticmaalo lacag-bixinnada kaashka ah iyada oo lacag-bixinno aad u badan lagu hagaajiyay xisaab banki gaar loo leeyahay. Tusaale ahaan: • USD 189,000, oo ah 9% wadarta guud ee kharashka la soo sheegay (eeg Lifaafa 3 (a)) ayaa Gunno ahaan loo siiyay Siyaasiyiin • Wasaaradda Amniga Gudaha ayaa bixisay USD 386,875 oo ah 18% wadarta guud ee kharashaadka la soo sheegay (ee Lifaafa 3 (b)) oo loogu talagalay Ciidamada Ammaanka (Booliska, Nabadsugidda iyo Asluubta) oo gunnooyin lacag caddaan ah. Lacag-bixinnadan ayaa sidoo kale loogu aqoonsaday in aan si ku filnayn loogu taageeray Waxyaabihii la ogaadey ee Ir. 4aad.	
Waxyaabaha ka dhalan kara: Lacag-bixinnada kaashka ee muga leh waxay yareeyaan raadraaca baarista ee macaamulaadka, kordhiyaan halista in maaliyadaha ay wax ka lumaan iyo in lacag la lunsado.	
Qiimeynta heerka mudnaanta: Mudnaanta 1aad – Tallaabo sixid degdeg ah ayaa loo baahan yahay.	
Soo-jeedimo: GSS waa in ay yareyso ku tiirsanaanteeda lacag-bixinnada kaashka ah. Waxaa ay taa ku gaari kartaa iyada oo xaddidaysa heerka lacag-bixinnada kaashka ah oona ku soo rogaysa xadad sare. Lacag-bixinnada nidaamka bankiyada iyo lacagaha la isugu kala xawilo telefoonada oo laga heli karo Soomaaliya waa in loo adeegsado bixinta lacagaha ka-faa'iideystayaasha. Lacag-bixinta kaashka ah waa in laga dhigo inta ugu yar ama waa in keliya lagu adeegsado xaaladaha aan laga fursan karin.	
Waafaqsanahay/ Ma Waafaqsanin: Waafaqsanahay	
Faallooyinkii ay ka bixisey GSS: GSS waxay lacagaha ciidamada ammaanka oo dhan ku shubtay koontada hal qof, sababta oo ah ciidamada ammaanka intooda badan ma laha xisaabaad bankiga taasina waa sababta keentay in aan lacagta hal qof u dhiibno oo u geeya ka faa'iideystayaasha kale ka-dibna wuxuu Wasaaradda u soo	

gudbinayaa liis saxiixan. Waxaannu qorsheynaynaa in aannu khafiifino oo aan xisaabaad u sameyno qof/ka-faa'iideyste kasta.

Cidda ka mas'uulka ah iyo taariikhda: Xoghayaha Joogtada ah/ Waaxda Khasnadda. Muddo dhexe

Waxyaabihii la ogaadey Ir°: 6aad	Cinwaanka: Liidashada geeddi-socodka wax-soo-iibsiga
Shuruudaha: Xeer-nidaamiye #8. Xeer-nidaamiyaha sugaya Buugga Siyaasadaha iyo Habraacyada Wax-soo-iibsiga Dowladda ee Xeerka PFM, 2017, waxaa uu u bixiyaa dhabbetusayaasha wax-soo-iibsiga alaabada iyo adeegyada sida soo socota; a) Hababka wax-soo-iibsiga: - Ka Helidda Hal Meel oo Keliya; tani waa in la sameeyo marka ay jiraan xaaladahan soo socda; - Marka uu jiro qandaraas alaabooyin, shaqooyin ama adeegyo aan la talin ahayn, oo loo bixiya si waafaqsan habraacyo ay aqbali karto GSS. - Caadi ka dhigidda qalab ama qaybo dayactir si ay ula jaanqaadaan qalabka la hayo. - Marka qalabka loo baahan yahay uu yahay mid laga leeyahay oo laga heli karo keliya hal meel. - Xaalado gaar ah, sida iyada oo laga jawaabcelinaya musiibooyin dabiici ah. - Marka qiimaha qandaraaska uu yahay kun doolar oo Doolarka Mareykanka ah (US \$1,000) ama ka yar. b) Habka adeegashada – iibsiga ka yar USD 10,000; wuxuu u baahan yahay ugu yaraan saddex qiimo-sheeg iyo in la falanqeeyo qiimaha. - Geeddi-socodka wax-soo-iibsiga lagu tartamo oo ku lug leh qandaraas bixin guud ayaa loo sameyn doonaa iibsiyada ka badan USD 10,000. b) Intaa waxaa dheer, sida ku xusan faqradda 3.1.1 ee Xeer-nidaamiyaha 8aad, “[Dowlad-goboleedka] waa in ay diyaariso qorshayaal wax-soo-iibsi mudadiiba mar ah oo loogu talagalay helidda alaabo, shaqooyin, la-taliye, iyo adeegyada aan la-talinta ahayn, (“Qorshe Wax-soo-iibsi”). Qorshaha Wax-soo-iibsiga waa dokumeentiga qorsheynta iyo hirgelinta barnaamijka muhiimka ah oo ay diyaarisay [Dowlad-goboleedka]. Shaqada aasaasiga ah ee uu qabto Qorshaha Wax-soo-iibsiga waa in uu u adeego sida qalab maareyn oo ay [Dowlad-goboleedka] ku kormeerayso hawlaha wax-soo-iibsiga”. c) Sida ku xusan Lifaafa 8aad ee Xeer-nidaamiyaha 8aad, Iska-horimaadka Danaha Xubnaha Guddiga - Hannaanka magacaabidda ee guddiga waa in uu hubiyo sidoo kale in xubnaha guddiga aysan hadda, ama hal sano ee la soo dhaafay ka qaybgalin, shaqada kayaanada/hay'adaha ku tartamaya. Waxaa siidheer, in xubinka guddiga uusan lahayn dano maaliyadeed oo saameyn kara ka-qaybgalkooda guddiga qiimeynta qandaraaska. Sharraxaadda waxyaabihii la ogaadey: Waxaan ogaaney liidashooyinkan soo socda: - Xaalado caddeynta u hoggaansamidda habraacyada wax-soo-iibsiga lagu tartamo aan la raacin sida lagu muujiyay Lifaafa 4A. - Waaxda wax-soo-iibsiga ee MOFED GSS ma diyaariso qorshaha wax-soo-iibsiga sannadka. - Siyaasadda wax-soo-iibsiga ma laha dhabbetusayaal ku saabsan cidda ka mid noqonaysa iyo tirada xubnaha ka mid noqonaya guddiga wax-soo-iibsiga. - Bayaanadii ilaalinta sirka iyo dhexdhexaadnimada ee asalka ahaa ayaa ka maqan faylasha wax-soo-iibsiga; nuqulo ayaa la isticmaalayay. - Waxaa jiray xaalado faylka wax-soo-iibsiga ay ka maqnaayeen foomamka qoondaynta maaliyadaha iyo codsiyada waaxda adeegsanaysa. - Waxaa jiray xaalado Warbixinnada Qiimeynta Tartanka Qandaraaska aan si ku filan u saxiixin Guddiga Qiimaynta Tartanka Qandaraaska (BEP), qoraalladii laga diyaariyay ee loo helay dib-u-eegista waxaa ay ahaayeen nuqullo oo ma ahayn asalka.	

g) In aannu jirin qiimeynta hore ee lagu sameeyo kuwa wax laga so iibsado oo ay sameeyso Waaxda Wax-soo-iibsiga ee Wasaaradda Maaliyadda. h) Wax-soo-iibsiga ciidamada ammaanka iyo kuwa militeriga oo lagu qiimeynayo in ka badan heerka bilowga USD 2,500 iyo USD 10,000 ma marin habraacyada wax-soo-iibsiga ee lagu tartamo, eeg Lifaaqa 4 B.
Waxyaabaha ka dhalan kara: In aannu la adeegsan habraacyada wax-soo-iibsiga ee lagu tartamo ayaa halis ku haya GSS in aysan ka faa'iidin qiimaha ugu wanaagsan ee lacagta.
Qiimeynta heerka mudnaanta: Mudnaanta 1aad – Tallaabo sixid degdeg ah ayaa loo baahan yahay.
Soo-jeedimo: Maamulka waa in uu xaqiijiyaa in: a) Habraacyada wax-soo-iibsiga ee lagu tartamo in loo hoggaamsamo iyada oo la raacayo dhabbetusayaasha iyo Xeer-nidaamiyayaasha Xeerka PFM. b) Waaxda Wax-soo-iibsiga MOFED ay diyaariso qorshayaasha wax-soo-iibsiga sannadlaha ah iyo in ay si joogto ah qiimeyn hore ugu sameeyso shirkadaha ay wax ka iibsato. c) Waaxda Wax-soo-iibsiga MOFED in ay qaado tallaabooyin lagu xoojinayo kantaroolada iyada oo xaqiijinaysa u hoggaansamid, kala-saaridda waajibaadka iyo dib-u-eegisyo adag oo lagu sameynayo macaamulaadka iyo dokumentiyada taageeraya ka hor inta aysan lacagaha bixin. d) Hannaanka wax-soo-iibsiga waa in lagu daraa: - foomamka qoondaynta maaliyadaha iyo codsiyada waaxda adeegsanaysa - bayaannada asalka ah ee ilaalinta sirta iyo shaacinta dhexdhexaadnimada - baarista agabka la helay iyada oo lala eegayo tilmaamaha - caddaynta go'aanka wax-soo-iibsiga ee la qaatay d) Caddaynta keenista waa in lagu daraa: - dokumentiyo habboon oo muujinaya in agabkaloo qaybiyay ka-faa'iideystayaasha loogu talagalay - muuqashada habboon ee hantida iyo dhismeyayaasha
Waafaqsanahay/ Ma Waafaqsanin: Waafaqsanahay
Faallooyinkii ay ka bixisey GSS: Waxaan waafaqsanahay waxyaabihii aad ogaateen, GSS waxaa ay dhaqangelin doontaa tallaabooyin lagu sii wanaajinayo u hoggaansamidda buugga wax-soo-iibsiga dowladda iyo xeer-nidaamyaha #8 ee wax-soo-iibsiga dowladda. Qorshe hawleedka wax-soo-iibsiga sannad maaliyadeedka 2020 ayaa la sameyn doonaa, tilmaamo lagu qeexayo tirada inta qof ee ka mid noqonayso guddiga wax-soo-iibsiga ayaa la soosaari doonaa 2020 waxaanna galka la geli doonaa dhammaan dokumentiyada asalka ah.
Cidda ka mas'uulka ah iyo taariikhda: Xoghayaha Joogtada ah iyo Agaasimaha Wax-soo-iibsiga Agaasimaha Wax-soo-iibsiga. Muddo dhexe

Waxyaabihii la ogaadey Ir°: 7aad

Cinwaanka: Liidashada maareynta hantida

Shuruudaha:

Qodobka 3.2 ee mas'uuliyadda waafaqsan xeer-nidaamiyaha 9aad (Siyaasadda Hantida Raasamaalka ah) ee Xeerka PFM ee 2017 wuxuu dhigayaa "Agaasimaha Guud (ama cidda u dhiganta) waxaa uu cid u wakiilan karaa waajibaadyada isuduwidada soo-tirinta hantida la taaban karo, sidoo kale hubinta soo-iibsashada/helidda, wareejinta, iyo ka-takhalusidda hantida raasamaalka ah u wakiilan karaa cid gelisa Diiwaanka Dhexe ee Hantida."

Intaa waxaa dheer, Qodobka 3.3 ee xeer-nidaamiyaha 9aad (Siyaasadda Hantida Raasamaalka ah) ee Xeerka PFM ee 2017 wuxuu dhigayaa "Wasaaradda Maaliyadda waa in ay maamushaa Diiwaanka Dhexe ee Hantida Raasamaalka ah ee guud ahaan dowladda, kaas oo ay tahay in uu maamulo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda. Hay'adaha waxaa ay goonidooda u lahaan karaan Diiwaan Hantida Raasamaalka ah oo iyaga u gaar ah si ay ugu adeegsadaan maareynta hantida ee hay'adda

dhexdeeda, hase-yeeshee, diiwaanka dhexe ee ay maamusho Wasaaradda Maaliyadda ayaa ah diiwaanka rasmiga ah ee dowladda waxaana guud ahaan hantidhowrka iyo waxbixinnada hantida raasamaalka ah loo fiirinayaa diiwaanka goobta dhexe laga maamulo."

Sharraxaadda waxyaabihii la ogaadey:

- Lambarka ku dhegan Hantida La Taaban karo iyo Lambarka ku qoran Diiwaanka hantida ee laga soosaaray Nidaamka(System) Maareynta Hantida (AMS) isma laha taas oo adkeysay hawlaha xaqiijinta/hubsashada dhabta ah ee hantida. Tusaalooyin ayaa lagu muujiyey shaxda hoose:

Lambarka ku dhegan hantida	Sharraxaadda sida ku xusan AMS	Agabka la taaban kare ee dhan ahaantii la xaqiijiyay
0016603GDS	Kombiyuutar (Desktop Computer)	Armaajooyin Alwaax ah
0014003GDS	Kombiyuutar (Desktop Computer)	Kursi xafiiseed

- Diiwaanka Hantida ee ku jira AMS ma lahayn qiimaha hantida
- Hantida la soo iibiyay sannadka laguma darin qorshaha wax-soo-iibsigaa ee sannadka lacag-bixinta la siiyay kuwa wax laga soo iibsadayna laguma taageerin warqadda guddoonka alaabta ee cidda wax laga soo iibsaday.
- Ma jiraan wax caddeymo ah oo muujinaya in xaqiijin/hubsasho dhab ah lagu sameeyay hantida Dowladda.
- Diiwaanka Hantida ma shaacin qaar ka mid ah hantida ay dowladdu leedahay sida dhulka, dhismeyaasha iyo gawaarida.

Waxyaabaha ka dhalan kara:

- Waxaa jiray kantaroolada hantida lagu ilaaliyo oo aan ku filnanyn taas oo kordhinaysa halista in lagu guuldareysto dabagalka hantida iyo iswaafajinta diiwaanka hantida iyo bayaamada maaliyadeed.
- la'aanta hab nidaamsan oo lagu la socdo hantida ayaa horseedi karta in hantida la lunsado.
- Looma hoggaansamin qodobbada Xeerka PFM.

Qiimeynta heerka mudnaanta:

Mudnaanta 1aad – Tallaabo sixid degdeg ah ayaa loo baahan yahay.

Soo-jeedimo:

- Hubi in qiimaha hantida lagu diiwaangeliyo Bayaamada Maaliyadeed iyada oo la raacayo diiwaanka hantida ee sannadka soo iibsiga. Waxaa lagama maarmaan ah in la iswaafajiyo diiwaanka hantida maguurtada ah iyo Bayaamada Maaliyadeed.
- Hubi in diiwaanka hantida la joogteeyo iyada oo lagu qorayo dhammaan macluumaadka muhiimka ah sida qiimaha hantida si loo hubiyo kantarool taabagal ah iyo la-socoshada hantida. Tani waa in la sameeyaa iyada oo la qabanayo hawl si buuxda hantida loogu diiwaangalinayo.
- Dowladdu waa in ay xaqiijisaa saxnaashaha macluumaadka iyo xogta ku diiwaangashan Nidaamka Maareynta Hantida iyada oo hubinaysa lambarada ku dhegan iyo lambarrada taxanaha ah ee ku yaalla hantida in ay isku mid yihiin kuwa ku jira Nidaamka Maareynta Hantida,
- Dowladda waa in ay cusboonaysiisaa diiwaanka hantida si ay u hubiso in dhammaan hantida ay Dowladdu leedahay in ay ku jiraan diiwaanka hantida.
- Dowladda waa in ay si sannadle ah u qabataa hawlaha xaqiijinta/hubsashada dhabta ah ee hantida waana in ujeedooyin tixraac ahaan hannaanka iyo warbixintaba si wanaagsan loo diiwaangeliyaa iyo si loo bixiyo diiwaanka ama raadka baasita ee hawsha.

Waafaqsanahay/ Ma Waafaqsanin: Waafaqsanahay

Faallooyinkii ay ka bixisey GSS:

- Iibsiga hantida waxaa lagu diiwaangeliyay FMIS markii hantida la soo iibiyay. Sannadkii 2019 hannaan ayaa la hirgeliyay oo Waaxda khasnadda ay tahay in ay dib u eegto macaamulaadka hantida (iyada oo ka eegaysa gudaha FMIS) bil kasta iyo in ay faahfaahinta ay siiso Waaxda Wax-soo-iibsiga si ay iyagga dib u eegis ugu sameyso ka-dibna ay joogteyso AMS. Dib-u-eegis ayaa la sameyn doonaa sannadka dhammaadkiisa si loo hubiyo in faahfaahinnada AMS ay waafaqsan yihiin FMIS. (MUDDO DHEXE)
- Dib-u-eegis AMS ayaa la sameyn doonaa ka hor dhammaadka sannadka si loo hubiyo in iibka hantida la geliyay FMIS. DEGDEG AH
- Sida qayb ka mid ah tirinta sannadlaha ah ee hantida la taaban karo, hantida ayaa dib-u-eegis lagu sameyn doonaa iyada oo loo eegayo xogta ku jira AMS iyada oo AMS la joogteynayo haddii loo baahdo. MUDDO DHEXE
- Tirinta alaabooyinka la taaban karo ee sannadka dhammaadkiisa ayaa la sameyn doonaa si loo arko hantida oo loo xaqiijiyo hantida iyada oo loo eegayo faahfaahinnada AMS. MUDDO DHEXE
- Tilmaanta I: tirinta hantida la taaban karo iyo warbixin ku saabsan xaaladda ayaa la soosaaray horaantii sannad maaliyadeedka 2019. MoFED ayaa waxay xaqiijin doontaa in Tilmaantan loo soo saaray sida qayb ka mid ah hannaanka sannadka dhammaadkiisa si loo arko hantida oo xaaladeeda looga warbixiyo. MUDDO DHEXE

Cidda ka mas'uulka ah iyo taariikhda:

Xoghayaha Joogtada ah. Agaasimaha Waaxda Khasnadda / Agaasimaha Wax-soo-iibsiga. Qaar waa Degdeg qaarna waa Muddo dhexe waxaanna lagu sheegay xagga sare.

Waxyaabihii la ogaadey Ir°: 8aad	Cinwaanka: La'aanta jaangooyooyinka iyo siyaasadaha IT-ga ee hay'adda oo rasmi ah
Shuruudaha: Siyaasadaha iyo habraacyada waa qayb aasaasi ah oo ka mid ah hay'ad kasta. In nidaamyada Tiknoolajiyadda Macluumaadka (IT) ee GSS laga ilaaliyo gelid aan la oggolayn waa muhiim sidaa darteedna dhabbetusayaal ku filan waa in loo meel dhigaa si loo xaqiyo Hay'adda in ay leedahay kantaroolo ku filan oo lagu xaddidayo gelidda nidaamyada(systems) iyo xogta. Sharraxaadda waxyaabihii la ogaadey: Dib-u-eegista aan ku sameynay xaaladaha IT-ga ee GSS ayaa daaha ka qaadday in Dowladda aysan lahayn siyaasado iyo habraacyo ICT oo dhammeystiran kuwaas oo dhigaya qaybahan muhiimka ah ee soo socda: • Siyaasado IT oo bixinaya tilmaamaha kala duwan ee isbeddelka Nidaamka (system),Gelidda Adeegsadaha, Qorshayaasha Shaqo Sii Socoshada/ Ka Soo Kabashada Musiibada (BCP/DRP), iwm. Si kastaba ha ahaate, ma lahan siyaasad ku saabsan isticmaalka Moodemyada MiFi (Internet-ka). • Habraacyo rasmi ah oo lagu diiwaangelinayo (lagu la soconayo dhacdada) lagulana soconaya arrimaha la xiriira nusqaamaha/fashiilka ku yimaada nidaamka kuwaas oo haddii aan lala socon ay dhici karto in muddo dheer aanan la xallin. • Dhabbetusayaal ku saabsan sida ay Dowladdu u sameyn karto Shaqo Sii Socoshada iyo Qorshayaasha Ka Soo Kabashada Musiibada. IT-ga waaxda dowladda ma lahan nidaam taakuleeya ama gurmada u noqda waxaanna hadda gacanta ku haya kooxda farsamada ee Bisan maadaama nidaamku uu yahay mid ku saleysan baraha internet-ka oo meel fog laga hago. Tani ayaa waxay adkaynaysa in la hubiyo oo si maalinle ah dhab ahaantii loo sameeyo nidaam taakuleyn ah. • Tababar rasmi ah oo nidaamsan laguna baranayo duruus ku saabsan IT-ga oo joogto ah waa in loo qabtaa shaqaalaha cusub iyo kuwii horay u joogayba. • Waxaa kaloo oggaaney wareejinta xogta RMS ee loo wareejiyo FMIS in aysan ahayn mid otomaatik ah, xogta ku jirta nidaamka RMS lama geyn karo FMIS.	
Waxyaabaha ka dhalan kara: • Hannaanada la xiriira IT-ga ayaa waxaa laga yaabaa in aan la raacin iyada oo sabab u ah in aanu jirin habraacyo iyo siyaasado IT dhammeystiran oo qeexan. • La'aanta qorshayaasha BCP iyo DRP ayaa keeni karta in ay hay'adda awoodi wayso hawlaha in ay sii wado haddii ay musibo dhacdo ama halis xog lumid suuragal ah ay timaado. • La'aanta barnaamij tababar nidaamsan ayaa horseedi karta in hawladeennada ay si ku filan ugu diyaargarooabin gudashada doorarkooda iyo mas'uuliyadaha. • Ka gaabinta in la isku xiro nidaamyada RMS iyo FMIS ayaa keeni karta xogta in ay soo wajahdo isdabamarin si ula-kac ah ama si aan ula-kac ahaynba loogu sameeyo oo raad la'aan ah waxaanna dhici karta in aan la oggaan.	
Qiimeynta heerka mudnaanta: Mudnaanta 1aad – Tallaabo sixid degdeg ah ayaa loo baahan yahay	
Soo-jeedimo: Waxaan dowladda kula talineynaa: • In ay tixgeliso dejinta siyaasad IT dhammeystiran oo waafaqsan dhabbetusayaasha IT-ga iyo hawlgallada maalinlaha ee Wasaaradda. Waxaa intaa siidheer, in ay si joogto ah dib-u-eegis ugu sameeyo siyaasadaha si ay u noqdaan kuwo iswaafaqsan oo ku habboon dhacdooyinka isbeddelaya.	

- Siyaasadda IT-ga waa in lagu daraa habraacyada loogu talagalay sameynta qorshayaasha BCP iyo DRP.
- In ay xaqiijiso dhabbetusaha tababar nidaamsan in la diyaariyo si loo suuragaliyo shaqaalaha in lagu hannuuniyo arrimaha IT-ga iyo wax kastoo cusub ee ku soo kordha nidaamka (system-ka).
- Wareejinta xogta laga wareejiyo RMS ee loo wareejiyo FMIS waa in laga dhigaa mid otomaatik ah iyada oo la sameynayo waji nasasho oo isla-markiiba xogta lagu daabacay RMS si toos ah ugu wareejinayo FMIS.

Waafaqsanahay/ Ma Waafaqsanin: Waafaqsanahay

Faallooyinkii ay ka bixisey GSS:

Siyaasadda ICT waa la diyaarinayaa waxayna diyaar noqon doontaa sannadka 2019 dhammaadkiisa,

Cidda ka mas'uulka ah iyo taariikhda:

Agaasimaha Waaxda ICT. Degdeg ah

Waxyaabihii la ogaadey Ir°: 9aad	Cinwaanka: Daldaloollo ka jira Maareynta kantaroolada gelidda adeegsadaha
Shuruudaha: Qodobka 5aad ee Buugga Kantaroolada Gelidda Adeegsadaha (<i>Bisan 8.1 User Access Controls v1.2_GSS Nuqulka 1.0</i> ee Ku Taariikhaysan: Maarso 2016) waxaa uu bixiyaa isku-xiriirsanaanta shaqada ee ku saabsan geeddi-socodka diiwaangelinta adeegsadyaasha cusub ee nidaamka Bisan. Geeddi-socodka wuxuu u baahan yahay in oggolaansho rasmi ah laga helo madaxda waaxaha ay khusayso abuurista adeegsadyaasha cusub ee nidaamka Bisan. Sharraxaadda waxyaabihii la ogaadey: Dib-u-eegisteenna ku aaddan hirgelinta nidaamka Bisan ayaa muujisay waxyaabahan soo socda: - La'aanta habraac rasmi ah oo lagu ogeysiinayo agaasimaha waaxda IT in uu hawl-gelinta ka joojiyo koontooyinka adeegsadaha waqtiga ku habboon ee shaqaalaha shaqada uga tagay iscasilaad ama shaqo ka joojin. - La'aanta dib-u-eegista gelidda adeegsadaha ee muddo ka-dibba mar lagu sameeyo hawlaha ay qabteen adeegsadyaasha si loo oggaado haddii ay jiraan waxyaabo aan caadi ahayn ee gelidda la bixiyay ama mudnaan kale ama gelid xad-dhaaf ah. - Eray-sireedyada (<i>passwords</i>) lagu kaydiyo bogga internet-ka laga adeegsado (<i>browser</i>) ayaa dib loogala soo bixi karaa oo waxaa la akhrin karaa isaga oo Qoraal Kaliya (<i>Plain text</i>) ah. Waxaan oggaaney in ay suuragal tahay adeegsadyaasha in ay eray-sireedkooda (<i>password</i>) ku kaydiyaan bogga internet-ka lagu adeegsado (<i>browser</i>) ka-dib marka ay galaan, tani khatarteeda ayay leedahay maadaama eray-sireedka (<i>password</i>) dib bogga loogala soo bixi karo isaga oo qoraal kaliya (<i>plain text</i>) ah. - Barnaamij la dagaalanka fayraska (<i>antivirus</i>) laguma dejinin kombiyuutarada la wada adeegsado ee hay'adda, taas oo hay'adda halis u gelin karta in aysan muddo dheer shaqayn haddii kombiyuutarada la wada adeegsado uu fayras haleelo. Waxaan oggaaney in Dowladda ay hadda adeegsanayso barnaamijka la dagaalanka fayraska (<i>anti-virus</i>) bilaash ah oo laga heli karo baraha internet-ka oo aan la isku halleyin karin maadaama laga yaabo in uu bixiyo oo kaliya ilaalin xaddidan. - Kala-saarid la'aanta xuquuqaha gelidda, hadaba waxaan ogaaney Sarkaalka Dakhliga in uu awoodo in uu macaamulaadka ku diiwaangeliyo Nidaamka Maareynta Dakhliga isla markaana uu anxisiyo. Maamulka wuxuu sheegay in sarkaalka uu kaligiisa ka shaqaynayay Waaxda Dakhliga ka-dib markii uu shaqada iska casilay Agaasimaha Dakhliga. Waxaan go'aaminay in gelidda kormeer la'aanta ah ee Sarkaalka Dakhliga uu galo RMS ay halis leedahay.	
Waxyaabaha ka dhalan kara: - Aqoonsiyada shaqaalaha shaqada laga joojiyay ayaa waxaa weli laga yaabaa in ay ku shaqeeyaan system-ka waxaanna loo adeegsan karaa in si khaldan loogu fuliyo macaamulaad maaliyadeed, macaamulaadka noocaas ahi kaliya ma noqon doonaan kuwo aanan la oggolaan balse waxaa kaloo dhici karta in aan la iskula xisaabtamin. - La'aanta dib-u-eegista gelidda adeegsadaha ee muddo ka-dibba mar la sameeyo, gelidda xad-dhaafka ah ee adeegsadyaasha ayaa sii jiri karta waxaanna laga yaabaa in aan goor hore la aqoonsan hawlgallada leexsan (aan caadiga ahayn) ee nidaamka. Tani waxay cawaaqib-xumo ku reebi kartaa hawlgallada sida in isdabamarin lagu sameeyo xogta muhiimka ah ee lagu kaydiyay nidaamka.	

- c) Xisaabaadka adeegsadaha ayaa laga yaabaa in xuquuqo xad-dhaaf ah ay u qoondeeyeen maamulayaasha nidaamka, si ula-kac ah ama si aan ula-kac ahaynba, taas oo jebinaysa shuruudaha hay'adda.
- d) Isticmaalka barnaamijka la dagaalanka fayraska (*Antivirus*) oo wakhtigiisii dhammaaday ayaa xogta hay'adda u keenaysa in ay soo wajahaan weeraro kaga imaanaya burcadda internet iyo in aysan muddo dheer shaqayn.
- e) Kala-saarid la'aanta xuquuqaha gelidda RMS ayaa waxay keeni kartaa diiwaangelinno dakhli oo aan la ansixin ama wax-ka-beddelka xogta nidaamka ku jirta.

Qiimeynta heerka mudnaanta:

Mudnaanta 1aad – Tallaabo sixid degdeg ah ayaa loo baahan yahay.

Soo-jeedimo:

Waxaan ku talinaynaa in:

- a) Xisaabaadka adeegsadaha la aqoonsaday ee ay iska leeyihiin shaqaalaha shaqada laga joojiyay waa in si degdeg ah hawlgelinta looga joojiyaa. Waxaa intaa dheer, in ay Dowladdu diyaariso, diiwaangeliso oo ansixiso ay habraac jaango'an oo lagu nidaaminayo hannaankan looga noqonayo gelidda adeegsadaha. Marka shaqaale uu hay'adda ka tago, Agaasimaha Waaxda ICT waa in waqtigii loo baahnaa lagu wargeliyaa si loo xaqiijiyo in xisaabta adeegsadaha hawlgelinta laga joojiyo.
- b) Dowladdu waa in ay xaqiijisaa dib-u-eegista adeegsadyaasha oo muddo ka-dibba mar lagu sameeyo nidaamka iyada oo loo eegayo liiska kuwa ka tagay.
- c) Xisaabaadka adeegsadaha ee jira iyo xuquuqaha gelidda waa in dib u eegis lagu sameeyaa ugu yaraan si sannadle ah si loo oggaado xisaabaadka aan shaqayn iyo xisaabaadka leh mudnaan gaar ah oo xad-dhaafka ah.
- d) Barnaamijka la dagaalanka fayraska (*Anti-virus*) waa in Agaasimaha Waaxda IT uu meel dhexe ka maareeyaa uuna cusboonaysiiyaa.
- e) Si loo xaqiijiyo in ay jirto kala-saarid ku filan iyo xogta ku jira RMS oo kaamil ah marka kormeeraha uusan joogin, Agaasimaha Khasnadda waa in uu baaritaanno korjoogteyn joogto ah ku sameeyaa gudaha RMS.

Waafaqsanahay/ Ma Waafaqsanin: Waafaqsanahay

Faallooyinkii ay ka bixisey GSS:

- a) Foomka joogtaynta macmiilka ayaa si buuxda loo hirgelin doonaa si loo hawlgeliyo ama hawlgelinta looga joojiyo adeegsadyaasha nidaamka(system), tani horay ayay u jirtay mar kale ayaanna dib loo xoojin doonaa.
- b) Wax kasta ee uu adeegsadu ku sameeyo nidaamka (system) waxaa lagala socon karaa daqiiqad kasta tab-ka raadraaca ee fawjarada kala duwan ee nidaamka, dib-u-eegis bille ah ayaa tani waxaa ku sameyn doona Agaasimayaasha Waaxaha ICT iyo Khasnadda sannadka 2020.
- c) Waxaa ku cad kala-saaridda waajibbaadka dhammaan buugaagta Bisan oo uu ka mid yahay buugga RMS oo qeexaya xuquuqda gelidda ee saraakiisha kala duwan. Tani, si kastaba, dib ayaa loo eegi doonaa.

Cidda ka mas'uulka ah iyo taariikhda:

Agaasimaha Waaxda ICT. Degdeg ah

Waxyaabihii la ogaadey Ir°: 10aad	Cinwaanka: Xuquuqo wax-ka-beddel oo xad-dhaaf ah ayaa la siiyay Agaasimaha Waaxda IT
Shuruudaha: Mid ka mid ah mabaadii'da ugu muhiimsan ee amniga nidaamka (system) wanaagsani waa in aad iyo aad u yar tahay gelidda mudnaanta gaarka ah leh. Ku xadgudubka xisaabaadka heerka sare ah ama mudnaanta gaarka ah leh waa mid ka mid ah halisaha ugu khatarsan sababta oo ah waxaa aad u fudud in wax la fuliyo oo ay dadkana ku qaadato muddo dheer in la oggaado. Xaaladda ugu badan uguna fudud waa markii qof xog-ogaal ah u adeegsado rukhsado sharci ah hawlo dhibaato keena. Sharraxaadda waxyaabihii la ogaadey: Waxaan oggaaney in maamulaha ICT-ga uu si buuxda u geli karo dhammaan qaybaha kala duwan ee sistemka iyo in uu awoodo in uu isbeddelo sameeyo sida in uu qaladaadka saxo. Si kastaba ha ahaate, hawlahiisa ee sistem-ka ma jiro mas'uul sare oo si joogto ah dib-u-eegis ugu sameeya. Waxaan kaloo oggaaney in aannu jirin oggolaansho heer-labaad ah oo loogu baahan yahay sixitaanka ama wax-ka-beddel kasta ee ay sameeyso waaxda IT-ga.	
Waxyaabaha ka dhalan kara: La'aanta kala-saarid ku filan kantaroolada hay'adaha kala duwan iyo dib-u-eegisyo muddo ka-dibba mar la sameeyo ayaa sistem-ka u keeni kara halis ah in hawladeennada ICT ama isticmaalaha heerka sare ah ay ku kacaan hawl dhibaato keenta ka-dibna ay raadadkeedii qariyaan. La'aanta dib-u-eegisyo joogto ah oo lagu sameeyo xisaabaadka gelidda iyo diiwaannada baarista, hawlgallada aan caadiga ahayn ee sistem-ka FMIS goor hore lama oggaan karo sidaa darteedna waxay saameyn weyn ku yeelan karaan hawlgallada oo laga yaabo in ay horseedo midkood wax-isdabamarinta ama helidda xogta muhiimka ah ee ku kaydsan sistem-ka. La'aanta dib-u-eegis muddo ka-dibba lagu sameeyo hawlaha ay qabtaan adeegsadayasha doorar maamul ku leh dhammaan buugaagta muhiimka ah ayaa waxaa ay keeni kartaa xadgudub aanan la oggaan ee xuquuqaha gelidda iyo isdabamarinta xogta ku kaydsan sistem-ka. Maamulayaasha sistem-ka ayaa laga yaabaa in xisaabaadka adeegsadayasha ay u qoondeeyeen xuquuqo sameeye iyo hubiye, si ula-kac ah ama si aan ula-kac ahaynba, taas oo ka hor imaanaysa shuruudaha hay'adda xisaabaadkaanna waxaa loo adeegsan karaa in lagu fuliyo macaamulaad khayaamo ah oo lacag lagu lunsanayo oo ka dhasha qalad maaliyadeed iyo sharaf dhac ku ah.	
Qiimeynta heerka mudnaanta: Mudnaanta 1aad – Tallaabo sixid degdeg ah ayaa loo baahan yahay.	
Soo-jeedimo: Hawlaha adeegsadaha iyo maamulaha waa in ay noqdaan kuwa baaris iyo diiwaangalin lagu sameyo. Xisaabaadka adeegsadaha ee jira iyo xuquuqaha gelidda waa in dib loo eegaa ugu yaraan sannadkiiba mar si loo oggaado xisaabaadka aan shaqayn iyo xisaabaadka leh mudnaano gaar ah oo xad-dhaafka ah tusaale ahaan, xisaabaadka leh mudnaanta gaar ah oo xad-dhaaf ah waxaa ka mid ah: - Xisaab la hawlgeliyay oo loo qoondeeyay la-taliye dibedda ka ah ama shaqaale aan hadda u shaqayn Hay'adda. - Xisaab la hawlgeliyay oo leh xuquuqo gelin oo doorka iyo mas'uuliyadaha isticmaalaha u baahnayn gelid. - Xuquuqaha ama ruqsadaha maamulka sistem-ka (oo ay ka mid yihiin ruqsadaha lagu beddelayo hagaajinada amniga ee sistem-ka) waa in loo oggolaadaa adeegsade aan maamule ahayn. - Waa in ay jirtaa tallaabo oggolaansho heer 2^{aad} ah oo loogu baahan yahay wax-ka-beddel kasta ama sixitaanka qalad kasta ee uu system-ka ku sameeyo maamulaha sistem-ka.	
Waafaqsanahay/ Ma Waafaqsanin: Waafaqsanahay	

Faallooyinkii ay ka bixisey GSS:

Inkasta oo agaasimaha waaxda ICT uu ku leeyahay xuquuqo heersare ah sistem-ka iyada oo sabab u ah doorkiisa maamulaha sistem-ka ahaan, ma ahan doorka agaasimaha waaxda ICT in uu sameeyo gelinta xogta ama ansixinta ee sistem-ka

Cidda ka mas'uulka ah iyo taariikhda:

Xoghayaha Joogtada ah iyo Agaasimaha Waaxda ICT, Muddo dhexe

Waxyaabihii la ogaadey Ir°: 11aad	Cinwaanka: Liidashada Kantaroolada aqoonsashada, xaqiijinta iyo oggolaanshaha gelidda ee ICT-ga
Shuruudaha: Gelidda aan la oggolaayn ayaa waxay horseedi kartaa saameyn burbur keenta, kantaroolada gelidda adeegsadaha oo wax-ku-ool ah la'aantoodana hay'adaha waxay noqon karaan dhibbanayaasha hawlo dhibaatooyin keena sida, khiyaano maaliyadeed, iyo weerarro lagu soo qaado sistem-ka oo loo soo marayo diidmada adeegga, weerarrada ayaa gaar ahaan wax u dhimi kara nidaamyada internet-ka. Sharraxaadda waxyaabihii la ogaadey: Waxaan oggaaney in ay jiraan ku filnaansho la'aanta kuwan soo socota: - La'aanta inta jeer ee la oggol yahay in si aan ansax ahayn/qalad ah la isugu dayo in gudaha loo galo xisaabta ka hor inta aysan xisaabta is-xirmin - sistem-ka xisaabta kama xiro adeegsadayasha ka-dib markay galid qalad ah ay dhowr jeer isku dayaan. - Eray-sireedyada (<i>passwords</i>) lagu kaydiyo bogga internet-ka laga adeegsado ayaa dib loogala soo bixi karaa oo la akhrin karaa iyada Qoraal Kaliya (Plain text) ah. Waxaan oggaaney in ay suuragal u tahay adeegsadayasha in ay eray-sireedkooda ku kaydiyaan bogga internet-ka lagu adeegsado ka-dib marka ay galaan, tani khatarteeda ayay leedahay maadaama eray-sireedka dib loola soo bixi karo isaga oo qoraal kaliya (<i>plain text</i>) ah.	
Waxyaabaha ka dhalan kara: - Adeegsade kasta ee aan loo oggolaayn ee halay ruqsadaha gelidda ee adeegsadaha sisitem-ka ee mudnaanta gaarka ah leh wuxuu awoodi karaa in uu geysto waxyeello aad u fara badan. Xitaa haddii la helo aqoonsiga iyo eray-sireedka adeegsadaha caadiga ah, fikradda ah in adeegsadayasha lagula xisaabtamayo falalka ay geystaan ayaa la garab maray. - Qof weerar geystay oo arritan gabbaad ka dhiganaya ayaa meesha ka saari kara ilaalinta ama difaaca mashiinka uu leeyahay si uu u geysto weerarro dheeri ah. - Ka gaabinta in la cusboonaysiin waayo barnaamijka la dagaalanka fayraska (<i>antiviruses</i>) ayaa kombiyuutarada wasaarada u keeni kara in ay soo wajahaan xog isdabamarin iyo weerarro kaga yimaada burcadda internet-ka. - La'aanta barnaamij tababar rasmi ah oo loogu talagalay shaqaalaha oo dhan ayaa shaqaalaha u horseedi karta in aysan si ku filan ugu diyaarsanayn gudashada doorarkooda iyo mas'uuliyadahaoga waxayna keentaa shaqaalaha in ay wax ku bartaan qaab tijaabo iyo qalad ah sidaa darteedna waxay sameyn karaan qaladaad waxayna keeni kartaa in ay si aad ah ugu tiirsanaadaan saaxiibadooda shaqada ee sida wanaagsan u fahamsan sistem-ka. - Haddii ay dhacdo iscasilaadda hawladeennada muhiimka ee hay'adda, hawlgallada maalinlaha ee sistem-ka saameyn kuma yeelan doonto.	
Qiimeynta heerka mudnaanta: Mudnaanta 1aad – Tallaabo sixid degdeg ah ayaa loo baahan yahay.	
Soo-jeedimo: - Nidaamka (<i>system</i>) waa in uu adeegsadaa qaybtan ammaanka isla markaana oggolaadaa inta jeer ee la isku dayi karo gelidda aan ansax ahayn ka hor inta aan xisaabta ama koontada la xirin si looga hortaggo weerrada xoogga ah ama isku-dayada lagu jabsanayo. - Isku-dayo lagu geli karo nidaamka(<i>system</i>) oo la socosho ah waa in la sameeyaa. - Barnaamijka la dagaalanka fayraska (<i>Antivirus</i>) waa in uu meel dhexe ka maareeyaa maamulaha IT-ga oo eray-sireedna lagu ilaaliyaa. - Agaasimaha Waaxda IT-ga waa in uu hubiyaa in barnaamijka la dagaalanka fayraska (<i>Antivirus</i>) uu yahay noocii ugu dambeeyay.	

Waafaqsanahay/ Ma Waafaqsanin: Waafaqsanahay
Faallooyinkii ay ka bixisey GSS: • Waqtiga ka bixidda nidaamka (<i>system</i>) ayaa waxaa laga hagaajin karaa sistem-ka iyada oo la tagayo halka sistem-ka laga hagaajiyo (<i>system set up</i>). Nidaamka(<i>system</i>) wuxuu haatadan leeyahay waqti ka bixid inkasta oo waqtiga loo qabtay laga yaabo in uu dheer yahay. • Agaasimaha waaxda ICT ayaa wuxuu adeegsadayaaasha ku wargelin doonaa in aysan eray-sireedkooda sistem-ka ku kaydin labtobyadooda.
Cidda ka mas'uulka ah iyo taariikhda: Agaasimaha Waaxda ICT, Degdeg ah

Waxyaabihii la ogaadey Ir°: 12aad

Cinwaanka: Hiigsiga qiyaaso miisaaniyad sannadeed oo xad-dhaaf ah

Shuruudaha:

Xeerka PFM wuxuu dhigayaa “Ka dib marka uu Baarlamaanku ansaxiyo Miisaaniyad-Sannadeedda, Wasiirku waa in uu: Marka wasaaradda, hay’adda ama wakaaladda ay mas’uul ka yihiin dakhli-ururin, ka dalbado in ay diyaariyaan qorshe-sannadeed dakhli ururin oo loo kala jebebiyey bil-bil (bil kasta);”

Sharraxaadda waxyaabihii la ogaadey:

- a) Waxaan oggaaney in qiyaasaha miisaaniyadda GSS aysan ahayn mid caqligal ah sannadka dib u eegista, kaliya 27% ee canshuuraha iyo deeqaha miisaaniyadda la dejiyay ayaa la helay oo waxay ahaayeen labadii sano ee la soo dhaafay 2017 iyo 2016 sidan lagu sharxay shaxda hoose:

Sannadka	Lacag-qabashada	Qiyaasta Kama-dambeysta ee Qoondaynta	Lacag Ururinnada Rumooway	Farqiga u Dhaxeeya	Boqolkiiba Inta La Xaqiijiyay
2018	Canshuuraha	3,535,982	630,166	2,905,816	18%
	Deeqaha	4,130,255	1,406,464	2,723,791	34%
	Wadarta Guud	7,666,237	2,036,630	5,629,607	27%
2017	Canshuuraha	2,431,020	339,929	2,091,091	14%
	Deeqaha	3,545,020	5,269,068	(1,724,048)	149%
	Wadarta Guud	5,976,040	5,608,997	367,043	94%
2016	Canshuuraha	1,646,156	1,051,807	594,349	64%
	Deeqaha iyo dakhliga kale	1,882,250	807,750	1,074,500	43%
	Wadarta Guud	3,528,406	1,859,557	1,668,849	53%

- b) Waxaa intaa dheer, in aan oggaaney in dowladdu aysan diyaarin qorshayaasha dakhliga bilaha ee ah sida loo baahan yahay ee waafaqsan Xeerka PFM ee 2018.

Waxyaabaha ka dhalan kara:

- a) Diiwaanno miisaaniyadeed sax ah iyo qiyaaso miisaaniyadeed oo maangal ah la'aantooda, dowladda waxaa laga yaabaa in aysan awoodin miisaaniyadda in ay u adeegsato sida qalab qorsheyn oo wax-ku-ool ah ahaan.
- b) Missaniyadda oon dib u egis lagusameeynin waxay horseedi kartaa in ay howlaha muhiimka ee dowladda ey jogsadaan.

Qiimeynta heerka mudnaanta:

Mudnaanta 2aad - Tallaabo cayiman oo degdeg ayaa loo baahan yahay.

Soo-jeedimo:

Wasaaradda MOFED ee GSS waa in ay hubisaa;

- a) Marka ay diyaarinayso miisaaniyad-sanadeeda, tirada lacagaha qoondaynta ee la qiyaasay waa in xogtooda laga soo xigtaa isbeddeladii xaaladii hore iyo lacagaha la filayo in mustaqbalka la ururiyo.
- b) Dowladda waa in ay kordhisaa meelaha iyo waxyaabaha ay canshuurto. GSS waxaa in ay sidoo kale tixgelisaa shaqaalaynta la-taliyaha qaybta abaabulka maaliyadaha si uu ugu diyaariyo boroboosalada mashaariic ay maalgeliyaan hay'adaha gargaarka ee caalamiga ah uguna ololeeyo iyada oo lagu dadaalayo sidii lagu gaari lahaa qaybta Deeqaha ee ka midka ah qiyaasaha miisaaniyadda.

• Qorsheynta dakhliga bilaha ah waa in loo hirgeliyaa sida loo baahan yahay ee waafaqsan Xeerka PFM si loo xaqiijiyo in dowladda aysan ugu yaraan miisaaniyadda.
Waafaqsanahay/ Ma Waafaqsanin: Waafaqsanahay
Faallooyinkii ay ka bixisey GSS: Qiyaaso dakhli oo la isku halleyn karo ayaa la diyaariyay balse sababo la xiriira cadaadis siyaasadeed awgood, ayaa qiyaasaha loo kordhiyay iyada oo laga duulayo miisaaniyadda kharashaadka. Tani waxaa wax laga qaban doonaa sannadka 2020 iyada oo la hirgelinayo ilo badan oo dakhli ka soo xarooda iyo xiriir wanaagsan oo lala yeesho Dowladda Federaalka ee Soomaaliya (DFS) si loo soo bandhigo qiyaaso miisaaniyadeed ka turjumaya waxqabad dhab ah.
Cidda ka mas’uulka ah iyo taariikhda Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Muddo dhexe

Waxyaabihii la ogaadey Ir°: 13aad

Cinwaanka: Liidashada maareynta hawladeennada

Shuruudaha

Habka Xilgudasha Waaxda Shaqada iyo Shaqaalaha ee ugu wanaagsan waxaa uu u baahan yahay in macluumaadkan soo socda lagu hayo faylka hawladeennada rasmiga ah ee shaqaale kasta: Arjiga, Warqadda taariikhda waxbarashada iyo waxqabadka ee qofka, Warqadaha arjiga xulashada ka hor, Foomka warbixinta wareysiga shaqada, Xaqiijinta Waxbarashada, Xaqiijinta taariikhda shaqada, Xaqiijinta kale ee asalka, Foomka Xiriirka Xaaladaha Degdegga ah, Codsiga fasaxa aan caafimaadka ahayn iyo oggolaanshaha/diidmada fasaxa iyo Warqadda shaqo bixinta ugu yaraan.

Sharaxaadda waxyaabihii la ogaadey:

Waxaan ogaaney liidashooyinkan soo socda:

- Dib-u-eegista faylasha/galalka hawladeennada ayaa si kastaba ha ahaatee shaaca ka qaaday in ay ka maqan yihiin ama aan lahayn Qiimeynta waxqabadka, Tababarka xil-la-wareegidda iyo faahfaahinnada fasaxa ee Shaqaalaha Joogtada ah. Sidoo kale, waxaan ogaaney xaalado galalka hawladeennada aysan ku jirin Kaararka Aqoonsiga Qaranka (Teestarooyin) ama Baasaboorka Qaranka si loogu aqoonsado shaqaalaha.
- Waxaan ogaaney xaalado shaqaale aysan bixin ogeysiis ku filan marka ay iska casilayaan jagooyinkooda. Xeer-nidaamiyayaasha shaqaalaha waxay shaqaalaha uga baahan yihiin in ay bixiyaan ogeysiis bil ah marka ay iscasilayaan. Tusaalooyinka xaaladaha aan wax ogeysiis ah la bixin waa kuwan soo socda:

Lr. Aqoonsiga Shaqaalaha:	Taariikhda iscasilaadda:	Maalinta shaqada ugu dambeysay sida ku xusan warqadda iscasilaadda:
MOFED 0026	1/9/2018	1/9/2018
MOFED 0002	29/01/2018	29/01/2018
AG 0002	22/02/2018	22/02/2018
MOFED 0013	Nofembar 2018	Ma bixin warqad iscasilaad ah

Waxyaabaha ka dhalan kara:

Diiwaannada hawladeennada oo aan dhammeystirnayn ayaa caqabad ku noqon kara tixraaca habboon ee diiwaannada, taas oo keenaysa caddeyn la'aanta xogta muhiimka ah ee ku saabsan shaqaalaha

Ka gaabinta in la bixiyo ogeysiis ku filan iyada oo loo hoggaansamiyo xeer-nidaamyada u degsan iscasilaadda ayaa waxaa ay keeni kartaa hufnaan la'aanta hawlgallada oo sabab u ah xil-wareejin aan munaasib ahayn.

Qiimeynta heerka mudnaanta:

Mudnaanta 2aad - Tallaabo cayiman oo degdeg ayaa loo baahan yahay.

Soo-jeedimo:

Shuruudaha muddada ogeysiiska waa in la dhaqangeliyaa si waafaqsan dhabbetusayaasha Waaxda Shaqada iyo Shaqaalaha ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah (CSC) ee GSS.

Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah waa in uu xaqiijiyaa in la joogteeyo galalka shaqaalaha ee hawladeennada. Fayl/Gal kasta waa in uu leeyahay liisto-hubineed jaango'an oo sheegaysa

dokumentiyada ugu yar ee loo baahan yahay in ay ku jiraan galka shaqaalaha. Dib-u-eegisyo joogto ah oo lagu sameynaya faylasha waa in la sameeyaa si loo xaqiijiyo in dokumentiyada oo dhami la joogteeyo.
Waafaqsanahay/ Ma Waafaqsanin: Waafaqsanahay
Faallooyinkii ay ka bixisey GSS: Dib-u-eegista waxqabadka ee shaqaalaha joogtada ah ayaa la sameyn doonaa 2020 waxaanna guud ahaan la sii wanaajin doonaa maareynta diiwaannada shaqaalaha.
Cidda ka mas’uulka ah iyo taariikhda: Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah. Muddo dhexe

Waxyaabihii la ogaadey Ir°: 14aad	Cinwaanka: Liidashada kale ee kantaroolka
Waxaan ogaanney liidashooyinka kale ee kantaroolka ee soo socda:	
Shuruudaha	Sharraxaadda waxyaabihii la ogaadey
Sida ku cad Buugga Habraacyada Dakhliga / Kharashaadka iyo Maareynta Maaliyadeed ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS) qaybta Oggolaanshaha Ballanqaadka iyo gaar ahaan Lifaafa A Tilmaamka foomamka khasnadda gaar ahaan Foomka 2aad: Amarka Bixinta Lacagta La Ballanqaadey (Commitment and Payment Order (CPO) Tilmaamaha faahfaahsan waxaa ay dhigayaan in: • Qaybtan koowaad ee foomka CPO ay tahay in ay buuxiso Wasaaradda kharashka bixinaysa • Sarkaalka Codsanaya ee Wasaaradda waa in uu saxiixo si uu u xaqiijiyo in Ballanqaadka loo baahan yahay si loo daboolo baahiyada Wasaaradda. • Sarkaalka Ansixinaya ee Wasaaradda (inta badan madaxa Wasaaradda) waa in uu saxiixo marka naftiisa/nafteeda ay ku qancaan in: • Soo-jeedintu ay waafaqsan tahay siyaasadaha GSS; iyo • Kharashka la soo-jeediyay si hufan oo taabagal ah loogu bixin doono lacagaha dowladda ee laga heli karo Miisaaniyadda Iskudhafan ee GSS ee loogu talagalay barnaamijyada hirgelinaya siyaasadahas. • Xisaabta Qoondeynta ee Miisaaniyadda Iskudhafan ee GSS in la qoondeeyay, iyada oo kharashka meel la saari karo.	Waxaan ogaanney in ay jiraan xaalado qaybaha Amarka Bixinta Lacagta La Ballanqaadey (CPO) ee loogu talagalay waxaa diyaariyey iyo waxaa ansixiyay aysan saxiixin shaqaalaha kala duwan ee awoodda u leh. Amarka CPOs sidoo kale ma laha sharraxaadda kharashka ay tahay in la bixiyo.
Hab-dhaqanka xisaabaadka wanaagsani wuxuu u baahan yahay in marka mucaamalaad lagu diiwaangeliyo nidaamka xisaabaadka oo lacag-bixinnadana la dhaqangeliyo, dokumentiyada taageerada ayaa waajib ah in lagu shaabadeeyo “LA BIXIYEY” AMA “LA DIIWAANGELIYEY”. Tani waxaa ay ka dhigeysaa lacag-bixinta in la buriyo waxaa ayna gacan ka geysanaysaa in laga fogaado badinta lacag-bixinnada, sidaa ayaa inta badan dhacda haddii hay’adda ay maamulayso in ka badan hal mashruuc oo ilo dhaqaale oo kala duwan.	Waxaan ogaanney in dhammaan dokumentiyada taageeraya kharashka sida qaansheegyada iyo fawjarrada rasiidka in aan lagu shaabadeyn “LA BIXIYEY” AMA “LA DIIWAANGELIYEY” si loo buriyo dokumentiyada taageerada marka lacag-bixinnada la bixiyo.

Waxyaabaha ka dhalan kara:

Liidashooyinka kantaroolka ayaa waxaa ay yareeyaan taabogalnimada kantaroolada taas oo kordhisa in la ogaan waayo halista khaladaadka iyo sharci jebinta

Qiimeynta heerka mudnaanta:

Mudnaanta 2aad - Tallaabo cayiman oo degdeg ayaa loo baahan yahay

Soo-jeedimo:

Waxaan ku talineynaa in la raaco dhabbetusayaasha lacag-bixinta ka hor inta aan la siin wax lacago ah kuwa laga soo iibsado alaabooyinka iyo adeegyada.

Marka la eego dokumentiyada dhinac saddexaad, marka macaamulaadka lagu diiwaangeliyo nidaamka xisaabaadka oo lacag-bixinnada la dhaqangeliyo, dokumentiyada taageerada ayaa waajib ah in lagu shaabadeeyo "LA BIXIYEY" AMA "LA DIIWAANGELIYEY". Geeddi-socodkan burinta ee lacag-bixinnada waxaa ay gacan ka geystaan in laga fogaado badinta mucaamalaadka ee loo sameeyay si ula-kac ah ama il-duuf mid uu ku yimaadaba.

Waafaqsanahay/ Ma Waafaqsanin: Waafaqsanahay

Faallooyinkii ay ka bixisey GSS:

Dhammaan Amarrada Bixinta Lacagaha La Ballanqaadey (CPO) waxaa buuxin doona Wasaaradaha kharash garaynta, qayb kasta oo ka mid ah CPO si sax ah ayaa loo buuxin doonaa, loo xaqiijin doonaa oo loo ansixin doonaa. Shaabadeynta LA BIXIYEY ee dokumentiyada taageerada waxaa la bilaabi doonaa sannadka 2020.

Cidda ka mas'uulka ah iyo taariikhda:

Agaasimaha Waaxda Khasnadda / Agaasimaha Wax-soo-iibsiga: Degdeg ah

3. LA SOCOSHADA/ KA DABA TEGISTA WAXYAABIHII LAGU OGAADEY HANTIDHOWRKII HORE

Baaristii/hantidhowrkii sannadkii dhammaadey 31ka Disembar 2017 waxaa la sameeyay intii u dhaxeysay bishii luulyo iyo Agoosto 2018, warqaddii maamulka ee ka soo baxday baarista/hantidhowrka ayaa waxaa la soo gebogabeeyay oo la siiyay Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MOFED) ee GSS bartamihii bishii Febraayo ee 2019. Waxaan oggaaney in uu xaddidnaa waqtigii loo helay hirgelinta soojeedimadii ka soo baxay baaristii hantidhowrka ee 2017 ee ku saabsanaa hawlgalladii sannadka 2018. Xaaladda soojeedimadii hantidhowrka ee sannad maaliyadeedkii dhammaaday Disembar 2018 waa sida soo socota:

Lr.	Cinwaanka Waxyaabihii la ogaadey	Soo-jeedimo	Xaaladda	Faallooyinkii ay ka bixisey GSS	Gebogebo
1.	Hoos-u-dhigidda lacagta soo gasha	a) Waa in kala duwanaanta la baaro oo lagu sameeyo wax-ka-beddelka loo baahan yahay. b) GSS waa in ay si joogto ah uga hesho Dowladda Federaalka (DFS) bayaamada xisaabta ka-dibna waa in ay iswaafajiso iyada oo la eegaysa diiwaannada GSS c) Caddaymaha maaliyadaha ay FGS ama dhinacyada kale ee dibadda ku shubeen xisaabaadka banki ee GSS waa in la siiyaa GSS iyada oo u haynaysa sida qayb ka mid ah dokumentiyada taageeraya dakhliga ahaan. d) Habraacyada ka-warbixinta maaliyadeed ee bilaha ah ama dhammaadka sannadka ee Wasaaradda Maaliyadda GSS waa in ay ka mid yihiin iswaafajinta buuxda ee maaliyadaha la helay marka loo eego ilaha maaliyadaha, qadarka bankiga lagu shubey iyo rasiidyada taageeraya.	Lama hirgelinin. Xaalado la mid ah ayaa la oggaadey sannadkan hadda socda. U noqo waxyaabahii la ogaadey ee Lr. 1aad	Waxaa looga faallooday Waxyaabahii la ogaadey ee Lr. 1aad	Waxyaabihii la ogaadey lama xirin.
2.	Sii wanaajinta habraacyada Iswaafajinta Bankiyada	a) GSS ay ka fiirsato in ay dib-u-eegto oo ay naqtiimiso Buugga Habraacyada Deeqaha si ay u diyaariso iswaafajinta bankiga oo bille ah halkii midda toddobaadlaha. b) In bayaamada iswaafajinta bankiga loo diyaariyo, loo eego oo loo ansixiyo si waafaqsan shuruudaha Xeerka PFM. Caddaynta dib-u-eegista iyo ansaxinta waa in lagu muujiyaa sida ay u muuqato iswaafajinta bankiga. Tani waxaa ka mid ah sheegidda taariikhda iyo jagooyinka dib-u-eegayaasha iyo ansixiyayaasha Tani waxaa ka mid ah sheegidda taariikhda iyo	Lama hirgelinin. Xaalado la mid ah ayaa la oggaadey sannadkan hadda socda. U noqo waxyaabahii la ogaadey ee Lr. 2aad	Waxaa loogu faallooday Waxyaabahii la ogaadey ee Lr. 2aad	Waxyaabihii la ogaadey lama xirin.

		jagooyinka dib-u-eegayaasha iyo ansixiyayaasha. c) GSS waa in ay xaqiijinnada faahfaahinta xisaabaha banki ugu darto sida qayb ka mid ah habraacyada dhammaadka sannadka oo waafaqsan buugaagta habraaca.			
3.	Liidashada dhigista bankiyada lacagaha ka yimaada Dowladda Federaalka ee Soomaaliya (DFS)	Kala duwanaanta la aqoonsadey waa in la iswaafajiyo oo sixitaannada loo sameeyo hadba sida loogu baahdo. Bayaamada maaliyadeed waa in laga soo qaato diiwaannada xisaabaadka aasaasiga ah. Lacagaha ay hesho waa in la iswaafajiyo maaliyadaha ay run ahaan u heshay, dhammaan maaliyadaha waa in la soo diro iyaga oo loo soo marsiinayo nidaamka xawilaadaha maaliyadda ee bankiyada kaashka la ururiyeyna waa in si degdeg ah bankiga loogu shubaa isaga oo kaamil ah.	La hirgeliyay.	Aan Ku Habboonayn	Waxyaabihii la ogaadey lama xirin.
4.	Liidashada Kantaroollada Dakhli Ururinta	Tallaabooyin waa in la isla meel dhigaa si loo sii wanaajiyo kala-saaridda waajibaadka dakhli ururinta. Nusqaamaha ama daldalloolada ka jira dakhli ururinta waa in dib loo eego oo kantaroollada la xoojiyo iyada oo lagu darayo habraacyadan soo socda: a) Canshuur qaadayaasha waa in ay adeegsadaan lambarka tixraaca ee uu soo saaro nidaamka (system) ka dibna waa in ay ku daraan kooxda rasiidyada gaarka ah ee isku noqonaya qadarka guud ee lacagta bankiga lagu shubey maalintii. Fawjarrada rasiidka loo yeelay lambarrada taxanaha ah ee loogu talagalay dakhli ururinta ka sokow, buugaagtan rasiidka waa in la soo saaro iyaga oo raacaya tiro xisaabeed isku xigxigta si loo sii wanaajiyo la-xisaabtanka. b) Canshuurta la qaadey waa in si degdeg ah bankiga loo geeyo iyada oo kaamil ah. c) Sarkaal aan ku lugta lahayn dakhli ururinta waa in uu si joogto ah oo maalinle ama toddobaadle ah u sameeyaa iswaafajinta dakhliga la ururiyay iyo lacagaha bankiga la geeyay. Iswaafajintan waa in ay dib-u-eegaan saraakiil sarsare.	Lama hirgelinin. Xaalado la mid ah ayaa la oggaadey sannadkan hadda socda. U noqo waxyaabahii la ogaadey ee Lr. 1aad	Hannaanka dakhli ururinta waxaa lala eegi doonaa baaristii dhowaan ay sameysay Qaybta Hantidhowrka Gudaha. Waxaa looga faallooday waxyaabahii la ogaadey ee Lr. 1aad	

		d) Dakhliyada lagu diiwaangelinayo nidaamka FMIS waa in tixraac loo yeelo iyada oo la adeegsanayo tixraacyo la mid ah kuwa ka muuqda buugaagta rasiidka ee loo yeelay lambarrada taxanaha ah.			
5.	Lacag-bixinno si aan ku filnayn loo taageeray	a) Waxaan ku talinaynaa in maamulka uu xaqiijiyo in nidaamyada maamulka maaliyadda ee jira in la raaco sidaa awgeed ayaa waxaa la diyaarin karaa oo la joogteyn karaa diiwaannada xisaabaadka ee habboon si loo taageero dhammaan kharashaadka ku baxay hirgelinta barnaamijka. b) GSS waa in ay diyaariso jadwalka dokumentiyada la filayo in loo helo qaybaha kala duwan ee mucaamalaadka. c) Dokumentiyada asalka iyo caddeymaha kale ee taageeraya dhammaan mucaamalaadka waa in loo hayo dib-u-eegista mustaqbal. d) Waxaan ku talinay sahaydu in ay leedahay tiro iyo qiimaha shey kasta taas oo laga hubin karo in uu macquul yahay.	Lama hirgelinin. Xaalado la mid ah ayaa la oggaadey sannadkan hadda socda. U noqo waxyaabahii la ogaadey ee Lr. 4aad	Waxaa looga faallooday waxyaabahii la ogaadey ee Lr. 4aad	Waxyaabihii la ogaadey lama xirin.
6.	Isticmaalka xad-dhaafka ah ee lacag-bixinnada Kaashka ah	GSS waa in ay yareyso ku tiirsanaanteeda lacag-bixinnada kaashka ah. Waxaa ay taa ku gaari kartaa iyada oo xaddidaysa heerka lacag-bixinnada kaashka ah oona ku soo rogaysa xadad sare. Lacag-bixinnada nidaamka bankiyada iyo lacagaha la isugu kala xawilo telefoonnada oo laga heli karo Soomaaliya waa in loo adeegsado bixinta lacagaha ka-faa'iideystayaasha. Lacag-bixinta kaashka ah waa in laga dhigo inta ugu yar ama waa in keliya lagu adeegsado xaaladaha aan laga fursan karin.	Lama hirgelinin. Xaalado la mid ah ayaa la oggaadey sannadkan hadda socda. U noqo waxyaabahii la ogaadey ee Lr. 5aad	Waxaa looga faallooday waxyaabahii la ogaadey ee Lr. 5aad	Waxyaabihii la ogaadey lama xirin.
7.	Liidashada geeddi-socodka wax-soo-iibsiga	Si loo hubiyo in qiimaha lacagta la helo marka la bixinayo qandaraasyada, GSS waa in ay hubiso in geeddi-socodka lagu tartamo la adeegsado marka la soo iibsanayo alaabooyin iyo adeegyo oona loo helo dokumentiyo taageeraya si loo muujiyo habraacyadaas iyo go'aamada wax-soo-iibsiga ee la gaarey.	Lama hirgelinin. Xaalado la mid ah ayaa la oggaadey sannadkan hadda socda. U noqo waxyaabahii	Waxaa looga faallooday waxyaabahii la ogaadey ee Lr. 6aad	Waxyaabihii la ogaadey lama xirin.

Dowlad-Goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS)
Warqadda Maamulka
Ee Muddada 1da Jannaayo 2018 ilaa 31ka Disembar 2018

			la ogaadey ee Lr. 6aad		
8.	Hantidhowrka Guud oo goor dambe loo soo bandhigey Bayaamada Maaliyadeed si uu u baaro	Wasaaradda Maaliyadda waa in ay dejisaa habab lagu hubinayo in diyaarinta bayaamada maaliyadeed lagu soo gebogebeeyo muddada waqtiga ee uu cayimey sharciga u habboon.	La hirgeliyay.		La xiray.
9.	Liidashada maareynta hantida	Hubi in qiimaha hantida lagu diiwaangeliyo Bayaamada Maaliyadeed iyada oo la raacayo diiwaanka hantida ee sannadka soo iibsiga. Waxaa lagama maarmaan ah in la iswaafajiyo diiwaanka hantida maguurtada ah iyo Bayaamada Maaliyadeed. Hubi in diiwaanka hantida la joogteeyo iyada oo lagu qorayo dhammaan macluumaadka muhiimka ah sida qiimaha hantida si loo hubiyo kantarool taabagal ah iyo la-socoshada hantida.	Lama hirgelinin. Xaalado la mid ah ayaa la oggaadey sannadkan hadda socda. U noqo waxyaabahii la ogaadey ee Lr. 7aad	Waxaa looga faallooday waxyaabahii la ogaadey ee Lr. 7aad	Waxyaabihii la ogaadey lama xirin.
10.	Liidashada maareynta hawladeennada	Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee GSS oo kaashanaya Wasaaradda Maaliyadda waa in ay ku dadaalaan hubinta in diiwaannada hawladeennada oo dhammeystiran laga hayo xubnaha shaqaalaha joogtada ah iyo in kuwan si joogto ah loo joogteeyo.	Lama hirgelinin. Xaalado la mid ah ayaa la oggaadey sannadkan hadda socda. U noqo waxyaabahii la ogaadey ee Lr. 13aad	Waxaa looga faallooday waxyaabahii la ogaadey ee Lr. 13aad	Waxyaabihii la ogaadey lama xirin.
11.	Isticmaalka buugaag, siyaasado iyo habraacyo iyo xeer-nidaamiyeyaal aan la ansixin	Dowladda iyada oo u mareysa wasaaradda maaliyadda waa in ay hubiso in loo hoggaansamo qodobbada Xeerka PFM ee 2017 si loo ansixiyo dhammaan xeer-nidaamiyada iyo habraacyada hawlgalka caadiga ah.	La hirgeliyay.	Aan loo baahnayn	La xiray.
12.	Liidashada kale ee kantaroolka: (a) CPO-yada lama oggolaan (b) CPO-yada ma laha	Waxaan ku talineynaa in la raaco dhabbetusayaasha lacag-bixinta ka hor inta aan la siin wax lacago ah kuwa laga soo iibsado alaabooyinka iyo adeegyada.	Lama hirgelinin. Xaalado la mid ah ayaa la oggaadey sannadkan	Waxaa looga faallooday waxyaabahii la ogaadey ee Lr. 14aad	Waxyaabihii la ogaadey lama xirin.

Dowlad-Goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS)
Warqadda Maamulka
Ee Muddada 1da Jannaayo 2018 ilaa 31ka Disembar 2018

	sharxaadda a kharashka		hadda socda. U noqo waxyaabahii la ogaadey ee Lr. 14aad		
(c)	Dokumentiyo taageero oo aan burin "LA BIXIYEY" AMA "LA DIIWAANGE LIYEY"				